# WASAARADA XANAANNADA XOOLAHA

## SHARCIGA BAADHISTA & ILAALLINTA HILIBKA

# JAMHUURIYADA SOMALILAND

## SHARCIGA BADHISTA & ILAALINTA HILIBKA

**Tusmada Buugga** **Boka**

## Qaybaha

**QAYBTA 1- GOGOL XAADH** **4**

1. Tixraac 4
2. Tarjumida erayada 4

**QAYBTA II-** Ilaalinta faya-dhowrka iyo ahmiyadaha kale ee gowraca xoolaha ka hor 8

3. Faya-dhowrka khuseeya wax soo saarka asaasiga ah. 8
4. Faya-dhowrka calafka xoolaha. 8
5. Faya- dhowrka deegaanka. 9
6. Faya-dhowrka iyo badbaada safrinta xoolaha gowraca. 10
7. Faya-dhowrka xoolaha gowraca ka hor iyo xiliga qaliinka lagu jiro. 11

**QAYBTA III-** Maamulka sharcigan iyo arrimaha la xidhiidha ruqsad bixinta. **12**

8. Maamulka: 12
9. Dabagalka mabaadiida khatar gelin karta fay-dhowrka 13
10. Dabagalka xafidaada diiwaanka iyo warbixinaha silsilada cuntada. 13
11. Shuruudaha looga baahan yahay ruqsada
12. Codsiga bixinta ruqsada. 15
13. Mudada, bedelaada ruqsada.
14. 16

**QAYBTA IV- CIQAABAADKA**

**QAYBTA V -** Adeegyada kala duwan 17

15 Sugida hilibka macamiisha 17
16 Kala saarida iyo cadaymaha kawaanada gowraca xoolaha 18
17 Xuquuqda saraakiisha 18
18 Awooda amar bixinta qawaaniinta 18

**JADWALKA I-** Kawaanda hilibka dibada loo dhoofiyo 21

**Qaybta 1- Qaybta 14** 21-54

**LIFAAQ 1** 55-57

**JADWALKA II-**Kawaanada gowraca xoolaha maagaalooyinka iyo tuulooyinka 66

**Qaybta1-Qaybta 13** 66-78

**JADWALKA III – Digaaga** 78

**Qaybta1-qaybta** 78-84

**LIFAAQ 2** 84

**JADWALKA IV – Safrinta hilibka** 88

**Qaybta 1- qaybta 7** 88-93

**JADWALKA V- Jumlada iyo Tafaariiqda iibinta hilibka** 97

**JADWALKA VI – Shuruucda soo saarida hilibka** 103

**Qaybta 1- qaybta 4** 103-106

**JADWALKA VII- soo dejinta hilibka** 107-108

**JADWALKA VIII- Khidmada baadhista** 109-110

**JADWALKA IX- Foomka sharciyeysan ee Qaran** 111-118

**JAMHUURIYADA SOMALILAND**

## Sharciga baadhista iyo ilaalinta hilibka

Sharcigani waa sharci baarlamaani ah oo xoojinaya baadhista iyo ilaalinta hilibka, horumarinaya badbaada iyo caafimaadka dadweynaha, iyada oo la raacayo shuruucda ilaalinta xoolaha qaliinka, qaybinta hilibka gudaha iyo dibada loo dhoofiyo iyo arrimaha kale ee khuseeya mow-duucan

**Sharcigan waxaa ansixiyey Golaha wakiilada ee Jamhuuriyada Somaliland**

**Qaybta 1- Gogol xaadh**

**Tixraac**

1. Sharcigan waxaa lagu magacaabaa "sharciga dowladda ee baadhista iyo ilaalinta hilibka".

**Turjumida Ereyadda**

2. (1) Si loo fahmo macnaha guud ee sharcigan, waxaa loo baahan yahay eray bixinta soo socota:-

"Act" waxaa loola jeedaa Sharciga dowladda ee baadhista iyo ilaalinta hilibka iyo xeer kasta oo hoos yimaada sharcigan;

"Animal" (Xoolo) - waxaa loola jeedaa xoolaha sida Lo'da, Geela iyo adhiga (ido iyo riyo), digaaga iyo xoolaha kale ee duur joogta ee hilibkooda dalka laga cunno.
"Carcass" Waa Hilibka saafiga ah ee xoolaha ama neefka marka la qalo ee haraga, uur ku jirta, qajaafulaha lugaha iyo madaxa laga saaro ee la cuno
"Condemned" Waa neefka la qalay ee hilibkiisa baadhaha caafimaadka hilibku u *aqoon saday* in aanu dadku cuni Karin, sababo dhinaca caafimaadka daro, ka dibna

amray in la tuuro ama la daadiyo raqdiisa/hilibkiisa oo la fogeeyo meel ku haboona lagu duugo

"Competent authority" Waa mas'uul/mas'uuliin ka tirsan dawladda oo xirfad iyo aqoon sare u leh howshan ama hay'ad kasta oo Wasiirka howshan qaabilsan u idmado inay fuliyaan shaqo kasta oo sharciga baadhista iyo ilaalinta hilibka hoos yimaada;

"Director" Waa Agaasime ama qof mas'uul ka ah agaasinka adeegyada caafimaadka xoolaha waqtiga la joogo, magac kasta ha loogu yeedhee;

"Dressing"Waxaa loola jeeda kala saarida xubnaha xoolaha/neefka la qalay kuwa la cuno, sida hilibka saafiga ah, uur ku jirta, beerka, kalyaha, wadnaha iyo iwm, kuwa aan la cunin, sambabada, qanjaafulaha, candhada iyo haraga;

"Edible" (la cuni karo) – Waa wax kasta oo bini aadamka cunto u noqon kara, la cuni karo halka "Inedible" (aan la cuni karin) waa wax kasta oo bini aadamku aan cunto u noqon karin, aan la cunni karin;

"Equipment" (Qalab) – Waa qalabka aan cuntada ahayn ee loo adeegsado howlaha meelaha kawaanada gawraca xoolaha;

"Export Slaughterhouse" Kawaanada gawraca xoolaha ee hilibka dibada loo dhoofiyo ee Wasiirku shaaciyay in xoolaha dalka lagu qali karo, ka dibna hilibkooda loo diyaariyo in dibada loo dhoofiyo;

"Facility" Waa qalabka ama wax kasta oo fududeeya howlaha meelaha hilbika laga soo saaro ama lagu iibiyo jumlad iyo tafaariiq, sida kawaanada, dukaanada ee maskaradaha hilibka oo jumlad iyo tafaariiq loogu gado, iyo ujeedooyinka howlgalka hilib soo saarka, iyada oo la tiigsanayo Jadwalka VI, dhismaha qayb ka mid ah meelaha xoolaha lagu qalo ama aan ahayn, halkaas oo hilibka laga soo saaro, kadibna dadweynaha loo soo bandhigo si ay u iibsadaan;

"Food" (Cunto) -- Waa cunta kasta oo dadku quutaan;

"Food Business Operator" (Maamulaha Ganacsiga Cuntada) – Waxaa loola jeedaa shirkad kasta ama qof kasta oo masuul ka ah maamulka ganacsiga cuntada;

"Government" (Dowlad) – Waxaa loola jeedaa Dawladda Jamhuuriyada Somaliland;

"Hazard Analysis and Critical Control Point Scheme (HACCP") -- Waa hab maamulka fayadhowrka/nadaafada saameyneysa shaqsi kasta oo ka shaqeeya shirkadaha soo saara hilibka, iyada oo mar kasta la baadhayo, laga hortagayo, la yareenayo, la xadidayo khatarta ku imaan karta caafimaadka dadweynaha isticmaala hilibka xili hore;

"Health Stamp" (Shaabad Caafimaad) -- Waa Shaabada baadhaha caafimaadka hilibku ku calaamadeeyo (dhufto) xoolaha caafimaadka qaba ee la qali karo iyo hilibka u baadhay ee u fasaxay in la cuni karo.

"Lairage" (Xerada Xoolaha) – Waxaa loola jeedaa xerooyinka xoolaha lagu xareeyo ka hor inta aan la qalin;

"License" (Ruqsad) – Waa Ruqsad, ogolaansho, shahaado/cadeyn ama ogolaansho rasmi ah oo qoraal ah in loo haysto ka hor inta aan la galin howl kasta ama shaqooyin kasta oo hoos imanaya sharcigan;

"Local Slaughterhouse" Waa Kawaanada xoolaha lagu qalo ee dalka gudihiisa laga isticmaalo ee Wasiirku shaaciyey in xoolaha dalka lagu qalo, ka dibna hilibkooda loo diyaariyo in suuqyada dalka lagu iibiyo/lagu istimaalo;

"Meat" (Hilib) – Waa dhammaan hilibka neefka la qalay ama qayb ka mid ah hilibkiisa ee cunto ahaan loo cuno, ha ahaado hilib qaydhiin, mid cusub, la qaboojiyey, la barafeeyey ama la habeeyey;

"Meat Inspector" (Hilib baadhe) – Waa baadhaha caafimaadka hilibka oo aqoon sare iyo khibar leh oo u macaabay mas'uul sare si loo fuliyo shuruucda Jadwalka V si u guto shaqada baadhista hilibka ee halkan ku tilmaaman;

"Minister" (Wasiir) – Waa wasiirka waqtiga la joogo masuulka ka ah adeegyada caafimaadka xoolaha;

"Municipality" or "Municipal Authority" (Dowladda Hoose) – Waa qayb ka mid ah dowlada oo loo sameeyey dabagalka sharciga waafaqsan shuruucda Jamhuuriyada Somaliland;

"Offal" Waa qayb jirka xoolaha ka mid ah ee uur ku jirta xoolaha, sida caloosha, midhicirada, beeryarada, iyo wadnaha oo aan la qiimo ahayn hilibka kale ee la xidhiidha xoolaha la qalay ama xubnaha xoolaha ee la cuni karo ama aan la cuni Karin;

"Operator" (Shaqaale) – Waa qofka ka shaqeeya kawaanka iyo meelaha xoolaha lagu qalo;

"Passed" (la hubiyey) –Waa xoolaha la qalo ee dhakhar hubiyey (baadhay) ka dibna u fasaxay hilibka dadku cuni karo ama isticmaali karo;

"Processing" (Socodsiin) - Waa socodsiinta howlaha la xidhiidha gawraca xoolaha/neefka iyo jar-jarida xubnaha neefka, lafo ka saarida, cusbaynta, daaweynta iyo baakadeynta hilibka.

"Poultry" (Digaaga)- Waa noocyada digaaga guryaha ama shimbiraha gurya jooga ee hilibkooda lagu cuno wadanka;

"Poultry Carcass" (Xubnaha digaaga la qalay kuwooda la cunno) – Waa jidhka digaaga la qalay marka dhiig baxaan ee loo kala saaro xubnahooda, kuwa la cuni karo iyo kuwa aan la cuni karin;

"Quality Assurance" (kalsoonida tayada) – Waa hirgelinta dhammaan howlaha hore loo qoondeeyey oo nidaamsan ee nidaamka tayada loo baahan yahay si loo helo kalsooni buuxda oo meel marin karta waxyaalaha looga baahan yahay tayo wanaagsan;

"Regulations" (Xeerar) –Waa xeerarka /qawaaniinta uu ku dhisan yahay sharcigan;

"Risk-based" (Khatar ku saleysan) – Waa hanaan kasta oo la horumariyey iyada oo loo eegayo mabadi'da baadhista khatarta;

"Sale" (iib) – waa ka iibinta hilibka macaamiisha si ay guryahooda ugu qaataan una karsadaan isla markiiba;

"Slaughter" (Gowrac) – Waxaa loo la jeedaa xoolaha/neefka la gowraco ee u dhiig baxo ee loogu talagalay in dadku hilib ahaan u cuno/quuto;

"Slaughterhouse" (Kawaanada ama Meelaha Xoolaha lagu Gawraco) – Waa meel kasta oo Wasiirka howshan qaabilsan u sharciyeeyey inay noqoto xero-dhiig xoolaha lagu qalo, iyada oo la raacayo sharcigan;

"Vendor" (hilib iibiye/gade) – Waa qofka ka shaqeeya kawaanada ama meelaha la mid ka ah si u hilibka dadweynaha uga iibsho, ha ahaado mulkiilaha hilibka, mid la soo kiraystay ama mid wakiil ka ah mulkiilaha ama mid kawaanku soo kiraystay;

"Veterinary Inspector" (baadhaha caafimaadka hilibka) – Waa baadhaha caafimaadka hilibka, xirfadna u leh howshan oo ay magacaabeen madaxda sare si u guto howlaha faya-dhowrka hilibka, isaga oo hoos imanaya xeerarka sharcigan, wakiil ka ah hilib baadhayaasha sar sare ama madaxa dakhaatiirta caafimaadka xoolaha oo ah amar bixiyaha;

"Village Slaughterhouse" – (Kawaan Xaafad/Tuulo) – Waa kawaan ama meel xoolaha lagu gawraco oo aan weyneyn, adeeg hilib siiya Tuulada/xaafadaha, ogolaanshana ka haysta wasiirka masuulka ka ah sharcigan;

"Wholesaler" (hilib jumlad ku gate/iibisade) – Waa qofka hilibka kaga soo iibsada jumladа kawaanka si u tafaariiq ahaan u sii gado;

2) -(a) Sharcigan dawlada waxaa lagu turjumi Kara luqada rasmiga ah ee dalka lagaga hadlo, sida wasiirku u amar ku bixin doono, si ay u noqoto wax bixin wax ku ool ah;

b) Haddii iska horimaansho labada Luqadood ka yimaado (Waa turjumada qaybta Af Ingiriiska ku qoran ee sharcigan iyo luqada Af Somaliga), Turjumada ku qoran Luqada Af Ingiriiska ayaa rasmi ah ama qaalib ka noqoneysa tan Af Somaliga, iska horimaadkana wax aan jirin ayaa laga soo qaadayaa.

## Qaybta II—Dhowrida fayo-dhowrka iyo ahmiyadaha kale ee gawraca xoolaha ka hor

### Faya-dhowrka khuseeya wax soo saarka asaasiga ah.

**3-(1)** Qof kasta oo masuul ka ah gawraca xoolaha waa in:−

a) Uu fuliyaa talaabooyinka Agaasimuhu u baahan karo waqti kasta si loo hubsado in wax soo saarka qofkaas xoolihiisa la balan qaado, iyada oo markaas la dhimayo xoolaha khatarta sababi kara in hilibkooda u bini Aadamka dhib u keeno ama la quudan kari waayo;
b) Uu diyaariyaa una xafidaa diiwaanada warbixinada ee habka socodka wax soo saarka hilibka xoolaha haddii u Agaasimuhu u baahan karo.

2. Si looga hortago shaki kasta oo iman kara, qofka masuulka ka ah xoolaha la gawraco, isaga oo fulinaya waxyaabaha looga baahan yahay ee ku xusan qodobada (1) (b), waa inuu hayaa diiwaan qoran oo muujinaya:−

(a) Waxa u qabtay intii lagu jiray xilliga u idamaday Agaasimuhu ee lagu baadhayo laguna xakameynayo cudurada faafa ee ku dhaca xoolaha dadkana u gudbi kara ee ku dhex jiri kara xoolihiisa;
(b) Cudurada la sheegi karo ee uu la kulmay intii lagu jiray xilliga la cayimay, iyo waliba talaabooyinka uu ka qaaday ee ku saabsan daruufahan oo uu ku ogeysiinayo Wasiirka;
(c) Hababka faya-dhowrka ugu fiican ee u isticmaali jiray oo aan ku koobnayn oo kaliya daaweynta xoolihiisa/neefkiisa iyo weelka u ku quudin jiray, haddii ay jiraan hababkaas u ku isticmaali jiray xoolihiisa iyo deegaanka aay xoolihiisu ku nool yihiin;iyo
(d) Haddii ay jirtaba iyo haddii kaleba in u cadeyn karo in xoolihiisa dhammaan ay wax soo saar la haayeen, hadii ay jirto hab noocee ah ayuu ku cadeyn karaa.

3. Masuul kasta oo Xoolo leh oo buriya qodobada halkan ku qoran wuxuu galayaa gef/dambi waana lagu qaadayaa dambiga u galay…………..

**Faya-dhowrka calafka xoolaha**

4. (1) Qofna, ha ahaado xoolo dhaqato ama dilaal xoolaha iibiya looma ogola inuu xoolihiisa ku quudiyo cuntadan (alaabtan):-

(a) Cunto loo aqoonsaday ama keeni karta cudurada halista ah ee ku dhaca xoolaha una gudbi kara bini aadamka, sida cudurada la kala qaado ee dadka iyo xooluhu isku gudbiyaan, kadibna xoolahaas loo qalo dadweynaha;

(b) Cuntada walxaha kiimikada ay ku jiraan sida hadhaaga dawooyinka xoolaha iyo sunta cayayaanka beeraha ama alaab walxaha wax sumeeya ku jiraan oo sababi kara iyaga oo gufar ah/haraa ah ay ku dhagaan hilibka, dabadeena hilibka ka dhiga mid bini Aadamka dhibaato caafimaad dara ah ku keeni kara; ama

(c) Cuntada ku saleysan hababka dhaqanka iyo caadada, hadii uu og yahay inay caafimaad daro u keeni karaan dadka cunna hilibka ama wax soo saarka kale ee xoolaha lagu quudiyey weelka noocaas ah.

2. Qof kasta oo buriya qodobada halkan ku qoran (1) wuxuu galayaa gef/dambi, waana lagu qaadayaa dambiga u galay…………..

Dhinaca Dawladda iyada oo loo marayo wasiirka howshan qaabilsan waxaa ku waajib ah:-

(a) Dabagalka Diiwaanada iyo isticmaalka dawooyinka xoolaha, sunta cayayaanka, qalabka raashinka xoolaha lagu siiyo (quudiyo) iyo walxaha haraadiga kiimikada ah, aysan hilibka wax xidhiidh ah la yeelan, kuwaas oo ka dhigaya hilibka iyo wax soo saarka kale ee xoolaha kuwa aan ku haboonayn in bini aadamku isticmaalo;\

(b) Diyaarinta iyo xoojinta hab dhisyada baarista iyo dabagalka si loo sugo xog sax ah oo ku saabsan heerarka waxyeelada hadhaaga;

(c) Diyaarinta sharci dhigan oo ku wajahan khatarta ku saleysan, ama habab kale oo Wasiirka howshan qaabilsan u aaminsan yahay inay habboon tahay in la diyaariyo si loo xakameeyo khatarta hilibka ku iman karta;

(d) In la qaado talaabooyin kale oo midba mida kale ka dambeyso, talaabooyin kaas oo xaqiijinaya badbaadada hilibka iyo wax soo saarka hilibka.

## Faya-dhowrka deegaanka

4. Iyada oo lala kaashanayo hay'ada qaranka ee deegaanka u xilsaaran, wasiirka howshan qaabilsan waa inuu qaataa talaabooyin xaqiijin kara in wax soo saarka xooluhu uuna ku dhicin meelaha daruufaha khatarta deegaanka saameynta ku yeelan karta xagga badbaada hilibka halkaas laga soo saaray. Tani waxay tahay in wasiirka iyo hay'ada la soo sheegay ay:-

a) Yareeyaan ama khafiifiyaan khataraha laga hadlayo; iyo
b) U baahan yihiin shaqaale xaqiijiya in-

i) guryaha iyo gobaha cunta xoolaha lagu siiyo iyo meelaha kale ee ay ka jiri karaan cudurada xoolaha iyo dadku isu gudbiyaan kana faafi karaan ee ama khataraha kale ku ururi karaan waa in si fiican loo nadiifiyaa loona ilaaliyaa nadaafadooda iyo faya-dhowrka

ii) In la helo hab dhisyo howlaha socodsiiya iyo in la iska fogeeyo raqda xoolaha dhintay iyo haraaga wasakhda si halkaasi ayna uga iman cudurada dhiiga iyo lafaha ku dhaca, saameyn ku yeelan kara bini Aadamka iyo caafimaadka xoolaha.

iii) Walxaha Kiimikada ee loo adeegsado howlaha teknoolijiyada, shirkadaha iyo ganacsiga waa in la keydiyaa hab aan deegaanka, agabka quudinta loo adeegsado ama dhulka xoolo daaqsinta aan u keeneyn wasakh, iyo

iv) In la qaado oo la xoojiyo talaabooyinka kale ee lagama maarmaanka u ah jiritaanka deegaan badbaado sugan u leh wax soo saarka xoolo faya-qab leh.

### Faya-dhowrka iyo badbaada safrinta xoolaha gawraca

a. (1). Qofka kasta oo safrinaya xoolaha la qalayo waa in uu sugaa safarka xoolaha inuu yahay mid wanaagsan oo meesha ka saaraya dhib, dayacaad iyo jug soo gaadha xoolaha;

(2). Safriyaha xooluhu waa inuu si adag ugu kuurgala dhammaan xaaladaha xoolaha qalida loo wado isaga oo raacaya xeerka Jadwalka 1- qaytiisa 2 ee sharcigan.

(3). Safrinta xoolaha la qalayo waa in la adeegsada Shuruudaha Safrinta Xoolaha ee ku xusan Jadka 1- Qaybtiisa 2-aad, iyo xeerarka kale ee u yaal safrinta xoolaha dhaq-dhaqaaqooda, waqtiga hadba la joogo, haddiiba xeerarkaas uu ka dhaqan gashan yahay sharci qoran;

(4). Qof kasta oo ka horyimada sharciga halkan ku qoran (1) wuxuu galayaa gef/dambi, waana lagu qaadayaa dambiga u galay………………..

**Faya-dhowrka xoolaha inta lagu jiro gawraca iyo qaliinka xoolaha**

7-**(**1) Baadhaha caafimaadku waa inuu sugaa qodobadan soo socda gawraca Xoolaha ka ho:-

(a) Xoolaha loo keenay qaliinka waa in si fiican guud ahaan loo nadiifiyaa inta aan la qalin, si aanay u carqaladayn faya-dhowrka gowraca iyo harag ka saarista;

(b) Waa in xoolaha lagu hayaa xaalado yareyn kara wasakhda jeermiska cuntada iyo in neefka loo sahlo gawraca iyo harag ka saarida.

(c) Xoolaha oo dhan waa in la baadho gowraca ka hore

(d) Waa inay diyaar yihiin agabka baadhista (Anti-mortem) oo ay ka mid tahay "Science" (Cilmigga Sayniska) iyo agabka gargaarka deg dega ah, hadii ay timaado duruufo, iyo dhamaan warbixin waafi ah oo ku saabsan xoolaha heerkooda wax soo saarka hadiiba la heli karo;

(e) Qolka gawraco waa inuu nadaafad ahaan diyaarsan yahay, agabka lagu howlgalayana ay diyaar yihiin xilliga gawraca sida ku xusan xeerarka gawraca;

(f) Dhammaan howlaha la xidhiidha gawraca neefka iyo xubna saarkiisa iyo diyaarinta hilibka sida oo kale waxay u baahan yihiin in loo maro xeerarka fayadhowrka hilibka;

(g) Wixii warbixino ah ee la uruuriyey intii lagu jiray baadhista gowraca ka hor oo loo arko inay habboon tahay in loo gudbiyo masuulka xoolaha ama wixii kale ee sida deg dega ah u soo kordha waa in si dhaqsa ah loogu gubiyaa masuulka waqtiga ugu macquulsan;

2) Qof kasta oo ka horyimaada sharciga halkan ku qoran ama xeerarka kale ee khuseeya mow-duucaan, wuxuu galayaa gef/dambi, waana lagu qaadayaa dambigaa uu galay;

**Qaybta III – Maamulka sharciga ee la xidhiidha ruqsad siinta**

**Maamulka**

8. (1) Wasiirka howshaan qaabilsan baa masuul ka ah hergelinta sharcigani iyo dhammaan xeerarka hoos yimaada sharcigan, waa inuu gutaa dhammaan howlaha oo u adeegsadaa awoodaha sharcigani siinayo.

(2) Isaga oo la kaashanaya Agaasimuhu ama qof kale oo masuul ah, wasiirku waa inuu:

a) Magacabaa Maamulaha baadhaha caafimaadka Xoolaha, dhammaan baa
b) dhayaal sare ee caafimaadka xoolaha iyo shaqaalaha kale ee looga baahan karo hirgalinta sharcigan oo wasiirku u arko muhiim, waana inuu qalabeeyaa, awoodna u siiyaa howlahooda, kana cawiyaa tashiilaadka tababarkooda waqtiba waqtiga ka dambeeya si ay heer uga gaadhaan xirfadooda oo ay u ugutaan waajibaadkooda si xilkasnimo oo waafaqsan sharciga;

c) Isaga oo aan kala jeclaysanayn shaqaalaha uu magacaabay shaqooyinka ku xusan firqada (a) waa in uu hubiiyaa qofkasta oo shaqooyinka baadhista hilibka loo idmaday in uu u qabto sida ku xusan sharcigan, inay ahaadaan dad aqoon sare leh, lana siin karo tababar dheeraad ah haddii loo baahdo.

d) Isku xidhida hab dhismeedka maamulka iyo diyaarinta qorshe ay soo geli karaan hantilayaasha iyo ganacsiga xorta ah ee ku howlan suuqa hilibka, sababta oo ah in la sugo caafimaad hilibka iyada oo la wada xoojinayo hirgelinta sharcigan.

e) Diyaarinta ciidamo boolis ah iyo hay'adaha kale ee qaabilsan nabadgalyada si ay u dhaqan galiyaan sharcigan.

f) Xaqiijinta in la adeegsado hababka ugu fiican ee faya-dhowrka hilibka ee waafaqsan heshiisyada FAO/WHO iyo Ururka Caafimadka Xoolaha Aduunka (World Organization of Animal Health) iyo waliba kuwa ay doonayaan wadamada xoolaha loo dhoofinayo.

g) Waa in la qaadaa tilaabooyin kale oo ku salaysan sharcigan si looga qayb galiyo xoolo dhaqatada, culumaa'diinka iyo adeegyada kale ee laga heli karo

dalka gudihiisa, kuwaas oo aan ka hor imaanayn heerka looga baahan yahay faya-dhowrka iyo badbaada hilibka ee waafaqsan sharcigan;

h) In la Sameeyo wax kasta oo kale oo gacan ka geysan kara horumarinta iyo kor u qaadida heerka faya-dhowrka iyo badbaada hilibka dalka, ugu dambayna lagu guulaysto hergalinta sharcigan;

(3).Dhammaan dadka lagu magacaabay xeer-hoosaadka (2) (a) ee xeerkan, iyada oo aanan loo eegeyn magacaabidooda iyo jagooyinka dawlada u hayaan, waa inay yihiin kuwa sita shahaadooyin sare oo laga aqoonsan yahay Golaha dhakhaatiirta caafimaadka xoolaha, waxaana laga diiwaan galinayaa isla Golahan;

### Dabaqaada mabaa'diida khatar gelin karta fayo-dhowrka

9- (1) Shaqaale kasta waa inuu-

a) Diyaariya si adagna u adeecaa nidamaka hababka loo shaqeeyo, taas oo ujeedadeedu tahay dhaqan gelinta hababka fiican ee faya-dhowrka goobaha gawraca; iyo

b) Waa inuu kawaankiisa howlaha uu ka hayo ku dabaqaa mabaadiida khatar gelin karta faya-dhowrka, hadba duruufaha jira siday suuragal uga dhigaan, khaasatan gowraca iyo harag ka saarida xoolaha. Sida wasiirku tilmaamo hadba xiliga lagu jiro;

(2) Qof kasta oo ka horyimaada qodabada sharcigan ku xusan ee xeer hoosadka (1) wuxuu galayaa gef/dambi, waana lagu qaadayaa dambigaa uu galay;

### Dabagalka xafidaada diiwaanka iyo warbixinaha silsilada cuntada

10. (1) Shaqaale kastaa waa inuu hubiyo, xooga saaro oo dabagal ku sameeyo sisilada cunnada oo ah xerada ilaa afka qofka hilibka cunnaaya, sida Agaasimuhu amar ku bixiyo hada wakhtiga la joogo. Waana inuu ururiyey dhammaan xogta laga maarmaanka ah iyo qoraalada caawinaya dabagalka shaqada.

(2). Xog kasta oo laga ururiyo silsilada cunta sida ku qeexan xeer hoosadka (1) waa inuu hilib baadhuhu u gudbiyaa madaxa dhakhaatiirta baadhayaasha hilibka. Si loo qiimeeyo shaqada hilib baadhe kasta oo loo magacabay kawaaan aan wali la diiwaan galin waa in uu haysto diiwaan u ku qoro howl maalmeedkiisa.

a) Diiwaan gelinta tirada xoolaha la qalay iyo inta kiilo ee hilib ah ee uu soo saaray.

b) Meesha xoolaha ka yimaadeen iyo meesha hilibka la gaynaayo.

c) Natiijadii baadhitaanka hilibka

d) Waxyaalaha kale ee gaarka ah ee madaxa baadhayaasha hilibku u arko lagama maarmaan.

3) Warbixinaha iyo qoraalada la ururiyey sida ku qeexan heer hoosadka (1) ka sakow waa in uu hilib baadhuhu haysta diiwaan muujinaya waxyaalhan:-

a) Tirada, nooca, jinsiga, lambarka iyo astanta neef kasta wata soo galay kawaanka uu ka shaqeeyo sida agaasimuhu codsado hadba wakhtiga lagu jiro.

b) Meesha xooluhu ka yimaadeen

c) Meesha hilibka la geynayo.

d) Tirada hilibka soo baxay iyo natiijada miisanka iyo sida loo kala soocay.

e) Taariikhda Xoolaha la geliyey iyo taariikhda hilibku ka baxay kawaanka.

f) Haddii ay jiraan waxyaalo kale oo khaas ah oo wasiirku u qeexay darajada hilibka.

4) Buugga diiwaanka waa inuu mar kasta furnaadaa xiliyada shaqada lagu jiro, waa inuu u furnaadaa kormeer u ku sameeyo sarkaal howshan u idman ama qof howshan qaabilsan si ay qoraal/sawir uga qaataan qayb ka mid ah ama gabi ahaantiiba iyada loo isticmaalayo si sharciga waafaqsan.

5) Haddii qof aan howshan u idmanayni uu nuqul kale ka samaysto diiwaanka sida ku cad faqrada 3-aad, qofkaas waa inuu bixiyaa ganaax isaga oo Agaasimuhu u eegayo hadba waxa uu bedelay inta ay leeg tahay.

6) Qof kasta oo ka horyimaada sharciga halkan ku qoran wuxuu galayaa gef/dambi, waana lagu qaadayaa dambiga u galay**.**

## Shuruudaha looga baahan yahay ruqsada dhisme kawaan

11. Qof kasta oo doonaya inuu dhiso kawaan waa in u marka hore u soo gudiyo Agaasimaha warqadaha rasmiga ah ee soo socda

a) Codsi qoraal ah oo ku saabsan dhismaha kawaanka.

b) Si loo helo ogolaashaha dhismaha kawaanka, waa in la keeno inta aan la bilaabin dhismaha sawiro iyo tilmaamo dhamaystiran oo ka kooban qorshaha

sagxada dhulka oo ku tusaya meelaha qalabka muhiimka ah la dhigayo. Ilaha biyo saarka sibidhka, saaqiyadaha, suxuunta gacmo maydhka iyo isku xidhka tuubooyinka biyaha. Waxaa kale oo loo baahan yahay muujinta dhererka saqafka iyo in la muujiyo meelaha dhismayaasha qalabka ugu muhiimsan iskaga yimaadan, meelaha ugu muhiimsan, dhererka safiitada, sifooyinka biraha sibidhka sagxada iyo safiitada. Waxaa kale oo la soo gudbinayaa qorshaha cabirka dhulka ee dhismuhu ku fadhiisanayo iyo wareega dhulka, dhismayaasha kale ee ku yaala agagaarka dhismaha kawaanka, goobaha muhiimka ah iyo jidadka tariinka ee ka dhex shaqeeya kawaanka waxaas oo dhan waa inay ka muuqdaan naqshada. Waxaana la soo raacinayaa qorshaha ku talagalka qaabka u shaqaynayo kawaanku, sida berkadaha biyaha, qalabka korontada iyo kululeynta, qaboojinta, barafeynta, biya saarida iyo qashin saarka waxyaalaha aan la cunin ee xubnaha neefka la qalay

## Baahida ruqsad hellid ka hor inta aan la hawl gelin kawaanka

12-Qof aanan heysan ruqsad uu kaga howl galo kawaanada gawraca Xoolaha ama meel kale oo hilib lagaga shaqaynayo, sida dhoofinta hilibka, soo dajinta hilibka, rarida hilibka, qaybinta hilibka, jumlada hilibka iyo tafaariiq meel kasta oo dalka ka mid ah, ama inuu isku dayo wax yaabaha aan soo sheegnay isaga oo aan haysan wax ogolaasha ah, sida ku qeexan qaybta sharcigan.

## Codsiga bixinta ruqsada

13. (1) Codsashada ruqsad kasta oo loo baahdo ee qaybaha 10 iyo 11 ama xeerarka waa inay ahaadaan qaabka wasiirku ujeedadan ku tilmaamay

2) Codsiga waxaa lagu hagaayinayaa Agaasimaha ama qof u ku wakiishay qoraal ahaan in u qabto araajida, bixiyana ruqsada.

3) Haddii qof la siiyo ruqsada howlgalka kawaanka waa inuu buuxiyaa codsaduhu shuruudahan qoran:

a. Meesha dhabta ah ee kawaanku ku yaalo iyo haddii ay jiraan tas-hiilaad kale ee la xidhiidha howlaha kawaanka.

b. Astaamaha u gaarka ah meesha kawaanka ku yaal, habka biya saarka iyo wixii kale ee la xidhiidha, si loo daryeelo xaalada nadaafadeed.

c. Naqshad xirfadaysan oo la ansixiyey oo ka turjumaysa kawaanka, tashiilaadka kale ee yaala iyo awooda howsha gudihiisa lagu fulin karo.

d. Qoorshayaal faahfaahsan oo muujinaya tirada qolalka, howsha lagu fulin karo halkii qol, meelaha ay yaalaan qalabka muhiimka ah iyo agabka kale iyada oo la cadeenayo howsha lagu dhex fulin karo kawaanka;

e. Daraasad iyo Sawir muujinaya halka kawaanku ku yaal, agabkiisa iyo hantida ee taal meesha, iyado oo si cad loo qeexayo shaqada dhabta ah ee lagu qaban karo.

f. Iyo warbixinada kale ee Agaasimuhu u baahan karo;

4) Marka hilibka la diyaarinayo, dhoofintiisa, soo dajintiisa, raridiisa, qaybitiisa, jumlad iyo tafaariiq iibinta, codsiga ruqsada waa iuu waafaqsan yahay qawaaniinta khuseeya ruqsada iyo baahiyaha u tilmaamayo qaybta sharcigan.

5) Agaasimaha ama wakiilkiisu, waa inay go'aan ka qaataan codsiga sharci muddo 30 bari gudahood, uuna codsadaha sharciga qoraal ugu gudbiyaa go'aankiisa. Haddii codsigu ahaa mid sax ah oo lagu qancay, waa in Agaasimuhu u soo saaraa codsadaha sharciga ruqsada inta lagu jira 30 kaa bari gudahood, haddii aanu ku qancina, waa inuu codsadaha u qoraa warqad u ku sharaxayo sababta loogu diiday.

6) Ruqsad kasta oo lagu bixiiyey xeer hoosaadka (5) waa inuu u samaysan yahay qaab habaysan, leeyahay lambar xidhiidhsan, saxeexaa Agaasimuhu ama wakiilkiisu, waana in sarkaalka bixinayaa leeyahay Shaabad Rasmi ah oo uu saaray sarkaalkii sameeyey. Sharciga Ruqsada waxaa kaliya oo la soo saaraa xaladaha marka qof doonayo inuu ka shaqeeyo adeegyada hilibka ama faya-dhowrka hilibka oo markaas ay siiyaan qofka uu Agaasimuhu ama wakiilkiisu u arkaan inuu u qalmo helida sharciga ruqsada;

7) Haddii codsaduhu ku qanci waayo go'aan qaadashada Agaasimaha, ama wakiilka, waxaa u furan inuu u dacwad u gudbisto wasiirka muddo 30 maalmood gudahood ah oo ka bilaabaneysa maalinta go,aanku soo gaadho, wasiirkuna waa inuu mudo 30 maalmood gudahood ah qoraal kula socodsiiya go,aankiisa marka u helo arjiga codsadaha, haddi codsaduhu uu ku qanci waayo go'aan qaadashada wasiirka, wuxuu dacwad dheeraad ah u gudbisanayaa Maxkamada oo go'aan kama dambeys ah ka gaadhi doonta dacwadiisa;

8) Codsiyada hoos imanaya qaybta sharcigan, waxaa loogu gudbinayaa khadka laynka Boosta ama cinwaanka kale ee Agaasimuhu bixiyo.

**Mudada badalaada ruqsada IWM**

14. (1) Sharciga Ruqsada ee lagu bixiyey qodobka 13 (5) wuxuu ansax yahay ilaa u ka dhacayo, haddii aanu Agaassimuhu ama waliilkiisu burinin, iyaga oo u cuskanaya sharcigan ama sharci kale oo qoran. Sharcigan waxaa la cusboonaysiin kara iyada

oo la waafajinayo habka u timaamayo qodobka 13 ee sharcigan ilaa mar kale Agaasimuhu amar ka soo saaro.

(2) Haystaha laga qaado ruqsad sharci oo u ku shaqaysanayey, iyada oo loo cuskanayo xeer hoosaadka (1) wuu dacwoon kara, isaga oo raacaya qodobada sharciga ee qaybta 13 (7) iyada oo lagu maamulayo natiijada ka soo baxda qodobada 13 (7).

(3) Haystaha ruqsad sharci ee doonaya inuu isaga baxo shaqadan ujeeddo kasta ha la ahaadee, ama doonaya inuu meel kale u raro kawaankiisa ama wax ka bedalo dhismahiisa, ama si ku meel gaadh ah shaqada u joojiyo, waa in u ogeysiis qoraal ah u gudbiyaa Agaasimaha mudo 30 maalmood gudahood ah ee arrintu ku dhalatay, waxaana si toos ah u xidhmaya sharcigii ruqsadiisa iyada oo wakhtiga ruqsado dhammaanin.

(4) Haddii qof joojiyey ama ka fadhiistay howlaha ku xusan xeer hoosaadka (3) u doono inuu dib u bilaabo howlihiisa, waa inuu codsada sharci cusub iyada loo tiigsanayo qodobada qaybta (13);

(5) (a) Sharci lumay, baaba'ay, qaabkiisu xumaaday ama mid la xanibay oo wali ansax ah oo shaqeynaya, waxaa lagu bedali karaa soo saarista mid kale kadib marka la xaqiijiyo in sitaha sharcigan u yahay xaq lihii /mulkiilihii sharciga saxda ah, ama u wakiilkiisa u ka lumay, ka baaba'ay, ka xumaaday ama laga xanibay;

b) Waxaa jiraysa khidmad khaas ah oo la baxsho marka Sharci la badalayo sida Agaasimuhu amar ku soo saari doono;

c) Ruqsada la bedelay waxaa dusha sare lagaga qorayaa "Bedel" (Replacement), iyada oo hal mar wax ka badan la ogolayn in la badasho sharciga;

(6) Ruqsad kasta oo cusub ama badel lagu bixiyey oo hoos yimaada sharcigan wuxuu noqonaya hantida Agaasimaha, sidaa darteed lama sii gudbin karo;

## Qaybta IV-Ciqaaabaadka

### Qodobaka 1aad: Ciqaabta la adeegsanaayo

1- Dhammaan waxyeelada leh xad ama ganaax go'an oo ka yimaada iyada oo la gudan waayo waajib uu dhigaayo xeerkani ama lala yimaado fal uu mamnuucay xeerkani waxa loo lala noqonayaa Xeerka Ciqaabta guud ee Somalilanad ( Penal Law) wixii aan ku qornayn xeerkan.
2. Wixii aan xad go'an lahayn ee ganaaxyo ah ee aan ku qornayn xeerkan waxa loo lala noqonayaa Xeer nidaamiyaal uu Wasiirka Wasaarda Xanaanada

Xooluhu ku soo saari doono Shantii sanaba mar, kuwaasi oo lagu daabici doono habka faafinta rasmiga ah ee Qaranka.

**Qodobka 2aad:Xeer nidaamiyayaal**

1- Wasiirka wasaarada Xanaanad Xoolaha, horumarinta reermiyaga iyo Deegaanka wuxuu soo saarayaa shantii Sano hal mar Xeer nidaamiyayaal sheegayaa isla markaana qeexaya dhammaan ganaaxyada iyo amarada looga baahan yahay xeerkan si uu ula jaan qaado mar walba xaalada nololeed ee jirta.
2- Xeer nidaamiyuhu waxa uu fasirayaa, qeexayaa isla markaana fududaynayaa fulinta Qodobada xeerkan, sidaa awgeed waxa mamnuuc ah in uu ka hor yimaado qodobadaxeerkani sheegayo.

**Qodobka 3aad: Awooda Baadhista & Qabashadda**

1- Wasaarada waxaa loo xil saaray oo ay awood u leedahay inay baadho qabto qofkii Ku-xad-gudba xeerkan, iyada isla markiiba horgeynaysa Maxkamadda ku shaqada leh.

**Qodobka 4aad; Ciqaab Iyo Ganaax.**

1- Qof kasta oo si badheed ah ugu xad-gudba xeerkan isla markaana haysta saddex digniinood oo hore laakin aanu khasaare Xad go'an lehi ka dhalan wuxuu mutaysanayaa ciqaabta u dhaxaysa 15 cisho ilaa sanad xadhig ah ama/iyo ganaax lacageed oo u dhaxeeya 200.000/= (laba boqol oo Kun) ilaa10.000.000/= (tobon milyan) Sl.Sh. ah, iyada oo la eegaya faldambiyeedka lagu kacay inta uu leeg yahay.
2- Khasaaraha Xad go'an leh ee ka dhasha ku Xadgubinka xeerkan waxa loo raacayaa Xeerka Ciqaabta guud ee dalka

**Qodobka 5aad: Ruqsad La Noqosho**

1- Qofkii caado ka dhigta inuu ku xad gudbo xeerkan kuna waan toobi waaya xadhiga iyo ganaaxyada ku qoran qodobka 48aad ee xeerkan , ruqsadda ama ogolaanshaha uu haysto waa laga joojinayaa mudo afar bilood ah, waana laga qaadayaa rukhsada marka ay cadaato in uu si badheedh ah ugu xad-gudbay xeerkan. Wasiirkuna waxa uu saarayaa Gudi soo baadha arinkaa hadii loo baahdo

**QAYBTA V - Waxyaalo Kala duwan;**

**Qodobka 6aad: Racfaan Qaadasho**

1- Dambiilaha ciqaabta xeerkan lagu fuliyaa wuxuu xaq u leeyahay racfaan qaadasho haddii uu ku qanci waayo xukunka ku dhacay, waxaanu u racfaan qaadanaya Maxkamada racfaanka ee Gobolka uu ku nool yahay

**Qodobka 7aad: Qaybsan-gelida Qodobada Xeerka**
Haddii qodob ama qodobo xeerkan ka mid ah laga dhigo kuwo aan dhaqngal ahayn, qodobada kale ee xeerkan ee aanay saamayn dhaqangal la'aantu way jirayaan, waxayna ahaanayaan kuwo dhaqan gal ah;

**Qodobka 8aad: Tirtirid**

Xeerkasta, xeer-nidaamiye kasta, wareegto kasta iyo amar kasta oo aan xeerkan Dhaqan galkiisa la socon karayn, waa la tirtiray ama waxaa loo bedelay sida waafaqsan reerkan nuxurkiisa

**Qodobka 9aad: Dhaqangal**
Xeerkani wuxuu dhaqan-gelayaa isla maalinta uu saxeexo Madaxweynuhu, ka dib marka ay labada Gole ee sharcidejintu ansixiyaan

## Qaybta V-Adeegyo kala duwan

### Sugida hilibka macaamiisha

15. (1) Qof kasta oo iibinaya hilib waa inuu u sheegaa macaamiisha ama dadka Iibsanaya (ha la waydiiyo ama yaan la waydiine) xoolaha hilibka uu iibinayo nooca ay yihiin iyo wax soo saarka hilibku halka u asal ahaan ka soo jeedo.

(2) Si kastaba ha ahaatee waa inuu hilib iibiyuhu tixgaliyaa in macmiilku iyo cida quudata hilibka u qoraal ahaan ugu cadeeya, isaga oo ku qoraaya luqada afka Ingiriiska ama luqada meesha lagaga hadlo, nooca hilibka u iibinayo yahay, Geel, Lo', Iddo, Riyo iyo digaag iyo sida arrinkiisu yahay.

(3) Qof kasta oo iibiya hilib, wakiiil ama shaqaale ah ee ku guul daraysta in uu hogaansamo xeer hoosadka faqrada (1), wuxuu galay gef/dembi, waana lagu qaadayaa dambiga uu galay………..

(4) Hilib kasta ama wax soo saarka hilibka oo loo arko in lagu iibinayo si khilaafsan xeer hoosaadka (1) waxaa loo la wareegayaa si sharci ah, waana laga daadinayaa hilibka, waxaa kale oo lala wareegayaa sharciga ruqsada u ku shaqaysto, ka dibna waa la kansalaya sida u tilmaamayo qaybta sharcigan.

### Kala saarida iyo cadeymaha kawaanka Gawraca xoolaha

16. (1) Wasiirka isaga oo la tashanaya Agaasimaha waaxda caafimaadka xoolaha, madaxda dawlada hoose iyo saraakiilsha maamulka Gobolada ka socda, wuxuu dikareeto ku soo saarayaa qaraar lagu kala saarayo heerarka ama darajada

kawaanada gowraca xoolaha ee dalka oo dhan, iyada oo ujeedadu tahay in lala qabsado laguna dhaqmo sharcigan, maadaama duruufo imaan karaan.

(2) Wasiirku wuu kala duwi karaa darajada kawaanada sida ku xusan qayb hoosaadka (1) qaar ka mid ah kawaanada kor buu u qaadi karaa darajadooda, qaarna hoos buu u dhigi kara haddii ay duruufo keenaan, si kasta xaalado ha ahaatee.

(3) Wasiirku wuxuu ku dhawaaqi kara kala saarida darajooyinka kawaanada waqti ilaa waqti hadba sida duruufto tahay.

**Xuquuqda Saraakiisha**

17. (1) Baadhaha caafimaadka hilibka, sarkaal kale oo ka tirsan dowlada, dowlada hoose ama madax kale oo awood dowladeed ku magacaaban, wax masuuliyad ah oo Ka saaran ma jirto lagumana dacweyn karo dhibaato qof soo gaadhay ama wax magdhow ah, daawo, dhaawac iyo wax yeelo kale oo u gaysto, isaga oo si daacada ah u gudanaya waajibaadka shaqo ee hoos yimaada sharcigan.

(2) Si kasta ha ahaatee shuruudaha xeer hoosaadka qodobka (1) ee qaybtan kama hortagi karo qofka dhibanaha ah inuu dacweeyo dawladda, dawlada hoose ama madaxda kale ee wax soo magacawday oo uu ku dacweeyo dhibka soo gaadhay, ama mag-dhow ama daawo uu doonayo inu u qaato dhibka ama dhaawaca soo gaadhay, khasaare, dhaawac u sababay sarkaalkaasi intii u ku guda jiray gudashada waajibaadkiisa, iyada oo loo tiigsanayo Sharcigan.

**Awooda Amar bixinta Qawaaniinta**

18. (1) Wasiirku wuxuu Dikreeto ahaan waqti ka waqti ku saaari karaa xeerar cusub si loo dardar galiyo loona fuliyo Sharcigan, xeerarkan waxaa ka mid noqon kara:-

a. Isaga oo la tashanaya Wasiirka wakhtiga la joogo ka masuulka ah Caafimadka dadweynaha, madaxda dawladaha hoose, madaxda biyaha iyo deegaanka, wuxuu soo saaraya sharciyada ruqsada, maamulka xeerarka kawaanada, dhismayaasha iyo meelaha kale ee hilibka la quuto laga soo saaro.

b. Wuxuu Wasiirku soo saarayaa xeerar gaar ah oo lagu dabaqayo heerarka loo kala saaray kawaanada sida ku xusan qodobka qaybta 16 (1) ee sharcigan

c. Wuxuu qeexaya meelaha loo asteeyey inay ka adeegaan kawaanada heerkooda la kala saaray.

d. Isaga oo la tashanaya Wasiirka masuulka ka ah caafimaadka dadweynaha , ururrada xirfada u leh howshan, Rugta Ganacsiga iyo washadaha, iyo Urur ka

wakiil ah xoolo dhaqatada, macaamiisha hilibka iyo dadka xirfada u leh badbaada cuntada. waa in wasiirku cayimaa heerarka ah, in loo kuur galo iyada oo tixgalin la siinayo samaynta wax soo saarka hilibka, oo ay ka mid yihiin Magac u bixinta, Cadeynta, Waxyaabaha uu ka kooban yahay, carfiyeen, ama wasakhayn kara, sumadayn iyo baakadayn / qasaca-daynta wax soo saarka;

e. Wuxuu bixinayaa awaamiirta baadhista hilibka, kawaanada gowraca xoolaha, guryaha, hilibalayda iyo waxyaabaha cuntada lagu carfiyo ama waxyaalaha wasakheyn kara ee la xidhiidhin karo iyo waxyaalaha looga baahan yahay hagaajinta tayada hilibka.

f. Wuxuu bixinaya qodobo la dajiyey oo la raaco sida ugu saraysa ee lagu ogaanayo germisyada ku jira neefka la qalay iyo heerka ugu sareeya ee hadhaaga suntan (cayayaanka, daawooyinka xoolaha iyo wasakhaynta deegaanka) ee saamayn kara hilibka, islamarkaana wuxuu bixinayaa tilmaaha lagu hagaajinayo hilibka;

g) Wuxuu bixinaya hababka loo maamulo hilibka iyo faya-dhowrka hilibka, sida kaydinta, rarka iyo safrinta, Jumlad iyo tafaariiq u iibinta hilibka;

h) Wuxuu qeexayaa faya-dhowrka iyo heerarka kale ee maaraynta xaaladaha safrinta xoolaha loogu talagay gawraca;

i) Wuxuu bixinaya awaamiirta sharciga ruqsad bixinta iyo maaraynta hilibka iyo wax soo saarkiisa ee la dhoofinayo ama la soo deijinayo iyo raad-raaca xoolaha halka laga keenay iyo wax soo saarka xoolaha;

j) In la dhiso wakhti ilaa wakhti gudiyo ama kooxo khibrad leh oo daraasad sameeya kana talo bixiya hababka iyo qaabka loo qiimanayo khatar kasta oo timaada sidii loo maarayn lahaa ama loo xakamayn lahaa, Khatarahaas oo saamayn ku yeelan kara wax soo saarka iyo badbaada hilibka la quuto;

k) Amar ku bixinta soo saarida, diidmada sharci la soo saaro, xanibaad ama burinta sharci, ogolaashaha sharci kasta oo wax lagu ansixinayo;

l) Wuxuu amraya Foomamka, shaadooyinka /ruqsad sharci iyo dhokmatiyada kale ee loo bahan yahay ee ku qeexan sharcigan;

m) Bixinta khidmada baadhista iyo wixii ujro kale ah ee ku qeexan sharciga;

n) Bixinta wax kasta oo kale ee loo baahan yahay in la bixiyo ama qoran ee hoos imaanaya sharcigan;

(2) Xeerarka dikariito ee hoos yimaada qaybtan:

(a) Wuxuu ka dhaqan galaya xeerkani wadanka oo dhan ama qaybo ka mid ah, waxaa kale oo loo samayn kara xeerar kale duwan iyada oo loo eegayo qaybaha kale ee dalka iyo duruufaha halkaas ka jira.

(b) Waxaa laga dhaqan galin karaa Kawaanada oo dhan ama ruggaha kale ee hilibka lagu haajiyo, waxaa kale oo la samayn karaa xeerar kale oo duwan, iyada oo loo eegayo heerarka kala duwan ee kawaanada iyo meelaha kale xoolaha lagu qalo.

(c) Waxaa laga samayn karaa laguna hagaajin karaa cuntada dhiiga, hilibka caadiga ah iyo cuntada lafaha, iyada oo loo eegayo heerarka loo qeexay.

(d) Awaamiirtan kala duwan waa in loo qaataa, iyada oo la eegayo xaalado kale oo wasiirku u arko inay muhiim yihiin;

(e) Wuxuu mutaysanayaa ciqaab, ganaax ka badnayn------------------ama xadhig aan mudadiisu ka badnayn--------------------bilood, ama la isugu daro xadhig iyo ganaax bixin, iyada marwalba loo eegayo xeerka sharci ee la jabiyey ee aan halkan ku cadeyn ciqaabtiisa ee aan ciqaab loo qeexin, wixii ganaax ah ama ciqaab ah ee la marsiinayo. Haddii fal dambiyeedku soo noq-noqdo wuxuu mutaysanyaa ciqaab iyo ganaax aan ka badnayn----------------------iyada oo loo eegayo inta maalmood dambiga la galay.

3-Xeerar kasta oo la soo saaray oo khuseeya waaxdan waxaa la horgeynaya Golaha wakiilada si ay u ansixiyaan muddo 21 maalmood gudahood ah oo ka bilaamaysa marka xeerka la sameeyo, haddii Golaha wakiiladu fadhiisu socodo, haddii uuna socon kalfadhiga Goluhu waa in lagu gudbiyaa mudo 21 maalmood gudahood oo ka bilaamaya kalfadhiga dambe ee Golaha.

4-(a) Haddii sharcigan la horgeeyey Golaha wakiilada muddo 21 maalmood gudahood ah oo uusan diidin inta lagu jiro 21 bari xeerkani wuxuu noqonayaa mid sharciyeeysan;

b. Dhicida 21 maalmood ah ee farqada (a) lagu xusay qayb hoosaadkan waa inay ahaadaa mid aysan naceyb ama jacleysi ayna ku jirin, waa xuquuqda golaha sharci dejintu in dib u celiyo, kadib dhicitaanka codsiga markuu waayo ansaxin, iyo sido kale haddii sharciga codsiga ah la buriyo in dib loo celiyo isaggana, iyada oo burinta sharciga ayna waxba u dhimayn tilaabo kasta oo la qaado ee lagu daba galayo xeerarkan.

5- Xeerarka u buriyey Golaha sharci dajintu waxay noqonayaan kuwo ansax ahayn oo aan la dhaqan galin Karin, iyada oo loo tiigsanayo qodobka (4) (b);

## JADWALADA

## JADWALKA I

## JAMHUURIYADA SOMALILAND

**XEER NO……………………………**

Sharciga baadhista iyo Maamulka Hilibka no……….ee……….[sanadka]

Iyada oo la adeegsanayo awoodaha ku xusan Qodobka 18 (1) (d) ee sharciga baadhista iyo maamulka hilibka…………[sanadka], Wasiirka wakhtigan haya adeegyada caafimaadka xoolaha waa inuu soo saaraa xeerarkan-

Sharciga baadhista iyo maamulka xeerarka kawaanada gowraca xoolaha ee hilibka dibada loo dhoofiyo

### Qaybta 1 –Gogol Xaadh

### Tixraac

**1.** Sharcigan waxaa loogu yeedhaa xeerarka baadhista iyo maamulka hilibka (kawaanada gowraca ee hilibka dibada loo dhoofiyo).

### Shaacinta kawaanada gowraca xoolaha ee hilibkooda dibada loo dhoofiyo iyo arrimaha la xidhiidha

**2, (a)** Wasiirku wuxuu xeer ku shaacinayaa darajada iyo heerarka kawaanada gowraca xoolaha, si loogu aqoonsado kawaanada gowraca xoolaha ee loogu tala galay diyaarinta hilibka la dhoofiyo

b) Wasiirku waa inuu wakhti ilaa wakhti soo saaraa dikareeto ay ku qoran tahay howsha iyo warbixinta loogu talagalay dhamaan baadhayaasha caafimaadka xoolaha, shaqaalaha iyo dadka kale ee howshan ku howlan, Baahida Hay'ada caafimaadka xoolaha ee caalamiga ah (OIE Codex) ee ah nadaafada iyo faya-dhowrka hilibka iyo xaladaha badbaada hilibka;

3. Awaamiirta ku qoran jadwalkan waa in lagu dabakhaa howsha ka socota kawaanada gawraca ee hilibkooda la dhoofiyo sida lagu soo shaaciyey xeerka

(2) ee xeerarkan, inkasta oo xad u yeelidii hore ee kawaanada lagu gawraco xoolaha hilibkooda la dhoofiyo ee sida gaar ah lagu soo sheegay xeerarkan ama dikareetada wasiirka, xeerarkan waxay dabakhi karaan waxyabaha dib loo habeeyay haddii ay lagama maarmaan noqoto darajooyinka iyo heerarka kawaanada gowraca xoolaha;

4. (1) Qofna kuma gowrici karo kawaanada xoolaha hilibkooda la dhoofiyo, xoolo usan soo baadhin baadhaha caafimaadka hilibka, marka laga soo reebo xaaladaha deg deg ah oo la soo marinayo xoolaha baadhis gowraca ka hor;

   (2) Waa waajibaadka qofkasta oo shaqaala ah inuu la sameeyo qorshe kasta oo lagama maarmaan ah baadhaha ku qoran kawaankiisa, si u sameeyo baadhista caafimaadka xoolaha gowraca ka hor iyo baadhista neefka gowraca kadib, shaabadaynta iyo cadaynta baadhista, sumada weelka, xidhmaynta iyo ogolaasha rarka iyo arrimaha kale ee looga baahan yahay xeerkan.

   (3) Howlwadeen kasta waxaa kale oo u qabanaya:

   a) Wuxuu sameynayaa qorshayaal macquul ah oo u ku da-dajenayo baadhist caafimaadka xoolaha gowraca ka hor ee la keenay kawaankiisa: iyo

   b) da-dajinta howlaha gawraca iyo harag ka bixinta xoolaha si iyadana loo da-dajiyo baadhista neefka gawraca kadib.

   (4) Qof kasta oo ka horyimaada sharciga halkan ku qoran waxuu galayaa gef/dambi, waana lagu qaadayaa dambigaa uu galay………………..

5. Baadhaha caafimaadka hilibku, wuxuu awood u leeyahay inuu xanibo, amaro in la daadiyo ama burburiyo neefkasta raqdiisa, hilibkiisa iyo wixii kale laga soo saaro ee ay la noqota baadhaha hilibka in dadku cuni Karin.

6. (1) Qofna ma iibin karo, ma bandhigi karo, ama kaydsan karo, ma gudbin karo, uma gayn karo dad kale si looga iibsado hilib, ilaa u soo baadho baadhaha caafimaadka hilibu oo u xaqiijiyo in dadku cuni karo;

(2) Qof aan ahayn baadhaha caafimaadka hilibka looma ogola inuu ku dhajiyo ama ka fujiyo xoolaha, neefka la qalay, ma hilibkiisa wax lifaaq ah, calaamad ama sumad baadhaha caafimaadka hilibka u ku dhajiyey oo loo la jeedo habka baadhista xoolaha gowraca;

(3) Qof kasta oo ka horyimaada sharciga halkan ku qoran wuxuu galayaa gef/dambi, waana lagu qaadayaa dambigaa uu galay………………..

7. (1) Qofna ma tuuri karo, ma fogayn karo xoolo la qalay, am hilibkooda oo la calaamadeeyey ama tiro lagu suntay, kaliya waxaa lagu tuuri karaa laguna fogayn karaa, ogolaasho qoraal ah iyo amar u bixiyo baadhaha caafimaadka hilibka.

(2). Qof kasta oo ka horyimaada awaamiirta firqada 1 ee xeerkan waxuu geliya danbi

8. Qof kasta oo carqaladeeya, dhibaato hor dhigga ama gacan ka geysta carqaladaynta baadha caafimaadka hilibka oo howshiisa gudanaya, wuxu galayaa gef/dambi marka sharcigan loo raaco;

9. Agaasimuhu waa inuu u cayimaa tiro go'an kawaan kasta oo xoolaha hilibkooda la dhoofiyo lagu qalo, si tiradan loogu isticmaalo inay cadeyso tirada xoolaha la qalay, tirade hilibka lagu baadhay kawaanka, dhammaan weelka, xidhmooyinka hilibka, shixnadaha hilibka iyo wax soo saarka hilibka ee laga soo saaray kawaanka.

10. (1) Agaasimuhu isaga oo raacaya talo bixinta madaxa baadhayaasha hilibka wuxuu amrayaa in la xidho kawaan kasta oo lagu qalo xoolaha hilibkooda la dhoofiyo ee ku guuldaraysta inuu ku dhaqmo qodobada xeerarkan. Kawaan kasta oo lagu xidho xeerkan wuu xidhnaanayaa ilaa inta u ka hubinayo Agaasimuhu;

    (2) Intaan la xidhin kawaanka, Agaasimuhu waa inuu marka hore qoraal ogeysiin ah oo loogu digayo siiyaa howl wadeenka kawaanka jabiyey xeerarkan, iyada oo la siinayo wakhti xadidan si u qaado talaabooyin u ku saxayo meelka dhaca xeerarkan lagu sameeyey;

Haddii waqtiga loo cayimayay howl wadeenka kawaanku u diido ama dhayal sado inuu qaado talaabooyinka saxda ah ama u arko wasiirku inayna raali galin, Aaasimuhu wuxuu xidhayaa kawaanka

(3) Haddii sababta xidhitaanka kawaanku ay ahayd mid cilmi ku saleysan ama arrimo farsamo, Agaasimuhu waa inuu u diraa madaxa baadhayaasha si u soo eego xidhitaanka kawaanka iyo inuu talo ka soo siiyo, in howl wadeenka kawaanku qaaday talaabooyinkii saxda ahaa ee laga rabay iyo haddii kalaba si kawaanka dib loogu furo.

(4) Qof kasta oo ku qanci waaya go'aanka Agaasimaha ee hoos yimaada xeerkan, wuxuu dacwad u dirsan karaa wasiirka, haddii u ku qanci waayo go,aanka wasiirka wuxuu u dacwoon karaa Maxkamada.

(5) Agaasimuhu waa inuu qaabka ugu fiican u soo saaraa warbixin dadka loogu talagalay oo ku saabsan magacyada iyo kawaanada gowraca xoolaha ee la xidhay iyada oo loo cuskaday xeerkan, sidoo kale waa inuu Agaasimuhu kaystaa diiwaanada kawaanada la xidhay, kuwaas oo u galinayo:

Magaca iyo lambarka diiwaanka kawaanka gawraca ee la xidhay,

a) Magaca iyo lamarka u ku diiwaan gashan yahay

b) Sababta loo xidhay iyo taariikhda la xidhay, iyo

c) Warbixinada kale ee Agaasimuhu u arko lagama maarmaan.

11. Baadhaha caafimaadka hilibku waa inuu tagaa kawaanada gowraca xoolaha ama qayb ka mid ah mar kasta, haday shaqaynayso iyo hadayna shaqeynay si baadhista halkaas ka socoto loo waafajiyo qawaaniintaan.

(2) Iyada oo aysan jirin jeclaysi ama necbaysi amrada qaybta (1) ee xeerkaan, Agaasimuhu isaga la tashanaya Madaxa baadhayaasha caafimaadka hilibka iyo haduu jiro Ururka howl wadeenada waa Inuu dikareeto ku soo saaraa saacado go.an gowraca xoolaha Kawaanada ku sharci yeesan xeerkan.

12. Dhammaan xoolaha loo gowracay in hilibkooda la dhoofiyo waa inay ahaadaan kuwa caafimaad qaba, waana inay soo maraan baadhis caafimaad gowraaca ka hor

13. Waa in baadhaha caafimaadka hilibka loo diyaariyaa meelo ku haboon oo si fiican u qalabaysan oo howlihiisa gaar ka ah ku qabsado.

14. Ma jirayso waax ama qayb ka mid ah kawaanka hilib dhoofinta oo laga shaqeeyo, waxaan ka ahayn amrka baadhaha caafimaadka hilibka.

15. Lagama saari karo neef la gawracay ama Hilib kawaanka hilib dhoofinta ilaa la ogaysiiyo baadhaha caafimaadka hilibka, isaguna ogolaasho qoraal ah ku bixiya in laga saaro kawaanka.

16. Xeryaha xoolaha lagu xareeyo inta aan la qalin waa inay yihiin kuwo faalal ah, si ay u fududaato baadhista caafimaadka xoolaha gowraca ka hor.

17. Waa inay ka jiraan ugu yaraan Qalab, Agab iyo xaaladaha wasiirku tilmaamay wakhti ilaa wakhti si loo ilaaliyo heerka faya-dhowr ee la aqbali karo, inta aan la siin ruqsada shaqada kawaanka hilib dhoofinta ee hoos yimaada sharcigan, ha shaqeeyo ama yuuna shaqayne.

## Qaybta II- Faya-dhawrka iyo badbaadada safrinta xoolaha Gawraca

**Waxay raacayaan qodobada sharciga qaybta 6 (1):-**

1. Xoolaha wata sumada gawraca waa in lagu safriyaa xaaladahan:-

a) Waa inayna si xad dhaaf ah u wasakhaysnayn ama u daalanayn.

b) Yareynta ama tir-tirida cudur dhaliyaasha ku faafi kara xoolaha dhexdooda;

c) In la cadeeyo halka neef kasta ka yimid safrinta ka hor;

d) Waa in la xaqiijiyaa oo lala socdaa habka safrinta xoolaha iyo daryeelkooda;

e) Waa in la waafajiyaa baahiyaha kale ee wasiirku qeexi doono waqti ilaa waqtiga;

2. Iyada oo aysan jirin jeclaysi ama necbaysi qodobada qaybta (1) ee xeerkan, marka lagu guda jiro safrinta xoolaha, waa in baahiyahan iyagana loo fiirsadaa;

a) Wasakhda Xoolaha sida dhiriqda waa in la yareeyaa, haddii gaadiid Raar sare leh xoolaha lagu raro waa in laga taxadiraa in xoolaha raarka hoose ee gaadhiga aysan ku soo daadan saxarada ama dhiriqda xoolaha Raarka sare saaran;

b) Dhammaan gaadiidka loo isticmaalayo safrinta xoolaha waa inay yihiin kuwa u samaysan qaab loogu tala galay xoolaha oo iska xajin kara culayska saaran, si fudud oo badbaado ku jirto loo saari karo loogna dajin karo gaadhiga iyo xoolaha oo loo safriyo si raaxa leh oo aan lahayn wax khatar ah ama dhaawaca.

c) Xoolaha kala duwan iyo kuwa isku sinjiga ah ee is dhaawici kara waa in la kala saaraa inta xooluhu safarka ku jiran.

d) Sagxada gaadhiga ee lagu talagalay safrinta xoolaha waa in si adag loo gufeeyaa si u yaraato wasakhda saxarada xoolaha dhexdooda.

e) Haddii xoolaha la lugaysiiyo waa inay la socdaan daryeele caafimaad xoolaad ah iyo nin dal yaqaan ah, waxaa kale oo loo baahan yahay meelaha xooluhu ka soo safreena waa inuu joogaa kaaliye caafimaad xoolaad. Jidka xooluhu ku safrayaana waa inay ka helaan daaq iyo biyo xiliyada kala duwan marba sida duruufto tahay.

f) Haddii safarka dhulka uu yahay mid aad u dheer, waa in xoolaha loo hayaa raashinka sida caws qalalan iyo biyo saafi ah, ka hor safarka xoolaha waa in la darsaa xaaladaha dhulka ee xooluhu marayaan iyo xaalada cimillada, inta jidka lagu jiro iyada oo loo eegayo duruufaha waa in xoolaha la nasiyaa,

waxaa kale la eegayaa duruufaha masaafada safarka waxaana la samayn karaa kadyo xooluhu nastaan.

g) Xoolaha waa inaan la garaacin ama aan loola dhaqmin si cadowtinima ah, gaadiidka xoolaha lagu safrinayaa waa in uu leeyahay saqaf sare oo hawadu gali karto, iyo qolol balaadhan oo xooluhu isku cidhiidhin Karin.

h) Meelaha xooluhu marayaan ee uusan Agaasimuhu gaynin kaaliye caafimaad xoolaad waa inuu la socdaa xoolaha dhakhtarka caafimaadka xoolaha ama qof kale oo ka socda dhakhtarka xoolaha

i) Qofka safrinaya xoolaha waa inuu haystaa inta aanu bilaabin safarkiisa ogolaasho iyo fasax rasmi ah ama dhokmantiyada safarka si aan jidka hakadyo xoolaha loo galin.

j) Marka xooluhu soo gaadhaan meesha lagu dajinayo, waa in si fiican oo dagan loo dajiyaa laguna hayaa meelo qalabaysan oo u ogolaaday dhakhtarka jooga meesha xooluhu ku soo dagaan, iyada oo la siinayo cunto iyo biyo ku filan haddii kale ay ku jiraan meesha qalabaysan inta ay marayaan baadhista caafimaadka gowraca ka hor.

k) Qofka safrinaya xoolaha wuxuu u gudbinayaa howl wadeenka goobta warbixin dhameystiran oo ku saabsan xoolaha u keenay, sida wax soo saarkooda, cadeymahooda iyo meesha ay ka yimaadeen sida sharcigan qeexayo ama sharci kale oo qoran.

l) Haddii neef buko ama laga joojiyey gawraca sabab kale looga joojiyey gowraca, waa inaan la ogolaan u iskii ugu war wareego ee waa in meesha laga saaraa sida ku xusan sharciga;

m) Haddii tuurista wasakhda dhiriqada iyo raqda neef ku soo bakhtiyey safarka ay lagama maarmaan noqoto,isla sidii hore oo kale ayaa la sameenayaa, si looga hortago faafida cudurada, hoos u dhaca nadaafada deegaanka, khatarta ku imaan karta cida kale ee isticmaasha wadada iyo dhibaato ku imaanan karta dadka dariska la ah wadada; iyo

n) Nadiifinta iyo nadaafada xoolaha iyo habka loo adeegsanayo rarida xoolaha waa inay diyaar yihiin marka xooluhu yimaadaan.

(2) Qof kasta oo buriya amarrada halkan ku qoran (1) waxuu galayaa gef/dambi, waana loo qabsanayaa dambigaa uu galay………………..

(3) Si kastaba ha ahaatee waxay difaac u noqaysaa qof lagu soo dacweeyey farqada(2) oo u gaystay xoolo tacadi, nabur, dhaawac ama ka hor yimid xeer hoosaadka (1) ee qaybtan waa inuu cadeeyo dhakhtarkii soo baadhay xoolaha wakhtigaas inuuna soo qiimayn tacadiga, naburka, dhaawaca ama saamaynta

xeerka la jabiyey u ku yeelanayo badbaadada iyo haboonanta hilibka xoolaha; ama hadii tacdigu, naburku, dhaawacu sababay iyo talaabada la qaaday ama xeerka laga tagay waxaa sababay ama daruuri u noqday duruufo awoodiisa ka baxsan.

**Qaybta III- Baahiyaha Kawaanada Gawraca xoolaha Hilibkooda la dhoofiyo Qalabkooda iyo meelaha ay ku kala yaalaan**

1. Kawaanka gowraca xooluhu waa inuu ku yaalaa meel:-
   a) Xor ka ah xaaladaha sababi kara nadaafad xummo ku timaada howlaha kawaanka qaliinka;
   b) Qashin saarkeedu fiican yahay oo aan khatar gelin Karin deegaanka.

**Agabka xerada Xoolaha**

2. Kawaanada gowraca xooluhu waa inay leeyihiin xeryo dadan oo ku qalabaysan agab faya-dhowr fiican leh ama hawo furan leh. Waa inay ka jiraan xeryo ay ku sugaan gowraca oo si fudud loo nadiifin karo loogna dili karo germisyada ku dhasha; Agabka xeryaha wax ka mid ah dararka xooluhu ka cabaan biyaha iyo meelaha cuntada lagu siiyo hadii loo baahdo.

3. **Sagxada Dhulka kawaanka:**-

(a) Waa inay si siman u dhisan yihiin ayna leeyihiin biyo Saar fiican. Biya saarka waa inaysan khatar gelineyn cuntada.

(b) Waa inay u sameysan yihiin hab aan keeni karin in xooluhu wasakhoobaan, qaabka dhimahooduna waa inay u diyaarsan yihiin in xoolaha nadiifa ah kaligood lagu gawraco; iyo

(c) Waa inay faalal yihiin si ayna xooluhu isugu dhiidhiin, si loo yareeyo dhaawca ay isugaysan karaan

4. Agab iyo qalab ku filan gudashada baadhista caafimaadka xoolaha gowraca ka hor iyo kala soocida xoolaha loo fasaxay qaliinka iyo kuwa gaarka loo calaamadeeyey ee laga joojiyey gowraca iyo kuwa looga shikiyey inay bukaan.

5. Iyada oo la raacayo awaamiirta xeerka (4) waa in jiraan qalab gaar ah oo la qufuli karo oo hawado gali karto, xeryaha xoolaha buka iyo kuwa laga shikiyey oo leh biyo saar u gaar ah si looga digtoonaado inaysan xoolaha kale u gudbin wax cudur ah, Ilaa mas'uuliinta sare u arkayaan in qalabkan laga maarmi karo.

6. Cabbirka agabka xeryaha xoolaha waa inay ahaadaan kuwa daryeelaya xuquuda xoolaha.

7. Xeryaha xoolaha waa inay u diyaarsan / dhisan yihiin qaab fududeeya baahdista caafimaadka xoolaha gowraca ka hor iyo yeeshaan iftiin ku filan oo wada gaadha xeryaha oo dhan marka uuna jirin ifiinka caadiga ah ee maalintii;

8. Waa inay jirtaa meel kale oo dhinaca ku haysa oo si aad ah u qalabaysan oo lagu buufiyo laguna nadiifiyo gaadiidka xoolaha qaada.

9. (1) Xeryaha loog talagalay in lagu hayo xoolaha gowraca ka hor waa inayna lahayn waxyaale muda oo fiiqan ama wax adag oo dhaawici kara xoolaha;

   (2) Xoolaha waa in aan la isugu keenin hal meel ah si aysan isu dhaawicin; iyo

(3) Sagxadaha ay maraan xoolaha gowraca loogu talagalay waa inay ahaadaan:

a) Mid u dhisan hab xooluhu si fudud u kori karaan ugana degi karaan; iyo
b) Waa in xooluhu si fiican ugu socon karaan;

## Qolalka Iyo Qeybaha kale ee kawaanku leeyahay

10. Kawaanadu waa inay ku qalabaysnadaan;

(1) Qolal iyo qaybo faalal ah oo lagu fulin karo dhammaan adeegyada suragalka ah ee lagu yarayn karo wasakhowga hilibka oo si wayn looga shaqeeyey.

(2) Agab iyo qalab loo diyaariyey, loo dhisay ama loo maamulay si ay shaqaalaha ugu suurta gasho inay u gutaan shaqadooda hab nadaafadi ku dheehan tahay;

(3) Qolalka loogu talagalay Gawraca xoolaha iyo harag ka saarida, jarjarida xubnaha kale ee neefka waa inay kala soocnaadaan ama kala fog yihiin si loo fuliyo shaqooyinka soo socda.

(a) Suuxinta Neefka iyo dhiig baxa

(b) Ka saarida uur ku jirta iyo xubnaha kale ee neefka.

(4) Qolal loogu talagalay howlaha soo socda:

(a) Qashin saarka iyo nadiifinta Caloolaha iyo mindhicirada;

(b) Sii diyaarinta Caloolaha iyo mindhicirada nadiifintooda madama bini aadamku u quudanayo;

(c) Diyaarinta iyo Nadiifinta Xubnaha neefka ee aan la cunin gaar ahaan madaxa oo haraga laga saaro haddii aan qalliinkii hore lagu soo sameyn.

(d) Xidhmaynta Xubnaha neefka la qalay ee aan la cunin;

(5) Qolol leh qaboojiyayaal loogu talagalay qaboojinta iyo kaydinta hilibka kadib marka xoolaha la qalo, qalabka qaliinkana waa in la dhigaa meelo ku habboon oo isku xig-xiga yihiin, uur ku jirka, qaboojinta iyo qol kasta waa inuu leeyahay heer kul-beeg.

(6) Agabka loo adeegsado kaydinta uur ku jirka aan la cunin, hilibka aan cuntada ahayn, qashinka la daadiyo iyo wixii la diidaba waa in la dhigaa qolalka qufulan. Waxaa kale oo inta dheer, waa inuu jiraa weel bir ka samaysan oo wax lagu rido biyuhuna gali Karin oo loogu talagalay in la galiyo (rido) raqda xoolaha cudurka laga helay ama qaybo ka mid ah xubnaha hilibka oo cudur qaba, laguna calaamadeeyo Agabkaas erayga (CONDEMNED) far waaweyn oo aan ka yarayn xarfkiiba 5 cm oo joog sare ah.

(7) Weelka lagu kaydiyo xubnaha xoolaha aan la cunin ee la daadiyey, waxyaabaha loo aqoonsaday inaan la cunni karin iyo qashinka waa inay ka sameysan yihiin bir ama caag, waana inay leeyihiin dabool ka celiya cayayaanku inay galaan.

(8) Weelka ay ku jiraan waxyaabaha xoolaha ee aan la cunnin waa inay dusha sare ku leeyihiin magac muuqda.

(9) Halka haragaha lagu cusbeeyo amase lagu kaydiyo, waa inuu yahay qol u gaar ah hargaha.

(10) Haddii saalada xoolaha ama uuska (uur ku jirka) dheefshiidka lagu kaydiyo kawaanka gawraca, waa inay jirtaa qayb gaar ah oo loogu talagalay.

(11) Kawaanku gawraca waa inuu leeyahay qolal iyo meelo kale oo gaar ah oo furan ee loo yaqaano "Goobaha baadhista ugu dambeysta (Final Inspection Places), halkaas oo baadhis kama dambeys ah lagu sameeyo xoolaha hilibkooda laga shakiyey ama la xanibay.

## Dhismaha iyo Rakibaada kawaanada gowraca xoolaha

12. Kawaanada gowraca xoolaha waa in loo dhisaa loona dhamaystira qaab lagu howl gali karo, laguna joogtayn karo xaaladaha nadaafada sida soo socota;

(1) Qolalka iyo qaybaha kale ee xoolaha lagu gawraco, haraga lagu saaro iyo miisas hilibka la dul saaro loo dhisaa, si ay fududaato joogtaynta howlaha nadiifinta ama nadaafada kawaanka loogu qaban karo;

(2) Qolalka waa in laga ilaaliyaa soo gelida ama hoy u noqoto cayayaanka, shimbiraha, jiirka, dulinka yar yar ee xoolaha iyo beeraha waxyeelleya;

(3) Sagxada goobaha biyuhu ku jiraan waa inay la haadaan biya shub toos biyo ugu dhacaan saaqiyada loogu talagalay.

(4) Albaabada dibadu waa inayna toos ugu furmin halka hilibka laga shaqaynayo;

(5) Waa in lagu rakibaa qalab u dhaxeeya hilibka iyo sagxada ama gidaarka oo ka celiya hilibka inay taabtaan;

(6) Goobaha xoolaha lagu gawracayo waa inay kala soocan yihiin si shaqado u socoto iyo in laga hortago isku gudbka wasakhada qaybaha kala duwan ee goobaha gowraca. Hadii hal goob wax ka badan ka shaqaynayso goobaha gowraca isla dhimahaasi, waa inay jirta masaaf ku filan oo u dhaxaysa marinada gowraca si looga hortago iswasakhayta hilibka;

(7) Agabka lagu talagalay in jeermiska laga dilo qalabka gawraca iyo kuwa kale ee lagu shaqeeyo waa in ay leeyihiin biyo la ku layliyey oo cabirka kulay koodo ka yareen 82 $^{o}$C ama waa in la adeegsadaa hab kale oo badali kara habkan oo ay isku tayo yihiin;

(8) Qalabka ay gacmaha ku maydhaan shaqaalaha ku howlan soo saarka hilibka waa inay leeyihiin furayaal loo sameeyay si looga hortago faafida jeermiska. Furayaashan waxaa la doorbida in lagaga shaqaysiiyo cadaadiska cagta iyo jilibka;

(9) Kawaanku waa inuu yeeshaa biyo nadiif ah oo la cabi karo iyo biyo qabow oo ku filan si howluhu hufaan ugu socdaan;

(10) Sagxadaha hoose ee kawaanka gawraca xooluhu, waa inay yihiin kuwa siman, aysan gudbi karin wax kasta oo dareere ah, waana inay Gidaaradu ugu yaaraan kor uga kasan yihiin 10 cm xaglaha isku xidhaya Gidaarka iyo sagxada ahaadaana kuwa daboolan;

(11) Sagxadaha kawaanka gawraca marka laga reebo kuwa kaydinta qalalan iyo qolalka hargaha, waa inay yeeshaan biyo shub hoos u jan-jeedha oo ku qalabaysan dabino ur udgoon leh;

(12) Biya saarka sagxaduhu waa inay leeyihiin suxuun qashinka qabta kadibna saara waxyaabaha adag iyo kuwa duxda leh, hadii biya saarku ka imanayo sagxada qolka gowraca, waa inuu jiraa god qabta xinjiraha dhiiga;

(13) Darbiyadu waa inay ka samaysan yihiin waxyaabo siman oo dareeruhu ka gudbi karin, dherarka darbiyaduna ugu yaraan noqdaan 2.5 m marka laga reebo qolalka gowraca iyo xubna saarka, kuwaas oo dherarkoodu noqonayo 3 m;

(14) Safiitada sare ee qolalka qaboojiyaha ee kawaanku waa inuu ka samaysan yahay shay siman oo dareeruhu ka gudbi Karin;

(15) Birraha hilibka la sudho iyo khaanadaha hilibka la galiyo ee yaal kawaanka waa inayna ka samaysneen biro daxlaysta ama maar ku dahaadhan, laakiin kuwa sida dadban loogu istimaalo hilibka la cuno, waa inay yihiin kuwo ka samaysan biro aan daxalaysan ama yihiin kuwo caag ka samaysan oo si fudud loo nadiifin karo.

(16) Miisaska, foomamka, bulikeetiga iyo weelka loogu talagalay hilibka loo istimaalo cuniika, waa inay ka samaysan yihiin biro aan daxalaysan ama ka samaysan yihiin caag;

(17) Qalabka iyo Agabka waa inay yihiin kuwo la mid ah oo ka samaysan biraha aan daxaleysaneyn, si fududna loo nadiifin karo, loogana dili karo jeermiska. Qaybaha qalabka ee loo istimaalayo in lagaga shaqeeyo hilibka la cuno waa inay ka samaysan yihiin biraha aan daxalaysan;

(18) Qolalka gawraca, xubno saarida iyo wax soo saarka hilibka lagaga shaqeeyo, waa inay yeeshaan hawo iyo iftiin ku filan;

(19) Kawaan kasta oo xoolaha lagu gawraco, waa inuu ku qalabeysan yahay ama ku diyaarsan yihiin agab ku filan oo loogu talagalay qaboojinta iyo kaydinta hilibka neefka la xubno saaray, isla marka la gowracaba, qalabkaasina waa inay yaalaan meelaha gawraca, ka saarida uur ku jirka iyo qaboojinta;

(20) Qalabka ugu yar ee loo baahan yahay in loo dhiso baadhista caafimaadka hilibka xoolaha oo digaagu ku jirin waxay kala yihiin:-

a) Khaanado ka samysan biro shabag ah oo madaxa neefka lgu baadho.

b) Miisaska ama gaadhi gacmeedyo loo adeegsado uur ku jirta;

c) Khaanadaha, saxaaradaha iyo qalab kale ee ku haboon in lagu guro laguna hayo xubnaha xoolaha sida madaxa, carbka, qanjidhada, xameetida iyo beeryarada ee neef kasta oo la qalay, waa in la siiyaa lambar lagu garto ilaa ay baadhisto ka dhammaanayso, si loo garto neefkii lahaa xubnahaas.

## Qaybta IV – Nadaafada Qofka

**1.** (1) Qodobada kale ee ku jira xeerarkan waxaa soo raacaya nadaafada qofka shaqaalaha ah ee kawaanka, waa in lagu dhaqmaa arrimahan soo socda, taas oo la odhan karo wakhtiga shaqado socoto howl wadeenka kawaanku shaqaalihiisa ama wakiilado waa inay;

(a) Waa inay xidhaan dhar midkoodu khafiif yahay oo ka ilaaliya wasakhda si fududna loo maydhi karo, waana inay yaalaan tiro ku filan oo dharka shaqada ah si ay ugu fududaato shaqaalaha inay badalan karaan maalin kasta ama sida u amro baadhaha caafimaadka xooluhu, labiska waxaa ka mid ah koodhadh cad-cad, gacma gashi, koofiyado, af gashi, karanbiyool iyo kabo boodh ah oo caag ah.

(b) Laguma hayn karo qolka badalasha dharka oo aan ka ahayn labiska shaqada ee la ogol yahay

(c) Laguma badal karo qaybaha kale ee shaqado ka socota.

(d) Kuma haysan karaan dharkooda qof ahaaneed iyo waxyaabaha kale qaybaha kale ee shaqado ka socot;

(e) Waa inay xidhaan waxyaabo sharciyeysan oo timahooda ka celiya inay ku dhacaan hillibka, sida shabaqa timaha, koofiyado ama duubka madaxa waxyaabaha gadhka la gashado, kuwaas oo dhammaan loo istimaalo in timaha go'aya looga ilaaliyo hilibka.

(f) Dharka shaqada waxay badali karaan haddii duruufi timaado ama u amro baadhaha caafimaadka hilibku;

(g) Waa inay xidhaan afka iyo sanka marka ay qufacayaan ama hindhisayaan, sigaar lama cabi karo, wax laguma calalin karo, waxna laguma cuni karo, si kasta ahaatee, waa inayna u dhaxeyn shaqaaluhu kawaanka gudihiisa iyo dibada kawaanka xiliga shaqado socoto;

(h) Waa in la baadhaa shaqaalaha Caafimaadkooda xiliyo kala duwan ee suura galka ah, iyada oo loo baadhi karo qof-qof ama shaqaalaha oo dhan markasta oo u amro baadhaha caafimaadka hilibku;

(i) Shaqaaluhu waa inay wargaliyaan Maamulaha kawaanka markasta oo ay xanuunsadaan ama lagu tuhumo xanuun;

(j) Shaqaaluhu waa inay gacmaha maydhaan inta shaqada lagu jiro si loo ilaaliyo heerka faya-dhowrka fiican, iyaga oo istimaalaya saaboon iyo waxyaale kale oo la ogolaaday inay gacmaha ku maydhaan; iyo

(k) Dumarku waa inayna xidhan dahabka, timo dheer oo aanay ku xidhneyn koofiyad iyo cidiyaha gacmaha oo aanay soo marsan xamuurada iwm.

(2) Qof kasta oo uu ka mid yahay mas'uulku, shaqaalihiisa ama wakiilkiisa oo ku xadgudba qawaaniinta xeerkan- wuxuu galay gef/dembi, waana lagu qaadayaa dembiga uu galay………

## QAYBTA V- Baahiyaha Nadaafada iyo dhismayaasha shaqalaaha

1. Kawaanada gowraca xoolaha hilibkooda la dhoofiyo waa in lagu qalabeeyaa Agabka nadaafada oo ku filan iyo dhismayaal ku fulin shaqaalaha oo ay yeeshaan. Baahiyaha gaarka ah waxay noqonayaan kuwa soo socda:-

a) Qolalka Xubnaha xoolaha la qalay lagu kala saaro, musqulaha /suuliyada waa inay ahadaan ku faalal ah, tiro ahaana ku filan kawaanka meelo ku haboona ka dhisan.

b) Meelaha wajiga iyo gacmaha lagu dhaqdo oo casri ah oo leh biyo kulul iyo biyo socda oo qabow, weel saabuun ku jirto, warqadaha gacmaha ee la tuuro, towaalo, waa in laga helo musqulaha kawaanka dibadiisa ka dhisan, waana in lagu kormeeraha shaqaalaha sida ay u istimaalaan musqulahaasi;

c) Kanaalad ka yimaada musqulaha waa inaan laga saarin suxuunta qabta xaydha iyo dufanka;

d) Dhammaan dadka ka shaqaynaya wax soo saarka, waa in loo dhigaa meelo ku haboon agabka nadiifinta gacmaha iyo qalabka jeermis dilayaasha.

2. Dhamaan qolalka shaqadu ka socota iyo kuwa kaydinta iyo waaxyaha kawaanada hilib dhoofinta ee laga soo saaro waxyaabaha la cuno, waa in lagu maamulaa xaalad nadaafadeed la aqbali karo. Dhismayaasha kawaanada kale ee hilib dhoofinta waa inay si fiican u si bidhaysan yihiin, loona sameeyaa biyo saar fiican, laguna hayaa xaalad nadaafadeedu nidaamsan tahay. Dhammaan suxuunta qabata wasakhada ee dhismayaasha, waa inay sidaa oo kale u dhisan yihiin kuna yaalaan meelo ku

haboon, waana in laga taxadiraa lana xaqiijiyaa in lagu hayey xaalad la aqbali karo;

3. Kawaanka kasta oo hilib dhoofin ah, waaxda hilibka lagaga shaqeeyo ama lagu diyaariyo lagama shaqaaleyn karo qof kasta oo qaba cudurada gudba ama faafa, joogana marxalada faafida cudurka;

4. Kawaankan kasta oo hilib dhoofiya waa inuuna ku hayn qof oo u ku dhacay cudur la isqaadsiiyo ama jooga marxalada faafida ama la nool qof qaba cudurkaasi, in u ka shaqeeyo waaxyaha hilibka lagu hagaajiyo ama lagu diyaariyo;

5. Kawaan kasta oo lagu gowraca xoolaha waa inuu leeyahay biyo ku filan oo gaadhaya ugu yaraan 1500 oo litir oo loogu talagalay koox kasta oo xoolaha ah oo llooga sameeyo meelo ku haboon oo dibada ah.

## QAYBTA VI– Hanaanka Gawraca Xoolaha

1 (1) Hab sharciyeedka loo gawraco xoolaha wuxuu noqonayaa sidatan;-

(a) Kuma haboona neefka la gowracaya in la garaaco oo neefka ku keeni kara xanuujin aan loo baahnayn; iyo

(b) Wax dhiig baxah deg deg ah ku keeni kara;

## Shuruudaha Gawraca Xalaasha ah ee Geela

(2) Marka Geela la gawracayo, waxyaabaha soo socda waa in laga taxadira

a) Xoolaha oo la garaaco inta ay ka miyir beelayaan

b) Goynta Xangullada luqnta marka la gawracayo;

(2) (1) Iyada oo ah in la raaco baahiyaha xeerka 1, sharciga gawraca laftiisa wuxuu noqon karaa qalab ama aalad u ansixiyey Agaasimuhu.

(2) Iyada oo aysan jireyn jecleysi ama necbeysi awaamiirta xeerka 1 ee qaybtan 1, aalada gawraca ama habka gawraca waxaa raaci kara waqtigan la joogo:−

a) Qalab loogu tala galay gawraca oo lagu ansixiyey Hababka xalaasha ah ama shuruudaha diinta looga baahan yahay xagga gawraca, dhaqanka ama caadada laga yaqaan wadanka, ama sida ay dalbadeen dalalka macaamisha ah iyo qalabka ay la yimaadaan haddii qalabkaasi waa faqsanayn shuruucda xeerka 1-aad; ama
b) Waxaa kaloo la isticmaali karaa Mindi ka sameysan bir oo afaysan oo lagu gawraco xoolaha yar yar sida Riyaha iyo idaha.

3. Qofka xoolaha gawraca nadaafadiisa ka sakow ee looga baahan yahay waa inuu yahay qof awood iyo tababar u leh, fulin karana gawrac deg deg ah ee xoolaha;

4.(1) Xoolaha soo socda waxaa ka reeban qaliinka iyo in lageeyo meelaha xoolaha lagu qalo ee sharciyeysan ee hoos yimaada sharcigan, Xoolaha ka caagan gawraca waxaa ka mid ah:

a) Xoolaha riman ama looga shakisan yahay inay riman yihiin ama xoolo dhalay in ka yar 3-bilood,

b) Xoolaha la jaqayo (Irmaan).

c) Xoolaha buka ama kuwa loo arko inay bukaan marka la samaynayo baadhista gowraca ka hor waxay noqonaysa dambi, qof kasta oo daweeya ama isku daya inuu daweeyo xoolo caafimaad ahaan loo aqoon saday inay bukaan, si loo dhaafiyo baadhist caafimaadka xoolaha gowraca ka hor, xoolahaas oo hore laga joojiyey gowraca.;

d) Xoolo dhagta ka suntan, kuwo dhaqmaati loo reebay ama wasiirku ka soo saaray amar rasmi ah oo dowladeed;

e) Xoolo ku soo dhintay intay safarka ku jireen ama intay ku jireen xerada nasashada kawaanka ee sugayey baadhista caafimaadka gowraca ka hor. Raqda xoolahaas waa in laga saara kawaanka iyo baabuurka, waxaana lagu tuurayaa meelaha u ku taliyo baadhaha caafimaadka xooluhu. Si kasta ha ahaatee, xoolaha dhinta inta lagu jiro baadhista gowraca ka hor waxaa lagu dhaqmayaa sida ku qeexan qodobada xeerkan;-

f) Xoolaha gowraca u ka joojiyey baadhaha caafimaaku si ay u soo dhamaystaan baadhista gowraca ka hor;

g) Xoolo aan la garanayn meesha ay ka yimaadeen ama cidii lahayd;

h) Xoolo muran ka taagan yahay ama la isku haysto;

i) Xoolo laga saaray hadana lagu soo celiyey xeryaha lagu hayo Baadhista gowraca ka hor, kuwaas oo uusan ogayn, ogolaana baadhaha caafimaadka xooluhu. Waa inuu amraa baadhaha caafimaadku in xoolahaasi laga saaro kawaanka, Maamulaha kawaankuna fuliya amrka.

j) Xoolaha inta lagu jiro baadhista noqda kuwo aan daganeyn oo dhib badan, khatarna galin kara baadhaha caafimaadka, ama qof kasta oo ku jira kawaanka, ama xoolaha kale ee u dhex jiro. Haddii dhacdadan ay jirto, xoolahaas waxaa lagu go'doominayaa awaamiirta baadha caafimaadka

xoolaha, waxaana loo go'doomiyaa in la ogaado daganaasha la;aanto inay la xidhiidho cudur ama wax kale. Inta ka dib baadhaha caafimaadku waa inuu qaataa ogaanka ku haboon.

(2) Neef kasta oo qaab dhismeedkiisu dhamayn, laangadha ah ama indhaha wax ka qaba sababaha kaliya dartood loogama joojin karo gowraca, hadii qaab dardo, dhutin ama indha la,aanta sida ku xusan xeerkan, aysan muujinaynin calaamado cudur ama xaalad kale oo saamayn ku yeelan karta guud ahaan hilibka sida u yahay.

5. Waa gef/dambi in lagu xadgudbo awaamiirta xeerkaan.

## Qaybta VII- Waajibaadka baadhaha caafimaadka hilibka iyo Maamulaha kawaanka Gowraca xoolaha

Waajibaadka baadhaha caafimaadka hilibka:

1. (1) Iyada oo uusan dhaawacayn waajibaadka iyo masuuliyada saaran baadhaha caafimaadka hilibka ee hoos imaanaya sharcigan ama sharci kale oo dejisan baadhaha caafimaadku waa in uu:

(a) Inu hubiyo in masuulka kasta ku dhaqmay, dhowray, raacay, ilaaliyey hab sami u codka barnaamijka faya-dhowrka ee kawaankiisa, isaga eegaya heerka faya-dhowrka shaqaalaha, agakiisa, qalabka iyo kawaanka laftiisa (gudo iyo dibba),xidhmaynta, weelka qashin qubka, rarida iyo safrinta hilibka u diyaariyey iyo wixii kale ee u baahan yahay in u qabto ee hoos imanaya xeerkan, baadhaha caafimaadka hilibku waa inuu cusboonaysiiya barnaamijka baadhist markasta sida loo rabo. ga;

(b) Baadhis iyo kormeer adag ku sameeyaa xoolaha u diyaarsan in la gawraco, iyo marka la gawraco kadib, agabka, qalabka, xaaladaha iyo wax kasta o looga baahan yahay baadhuhu inuu kormeer adag ku sameyo, waana inuu go'aan qaadasho adag leeyahay, soo saari karo amaro, qaadi karo tillaabooyin lagama maarmaan ah, samayn karo wax kasta oo looga baahan yahay inuu sameeyo oo waafaqsan sharcigan;

(c) Isaga laftiisu waa inuu adeecaa una hogaansamaa waxyaabaha looga baahan yahay ee la xidhiidha heerarka faya-dhowrka hilibka, badbaada iyo nadaafada ku xusan xeerkan iyo sharciyadan.

(d) Waa in u leeyahay labo mindiyood oo aan daxalaysan afleh mar kasta nadiif ah oo jeermis tiran; markasta oo mindiyahaasi wasakhoobaan lama isticmaali karo ilaa si fiican loo nadiifiyo oo la jeermis tiro;

(e) Inuu taabto, tuujiyo ama jeexo dhammaan xubnaha iyo waaxyaha neefka la qalay, hadii markaa go,aan munaasib ah u baadhuhu ka gaadhi waayo jeexista xubnahaas iyo waaxyaha, waa inuu xubna kale sii jeexaa ama gooyaa qaybo kale oo ka mid ah neefka una gudbiyaa baadhka si loo baadho.

(f) Marka u taabanayo ama jeexayo qaybaha jiran, waa inuu ka taxadiraa inuu gaadhsiiyo geermiska xubnaha iyo qaybaha kale ee caafimaadka qaba iyo sagxada iyo qaybaha kale ee dhismaha kawaanka.

(g) Waa inuu si haboon u calaamadiyo ama u ama cadeeyo xubnaha iyo qaybaha dhammaan xoolaha la qalay, isaga oo ku dhajinaya warqad yar sida ku xusan Jadwalkan, iyada oo u qaadanayo mid ka mid ah go'aanadan:–

(i) "PASSED" (Ogolaaday) xoolaha la ogolaaday in qalo shuruud la,aan, kuna haboon in dadku cuni karo ama quudan karo;

(ii) "SUSPECTED" (laga shakiyey) xoolaha looga shakiyey inay bukaan, dibna xerada loogu celiyey si baadhis labaad loogu cesho; ama

(iii) "CONDEMNED" (loo aqoonsaday inaan la isticmaali karin/la cuni Karin ) loo diyaarshay in la daadiyo ama la baa'ba'sho.

(h) Inuu xaqiijiyo xubnaha iyo qaybaha neefka la qalay ee la calaamadeeyey iyada oo la raacayo sharciga 1 (1) (g), laguna kaydiyey goobo loogu talagalay sida lagu xusan Jadwalkan;

(i) Inuu xaqiijiyo waxyaalaha loo calaamadeeyey in laga shakiyey, reebay ama la tuuray, ahaayeen kuwa la hayey ilaa inta ay ka dhammaanayso baadhista caafimaadku;

(j) Ma burburin karo xubnaha qiimaha leh ee neefka la qalay marka u samaynayo jeexida baadhista xubnaha.

(k) Mar kasta baadhuhu waa inuu kormeeraa bugaagta iyo diiwaanada loo baahan yahay inuu hayo Maamulaha kawaanku, sida sharcigan ku qoran; iyo

(l),Waa inuu sameeyaa wax kasta oo kale oo looga baahan yahay in u sameeyo sida u qeexayo sharcigan;

(2) Agaasimuhu waa inuu ka qaataa go'aan adag oo ku habboon baadhaha xoolaha ee ku xadgudba awaamiirta xeerkan, ama ku fashilma ama dayaca gudashada waajibadkiisa ee sharcigan hoos yimaada; haddii baadhaha caafimaadku u xubin ka yahay (ka tirsan yahay) Agaasimuhu ama qof kasta oo kale waxay u sheegi karaan

Ururka u ka tirsan yahay u ka qaado talaabooyinka ku haboon oo ciqaab ah ka qaado Sarkaalkaas.

## Waajibaadka Masuulka Kawaanka Gawraca Xoolaha.

**3(1)** Iyadoo una dhaawacayn waajibaadka iyo masuuliyada saaran ee ay siinayaan xeerarka kale ee hoos imaanaya sharcigan, Maamulaha kawaan kasta ee ku sharciyeysan xeerarkan;

a) Inuu haysto diiwaan rasmi ah oo ku muujinayo tirada xoolaha loo keenay qaliinka kawaankiisa, tirada xoolaha la diiday in la qalo haddii ay jiraan, iyo inta kgm oo hilib cusub ah ee laga raray kawaankiisa todobaadkiiba iyo cida loo raray. Haddii duruufuhu saamaxaan inta shixnadood ee u raray wakhtiyada gowraco jiro;

b) Inuu qaado tilaabooyin kasta oo u ku xaqiijinayo in shaqaalaha, wakiilada ama qof kasta oo ku casuuman kawaanka inay ku dhaqmaan waxyaabaha looga baahan yahay sharcigan;

c) Inuu xaqiijiyo in baadhaha caafimaadka xoolaha la siiyey agab ku filan oo loo qaad-qaadi karo kawaanka gudihiisa, si ay u fududeeyaan inuu fuliyo shaqadiisa hoos imaanaysa xeerkan, haddii gacan lagu siiyo sargaalka, wuxuu awood u yeelanayaa inuu diiwaan galin sameeyo, waxa kale oo u madax banaanayaa inuu kala hadlo shaqaalaha ama wakiilkiisa, hadba sida u rabo in loo qabto shaqooyinkiisa.

d) Inuu qaado tillaabooyinka lagama maarmaanka ah ee u ku xaqiijinayo dhamaan heerarka shaqada ee kawaankiisa, iyo inuu fuliyey shuruudihii sharciga iyo inuu dabagal ku sameeyey (including microbiological checks the director may require) faya-dhowrka guud iyo xaalada wax soo saarka, si u xaqiijiyo in lagu dhaqmay;

e) Inuu hayo natiijada diiwaanka ee dabagalka ku samayey ee ku xusan farqada (d) iyo inuu ka helo baadhaha caafimaadku marka u codsado;

f) Inuu ku kaydiyo foomam rasmi ah /diiwaan natiijada baadhista biyaha ka soo baxda ama saabuunta la baadhay, kimikalis iyo walxaha u laga baahan yahay sharcigan eek u saabsan faya-dhowrka iyo habka ugu fiican ee soo saarka hilibka kawaanka, natiijada baadhistu waa inay diyaar u tahay baadhah caafimaadku marka u baahdo.

g) Xaqiijinta sumad kasta oo lagu dhajiyo oo ku daabacan sumad caafimaad in la isticmalo marka u amar adag ka baxsho baadhaha caafimaadka xooluhu;

h) Inuu xaqiijiyo in deg-deg loo ogaysiiyey warbixinta meelaha u ku ururiyo qashinka maamuluhu, ay soo wajahday wax khatar ku caafimaadka;

i) Inuu hayo diiwaanada mudo shan sano sida xeerkan qeexayo ama muda kale oo Agaasimuhu cadeeyo;

j) Inuu diyaariyo ama ka sameeyaa kawaankiisa barnaamij tababar loogu sameenayo shaqalaha si ay ugu dhaqmaan shuruucda faya-dhowrka iyo baahiyaha kale ee ku haboon howlaha ka socda kawaanka, isaga oo la tashanaya baadhaha caafimaadka hilibka, sarkaal ka socda caafimaadka guud ee dadka ama sarkaal kale oo ay arrintani khusayso; iyo

k) Inuu guto howlaha kale ee u baahdo Agaasimuhu wakhti ilaa wakhti;

(2) Mas,uul kasta oo ka soo bixi waaya inuu u ku dhaqmo awaamiirta firqada (1) ee xeerkan wuxuu galay gef/dambi, waxaa kale oo u dheer mas,uulka in loo gudbiyo Maxkamada, Maxkamadu waxay amraysaa in laga qaado Ruqsada shaqada ama laga fadhiisiyo shaqada muddo cayiman ama laga xidho kawaanka.

## Qaybta VIII- Baadhista caafimaadka xoolaha Gowraca iyo hilibka

### Qaybta 8.1 – Nidaamka Guud ee Baadhista

1- Dhaadhaha caafimaadka Xooluhu, isaga u adeegsanaya hab cilmiyeysan baadhista caafimaadka hilibka wuxuu ugu horayn sameynaya baadhista xoolaha loo keenay qaliinka kawaanka, ujeedada kowaad ee laga leeyahay waxay tahay in la xaqiijiyo in xoolaha la keenay kawaanka ay yihiin kuwo aradtida guud caafimaad qaba iyo inay yihiin kuwa shuruud la,aan ku haboon in la qalo.

2- Isla marka la gawraco xoolaha soo maray baadhista caafimaad gowraca ka hor, baadhaha caafimaadku wuxuu samaynayaa baadhista caafimaad ee xoolaha gowracay kadib, ujeedada kuwaad ee laga leeyahay baadhitaankan waxay tahay in la xaqiijiyo hilibka neefka la qalay, xubnaha hilibka ee aan la cunin iyo dhammaan waaxyaha neefka la qalay ka caafimaad qabaan cuduro kana muuqan wax isbadal ah, yihiina kuwa la quudan karo;

3- Iyada oo uusan dhaawaceyn waxyaabaha looga baahan yahay nidaamka baadhista ee ku xusan jadwalkaan, baadhista caafimaad "Post Mortem" ee la sameeyo gowraca kadib waxaa ka mid ah:

(a) Aragtida muuqaalka guud ee xubnaha neefka la gawracay;
(b) Taabasho/ Tuujin; iyo

(c) Xubno Jeexid/Goyn iyo Baadhis;

4- Baadhaha caafimaadka hilibka xooluhu wuxuu qaban kara nidaam kasta oo u gaar ah oo u ku baadhayo neef kasta oo la qalo qaybihiisa, ama xubnaha xoolaha kala gadisan ee ay saameeyeen cuduro aan caadi ahayn sida duruufuhu ogolyihiin;

**Qaybta 8.2- Baadhista caafimaadka xoolaha gowraca ka hor;**

1. Xoolaha waa in si deg-deg ah loo baadhaa caafimaadkooda inta aan la gowricin, marka laga reebo xaaladaha deg-dega ah ee u soo jeediyo baadhaha caafimaadku, laguma qali karo xoolo kawaan kasta oo aan soo marin baadhaha caafimaadka xoolaha oo uuna soo dhamayn baadhista gowraca ka hor, kuna talo bixin in la qali karo;

2. Lagama saari karo xeryaha kawaanka xoolo soo galay haddii loo keenay qaliin ama si kaleba ilaa laga helo ogolaasho qoraal ah baadhaha caafimaadka xoolaha;

3. (1) Baadhista xoolaha gowraca ka hor waxaa lago qaban karaa goobaha lagu dajiyo ama xeryaha gudaha kawaanka, kuwaas oo leh iftiin ku filan oo loogu talagalay baadhitaanka; iyo

(2) Go,aanada baadhista gowraca ka hor;

a) La ogolaaday shuruud la,aan in la qalo
b) La diiday in la qalo iyada lala xidhiidhinayo sababaha ku cad sharcigan.
c) Lagu taliyey in deg-deg loo qalo, iyada oo loo eegayo xuquuqda xoolaha eek u xusan firqada (3) ee xeerkan;

(3).Xoolaha waxaa Gawraca Deg deg ah la marin karaa haddii –

a) Neef dhimanaya inta lagu jiro baadhista caafimaadka gowraca ka hor;
b) Neef jabay ama nabur ku dhacay xiliga lagu jiro baadhista caafimaadka gowraca ka hor, si kasta ha ahaatee neefka lama qali karo haddii naburka jabniinku keenay ama dhaawacu ula muuqato baadhaha caafimaadka inay gaadheen marxalad ay ka dhalan karaan cudur dhaliyayaal, kuwaas oo saamayn ku yeelan kara dhammaan jidhka neefka, hilibkiisana gaadhi karaan germisyadaasi.

c) Waxaa kale oo jiri kara siyaabo kale oo baadhaha caafimaadka ula muuqato inay keeni karto marxalada gawraca deg- deg ah;

(4) Inta lagu guda jiro baadhista gowraca ka hor waa in baadhuhu u ogaadaa arrimaha soo socda:

(a) Calaamadaha cudurka ee saamayn kara Caafimadka guud ee Neekfa ama hoos u dhac ku keeni kara hilibkiisa;

(b) Haddii ay jiraan cudurada faafa ee la yaqaano ama ay jiraan calaamado cudur oo loo arko inuu fidayo; iyo

(c) Nooca xoolaha, Jinsigiisa, midabkiisa, da'diisa, dabeecadiisa iyo heer kulka jirkiisa;

5**.** Waa inuu si gaar ah baaadhaha caafimaadku ula socdo arrimaha soo socoda:-

(a) Xaalada ama marxalada nafaqo ee neefkaasi u ku sugan yahay;
(b) Qaabka socdka neefka iyo istaagiisa.
(c) La qabsiga deegaanka;
(d) Saantiisa, haragiisa iyo dhogortiisa;
(e) Dheef shiidka sida (dibnaha, afka, dabada, calyo-ceshiga, nooca saxarada (saalada) iyo cunto qaadashada;
(f) Dabnaha sibiisha, sibiil iyo candhada; iyo
(g) Habdhiska neefsiga (dulalka sanka iyo neefsashada).

6. Neef kasta oo laga shakiyey baadhista gowraca ka hor ama lagu calaamadiyey in laga shakiyey ama la joojiyey, waxaa lagu qalayaa qaybta dhismaha loogu talagay xoolaha jajabay ama kawaanka caadiga ah marka u dhammaaado qaliinka xoolaha caafimaadka qaba;

7. Baadhe kasta oo fulinaya baadhista gowraca ka hor waa inuu qoraal u kula socodo siiyaa sarkaalka masuulka ka ah ama baadhaha (sagxada gowraca) samaynaya baadhista gowraca kadib, sababta xoolahaas looga dhigay kuwo la shakiyey;

8. Xoolo Kasta oo lagu arko cudur marka baadhista gowraca ka hor la samaynayo ama xaalad suurta galinaysa in la tuuro neefka marka baadhista gowraca ka hor, waa in neefkaasi lagu calaamadeeyaa tuuris aan la cuni Karin; "Condemned"

9. Xoolo Kasta oo lagu sumadeeyo Calaamada ah lama cuni karo, lamana isticmaali karo ("Condemned") haddii uuna ahayn neef dhintay, waa in lagu dilaa qolka loogu tala galay oo kaliya xoolaha la tuuray ee hilibkooda la cuni karin, waana inaan loo gudbin qaybaha kale kawaanka ee laga soo saaro hilibka dadku quudanayo;

## Qaybta 8.3 –Baadhista guud ee la sameeyo gowraca ka dib:

**1.** (a) Baadhista gowraca ka dib waa in loo sameeya sida ugu dhakhsaha badan ee suurta galka ah, marka xoolaha la gowraco, marka laga reebo xaaladaha gowraca deg-dega ah iyada oo la raacinayo nidaamka halkan la inagu siiyey kadib, baadhaha caafimaadku waa inuu u isticmaala baadhitaanka shaybaadhka ee lagu ogaado khatarta aan lagu soo sheegin baadhista loo yaqaano "organoleptic" haddii laga shakiyo;

2. (1) Neefka la gawracay waa in si guud loo baadhaa si loo xaqiijiyo arrimaha soo socoda:
   a) (Xaalada ) marxalada nafaqadiisa neefka la qalay;
   b) Haddii u jiro dhaawac jidhka ka soo gaadhay neefka, dhiig bax, dhaawac ama isbadal ku yimaada midabkiisa;
   c) Heerka dhiig baxa;
   d) Haddii u jiro barar meelo jidhka ka mid ah ama barar guud (oedema);
   e) Waxyaabo kale oo aan caadi aheyn haddii ay jiraan sida barar, lafaha oo qaabkoodu xumaaday, xaglaha isku xidhka, murqyada, ama unug/xubno.
   f) Xaaladaha xuubabka (pleura and peritoneum)..

(2) Mindhicirada neefka waa in laga soo saarasa neefka , laguna baadhaa dibada neefka;

(3) Qanjidhada waa in lagu baadhaa taabasho/tuujin iyo jeexid hoos iyo dherar haddii loo baahdana dibada ayaa loo soo saari karaa si baadhitaan faah-faahsan loogu sameeyo;

(4) Murqaha neefka la qalay iyagana waxaa loo baadhayaa iyada oo la eegayo qaabka guud lana jeexayo;

(5) Dhiiga waa in la baadhaa iyada oo ahamiyad gaar ah la siinayo dhinacyada midabka, adkaanta, iyo awooda difaaca dhiiga;

(6) Neef kasta oo la gawracay, xubin ama qayb ka mid ah oo looga baahan yahay baadhitaan dheeraad ah waa inuu hayaa baadhaha caafimaadka hilibku ku qoraa kor ka xubinta /qaybta la hakiyey (detained);

(7) Jeexniin Kasta ama Goyn kasta oo neefka la gawracay lagu sameeyo waa in loo sameeyaa hab aan lagu dhaawicin qiimaha suuqa ee hilibka ama xubinta.

**Qaybta 8.4- Baadhista xoolaha isku nooca ah goawraca ka dib**

**Lo'da da'deedo ka weyn tahay 6 todobaa**

Neefka Lo'da ah ee La gawracay ee da'diisu ka weyn lix todobaad, hilibkiisa la cuno iyo kuwa aan la cunin waxaa la raacaya nidaamka baadhista gowrac ka dib ee soo socda:

1. Baadhista iyo eegista madaxa iyo hunguriga: jeexida iyo baadhis lagu sameeyo lafaha daanka, dalqada hoos ee hunguriga iyo qanjidhada hoose ee dhagaha (Lnn retropharyneak, mandibulares and parotidei); baadhista muruqyada daamanka, iyada oo loo samaynayo laba jeexitaan oo la siman lafta daanka iyo muruqyada hoose (internal pterygoid muscles) oo loo jeexayo xariiq dheer oo siman. Carabka waa la sii daayaa si afkiisa iyo gudaha hoose ee dhuunta loogu sameeyo baadhis aragti dhammaystiran iyada oo la israacinayo taabasho iyo aragti, qanjidhada dhuunta waa in la saaraa;

2. Baadhis lagu sameeyo hunguri cadka iyo hunguriga Cuntada: Baadhis aragti ah iyo tatabasho lagu sameeyo sambabada; in la jeexo lana baadho qanjidhada dhuunta hawo mareenka ee sambabada (Lnn. Bifucationes, eparteriales and mediastinales). Hunguri cadka iyo xubnaha kale ee neefsashada waa in la furaa, sambabadana waa in la jeexaa; jeexitaanadan ma ah kuwa lagama maarmaan ah meelaha aan sambabada la cunin;

3. In la eego lana baadho wadnaha iyo xuubka ku dahaadhan, iyada oo wadnaha loo jeexayo si dherar ah, si la iskugu furo qolalka ama godadka hoose ee wadnaha lana furo darbiga u dhaxeeya labada qol ee midigta iyo bidixda wadnaha;

4. In si guud loo eego loona baadho muruqa boga (diaphragm) u dhaxeeya shafka iyo calool ku jirka;.

5. Baadhis guud iyo eegid lagu sameeyo beerka iyo qanjidhada beer yarada (Lnn Portales) oo la taa-taabanayo / tuu-tuujinayo iyo, haddii loo baahdo la jeexo beerka iyo qanjidhada;

6. Baadhis iyo eegid lagu sameeyo jidka caloosha iyo mindhicirada (gastro-intestinal tract), mindhicirada (mesentery), qanjirada mindhicirada iyo caloosha (Lnn. Gastrici, mesenterici, crainales and caudales); Haddiii loo baahdo waa la dilaacin karaa waana la taataban karaa qanjidhada caloosha iyo mindhicirada.

7. Baadhis iyo aragti lagu sameeyo beeryarada, haddii loo baahdana waa la tataban kara;

8. Baadhis iyo aragti lagu sameeyo kelyaha, haddii laga maarmi waayana la jeexo kelyaha iyo qanjidhada (Lnn. Renales);

9. Baadhis iyo aragti lagu sameeyo xuubabka daboola saablayda iyo kuwa daboola caloosha iyo mindhicirada (pleura and the peritoneum).

10. Baadhis iyo aragti guud oo lagu sameeyo Xubnaha taranka (marka laga soo reebo xineeyaha, haddii aan hore loo tuurin ama loo gooynin);

11. Baadhis iyo aragti lagu sameeyo candhada iyo qanjidhada candhada, haddii laga maarmi waayana la taabto ama la jeexo ((Lnn. Supramammarii), candhada Lo'da dhidig waa in qayb ahaan la furaa iyada oo hoos aad loogu jeexayo ilaa inta laga gaadhayo qanjidhada soo daaya caanah iyo qanjidhada kale ee candhada oo aysan ku jirin qaybaha dadku quudan;

## Lo'da da'deedu ka Yar tahay 6 todobaad:

Neefka Lo'da ah ee La gawracay ee da'diisu ka yar tahay 6 todobaad, hilibkiisa la cuno iyo kuwa aan la cunin waxaa la raacaya nidaamka baadhista gowrac ka dib ee soo socoda:

1. Baadhis guud iyo aragti lagu sameeyo madaxa iyo hunguriga: in la jeexo lana baadho qanjidhada dalqada (retropharyngeal); baadhis lagu sameeyo afka iyo gudaha hoose hunguriga, tatabasho carabka; iyo goynta qanjidhada hunguriga;

2. Baadhis lagu sameeyo hunguri cadka iyo hunguriga Cuntada: Baadhis aragti ah iyo tatabasho lagu sameeyo sambabada; in la jeexo lana baadho qanjidhada dhuunta hawo mareenka ee sambabada (Lnn. Bifucationes, eparteriales and mediastinales). Hunguri cadka iyo xubnaha kale ee neefsashada waa in la furaa, sambabadana waa in la jeexaa; jeexitaanadan ma ah kuwa lagama maarmaan ah meelaha aan sambabada la cunin;

3. In la eego lana baadho wadnaha iyo xuubka ku dahaadhan, iyada oo wadnaha loo jeexayo si dherar ah, si la iskugu furo qolalka ama godadka hoose ee wadnaha lana furo  darbiga u dhaxeeya labada qol ee midigta iyo bidixda wadnaha;

4. In si guud loo eego loona baadho muruqa (diaphragm) u dhaxeeya shafka iyo calool ku jirka;

5. Baadhis guud iyo eegid lagu sameeyo beerka iyo qanjidhada beer yarada (Lnn Portales) oo la taa-taabanayo / tuu-tuujinayo iyo, haddii loo baahdo la jeexo beerka iyo qanjidhada;

6. Baadhis iyo eegid lagu sameeyo jidka caloosha iyo mindhicirada (gastro-intestinal tract), mindhicirada (mesentery), qanjirada mindhicirada iyo caloosha

(Lnn. Gastrici, mesenterici, crainales and caudales); Haddiii loo baahdo waa la dilaacin karaa waana la taataban karaa qanjidhada caloosha iyo mindhicirada.

7. Baadhis iyo aragti lagu sameeyo beeryarada, haddii loo baahdana waa la tataban kara;

8. Baadhis iyo aragti lagu sameeyo kelyaha, haddii laga maarmi waayana la jeexo kelyaha iyo qanjidhada (Lnn. Renales);

9. Baadhis iyo aragti lagu sameeyo xuubabka daboola saablayda iyo kuwa daboola caloosha iyo mindhicirada (pleura and the peritoneum).

10- Baadhis guud iyo tabasho lagu sameeyo agagaarka xudhurta iyo guntimaha gudaha, haddii laga shakiyo, waa in xudunta la jeexaa guntimahana la fur-furaa, kadibna la baadhaa dheecaanka (*"Synovial Fluid");*

## Riyaha iyo Idaha La dhaqdo

Xubnaha Hilibka la cuno iyo kuwa aan La Cunin ee Riyaha iyo Idaha waxay marayaan nidaamka baadhista gowraca kadib (Post Mortem inspection) ee soo socda:-

1. Baadhis iyo aragti lagu sameeyo madaxa kadib marka haraga laga saaro iyo haddii laga shakiyo in la baadho hunguriga, afka, carabka, dalqada iyo qanjidhada dhagaha hoostooda ku yaala. Iyada oo aan meel ka dhac lagu sameyn shuruucda caafimadka xoolaha, baadhistaanadani ma aha kuwo muhiim ah, haddii madaxda sare ay balan qaadaan in madaxa, carabka iyo maskaxda aan cunto ahaan loo quudan oo la tuuro;

2. Baadhis lagu sameeyo Sambabada, Hunguri Cadka iyo Hunguriga Cuntada; in la taabto sambabada, qanjidhada iyo dhuumaha hawo mareenka (Lnn. Bifucationes, eparteriales and mediastinales); haddii laga shakiyo xubnahan iyo qanjidhan waa in la jeexaa oo la baadhaa;

3. Aragti iyo baadhis guud oo lagu sameeyo xuubka daboola wadnaha iyo xubinta wadnaha, iyaddoo wadnaha la kala jeexayo si la isugu furo qolalka ama godadka hoose ee wadnahu leeyahay iyaddoo darbiga u dhaxeeya labbada god/qol la isu furo;
4. In si guud loo eego loona baadho boga (diaphragm) u dhaxeeya saablayda iyo calool ku jirta;

5. Baadhis guud iyo eegid lagu sameeyo beerka iyo qanjidhada beer yarada (Lnn Portales) oo la taa-taabanayo / tuu-tuujinayo iyo, haddii loo baahdo la jeexo beerka iyo qanjidhada;

6. Baadhis iyo eegid lagu sameeyo jidka caloosha iyo mindhicirada (gastro-intestinal tract), xaydha daboosha mindhicirada iyo qanjirada mindhicirada.

7. Baadhis iyo aragti lagu sameeyo beeryarada, haddii loo baahdana waa la tataban kara;

8. Baadhis iyo aragti lagu sameeyo kelyaha, haddii laga maarmi waayana la jeexo kelyaha iyo qanjidhada

9. Baadhis iyo aragti lagu sameeyo xuubabka daboola saablayda iyo kuwa daboola caloosha iyo mindhicirada (pleura and the peritoneum).
10. Baadhis iyo aragti guud lagu sameeyo Xubnaha taranka (marka laga reebo xineeyaha, haddii aan hore loo tuurin ama loo gooynin;

11. Baadhis iyo aragti lagu sameeyo candhada iyo qanjidhadeeda ku jira;

12. Baaris iyo tatabasho lagu sameeyo agagaarka xudunta iyo guntimaha gudada. Haddii wax la shakiyo la arko, waa in xuduntaa la dilaaciyaa, guntimahana la furfuraa, kadibna dheecaanka loo yaqaan ″ la baaraa.

## Qaybta 8.5 Hilibka loo hayo baadhitaan dheeraad ah;

**1.** Haddii baadhaha caafimaadka xooluhu hilib u ku samayey baadhis u fikrada ahaan u arko inay haboon tahay hilibka ama qayb ka mid ah u baahan tahay baadhis dheeraad ah waa in hilibkaas, qaytaas ama xubintaas la geeyo qolka loogu talagalay baadhitaanka dheeraadka ah;

**2.** Haddii hilib neefka qayb ama xubin ka mid ah loo hakiyo baadhitaan ama tijaabo dheeraad ah si go'aan looga gaadho in dadku cuni karaan, waa la xanibayaa ilaa inta laga soo saarayo jawaabta baadhitaanka.

## Qeybta 8.6 Hilibka aan ku haboonayn in dadku cuno.

1 (a) markai baadhaha caafimaadka hilibku u ku sameeyo hilib ama qayb ka mid ah loo arko in aanay ku haboonayn cunida dadka waa in la tuuro;

(b) Haddii hilib loo aqoonsaday in aan la cuni Karin, sida sharcigan ku xusan, waa in isla markaana dhiigiisana la daadiyo.

(c) Qaybaha kale, sida unugyada nabarada leh iyo qanjidhada cunaha ee hilbka laga jaray waa in la tuuro.

(2) Sida xeerarkani qeexayo:-

(a) In neefka loo aqoonsaday in la tuuro waa in la dilaa, ama

(b) Hilibka, qayb ama xubin ka mid ah waa in la tuuro.

(c) Qaybaha uur-ku-jirta ee aan la cuni Karin, hilibka aan cunada ahayn waa in la tuura, sida neefka, hilibka, qayb, uur-ku-jirta aan la cunin ama hilib aan cuno ahayn waa in la tuura.

(i) Waa in lagu aaso god qodan ugu yaraan 60 cm; Ama
(ii) Waa in loo gubo sida ugu habboon; ama
(iii) In lagu kulayliyo goob kawaanka oo leh qalab heer-kulkiisu aad u sareeyo;-

## Qaybta 8.7 Go'aan ka qaadashada xaaladaha cudurada

1 (1) Cudurada iyo xaaladaha looga baahan yahay baadhaha caafimaadka hilibka ee hagaya go'aankiisa, si kastaba ha ahaatee waa sida ku qoran Lifaaqa 1 ee Jadwalkaan;

(2) Wasiirku isaga oo la tashanaya Agaasimaha wuxuu u kala saari kara cudurada sida ku xusan Lifaaqa 1 sida:-

(a) Cudurada xooluhu dadka u gudbiyaan
(b) Cudurada la aqoonsan yahay
(c) Cuduro aan jirin, ama
(d) Kuwa Kale

(3). Wasiirka wuxuu markay duruufi timaado kala sooci karaa liiska cudurada ku jira Lifaaqa 1, isaga oo wax ku dari karo, waxna saari kara cudurada iyo xaaladaha aynu soo sheegnay

(4) Si looga fogaado shakiga ah in cudur ama xaalad ka maqan yahay Lifaaqa1, wakhtigan la joogo, ka hor intaan Wasiirka kala soocin cudurada ku jira Lifaaqa I, dhakhtarka caafimaadka xoolaha waa in u wax ka qabto isaga aqoonta u haboon ee ku salaysan cilmiga caafimaadka xoolaha.

## Qaybta 8.8 Baadhista Shaybaadhka

1. Baadhis kasta ee sharcigani u baahan yahay, waa inay ku jiraan xirfad aqooneed iyo shaybaadh lagu xalilo, waxanay ka kooban tahay:-

(a) Sugida qaabka baadhistu u soconeyso

(b) Fulinta baadhista warbixinta ama qiimayta cudur-dhaliyaasha howlaha

(c) Waa in la hubiyaa hadhaaga Kiimikada ee laga helo xubnaha hilibka neefka heerka ugu sareeya ee la ogol yahay iyo sababaha ay u yimaadeen oo la baadho iyo talaabada haboon ee laga qaadayo.

(d) Ogaanshaha xaaladaha cudurka haya neefka; iyo

(e) Dabagalka xoolaha iyo dadku isu gudbiyaan.

(2) Baadhista Sheybaarka looga baahan yahay qaybta xeerka 1 waa in baadha caafimaadka hilibku uu fuliyaa howsha u hayo masuulka rugta;

## Qaybta 8.9 Tuurista hilibka ama xubnaha aan la cuni Karin:

1. Hilibka ama qaybaha loo aqoonsaday in aan dadku cuni Karin, waa in lagu geeyo goobaha qashin qubka kawaanka mudo aan ka badnay 12 saacadood ama xiliga cimlado u ogolaan karto marka la go,aamiyo. Hilib kasata ama qayb ka mid ah markii ugu dambayn la baadhay loo arkay inayna caafimaad qabin kuna haboonayn in la cuno, waa in baadhaha caafimaadka hilibku ku sameeyo calaamada tuurista;- Xubnaha hilibka ee la tuuray islamarkaana la calaamadayn Karin waa in si deg-deg ah loogu raro gaadiid ama weel dushiisa lagu qori karo tuuris xarfo aan ka yareen joogu ka yarayn 5 cm. Dhmmaan hilibka, qaybaha iyo xubnaha la tuuray waa baadhaha caafimaadka hilibku xanibo galiyana qolalka sida u ogol yahay xeerka Jadwalkani, haddii la tuuri kari waayo ka hor wakhtiga shaqada maalinmo dhammatay;

2. Dhammaan haamaha iyo qalabka loo isticmaalo diyaarinta, kaydinta hilibka aan la cuni Karin waa in lagu hayo qolal ka xidhan qayba kale ee loogu diyaariyo ama lagu kaydiyo hilibka la cuno, waa inayna jirin wax xidhiidh ah oo ka dhaxeeya qolalka hilibka la cuno iyo hilibka aan la cunin marka laga reebo hilibka u baadhuhu ogolaaday hilib aan la cuni Karin oo laga soo celinayo qaybaha hilibka la cunin;

3. (a) Hilibka ama xubnaha buka ee la tuuray iyada loo adeegsanayo haamo, slamarkaana waa inuu goob joog ka ahaadaa baadhaha caafimaadka hilibku si u xaqiijiyo in hilika ku jira haamaha ay yihiin kuwii loogu talagalay, waxaa kale oo loo baahan yahay in baadhaha caafimaadka hilibku hubiyo

waxyaalaha ku jira haamaha laga nadiifiyey laga dilay cudur daliyayaasha hilibkaasina ku haboonayn in la cuna;

(b).Xaydha la shiilay ee laga jaray hilibka loo aqoonsan yahay inaan la cunin, waa in la hayaa ilaa inta baadhaha caafimaadka hilibku u helayo fursad u go,aan ku qaadan karo, in noocyada xaydha ee u hubiyey baadhaha caafimaadka hilibku laga saaray waxyaabihii laga digayey in la cuni Karin;

4. Qolka haamaha ama meelaha kale ee lagu diyaariyo ama lagu kaydiyo hilibka aan la cuni Karin, waa in si wanaagsan loo ilaaliyo nadaafadooda. Waxyaalaha kale ee ku keeni kara nadaafad daro hilibka la cuno, biyaha iyo goobaha kawaanka waa in lagu kaydiyo meel xidhan oo aan cayayaanku gali Karin si looga hortago wasakhda loona isticmaalo hab celin kara wixii keeni kara isdhexgalka hilibka la cuni;

5. Haddii qalabka isagaga fogeeyo qashinka aan la hayn, hilibka buka iyo qaybihiisa kale ee aan la cuni Karin, waa in la gubaa ama god loo qodo. Haddii la doorto in god lagu rido waa in la qudaa godkaasi 2 mitir oo hoos ah, islmarkaana qashinka nuurada dusha laga shubo ama waxyaale kale oo u tilmaamay Agaasimuhu inta aan la daboolin godka;

## Qaybta 8.10 Dib u baadhista wax soo saarka:-

1. Dhammaan hilibka ama hilibka la soo saaro, ha noqdo hilib cusub, hilib daawaysan ama la diyaariyey inkasta oo hore loo soo baadhay lana gudbiyey waa in baadhaha Caafimaadku dib u baadhaa haddii ay duruufuhu u ogolaadaan, si u xaqiijiyo inuu hilibkaas caafimaad qabo kuna haboon yahay in dadku cuni karo wakhtiga laga qaadayo kawaanka hilib dhoofinta. Haddii baadhitaanka labaad la helo hilib iyo wax soo saarka hilibka oo aan caafimaad qabin kuna haboonayn in dadku cuni Karo, waa in laga jaraa shaabada /calaamada ogolaashaha lana tuuraa hilibkaas iyo wax soo saarkiisa, sida ku cad Qaybta 8.9 ee Jadwalkan.

2. Qof kasta oo ku xadgudba awaamirta xeerkaan, waxuu galay gef/dambi.

## Qaybta 8.11 Waxyaalaha Cuntada lagu daro iyo walxaha dhibta keeni kara;

1. Hilibka loogu talagalay in dibada loo dhoofiyo kuma jiri karaan waxyaalaha hililbka lagu daro oo u mamnuucay wadanka hilibka loo dhoofiyo, haddii loo

baahdana waa in lagu dhiiri galiyaa inay soo booqdaan kawaanka si loogu cadeeyo inaysan jirin wixii ay diideeni inay ka reeban yihiin hilibka;

2. Dhammaan xoolaha lagu daweeyey nooc kasto oo daawo Anti Biyootic ah ama dawooyinka chemotherapeutic ah maalmo gowraca ka hor, sida u urabo wadanka loo dhoofinayo hilibka, waa inaan la dhoofin ilaa baadhista kelyaha laga waayo wax hadhaa daawa ah;

3. Qof kasta oo ku xadguduba amar kasta oo ka mid ah qaybtan wuxuu galaya gef/dambi -----------

## Qaybta 8.12 Calamadeynta iyo Sumadeynta Weelka Hilibka, Kuwa Wax lagu Duubo iyo qardaasaynta;

1 (a) Waa Waajibaadka masuulka kawaanka hilib dhoofinta inuu xafido khadka wax lagu calaamadeeyo, warqadaha daabacan, kuwa wax lagu dhajiyo iyo wixii kale ee calaamad caafimaad loo isticmaalo, iyo agabka kale ee Agaasimuhu u baahan karo si u ugu calaamadiyo hilibka lagu diyaariyey kawaanka ee la dhoofinayo. Khadka wax lagu sunto ee gaar ahaan loo isticmaalo calaamadaynta waa inuu yahay mid aan dhib u gaysan agabka iyo hilibka dadku cuno sida Agaaimuhu ogol yahay;

b) Inkasta oo awaamiirta faqrada (a) ee kor ku xusan cadaynayso inay tahay waajibadka Masuulka, laakin haynta shabada loo adeegsado "Passed" oo ah calaamadayta hilibka iyo weelka waa mas,uuliyada baadhaha caafimaadka hilibka;

2 Calaamadaynta iyo sumadeynta caafimaadka hilibka iyo weelka lagu qaado waa inuu sameeyaa baadhaha caafimaadka hilibku. Sidaa darteed waa inuu hubiyaa in mas'uulka kawaanku u ku hayo agabka sumada khasnad qufulanta ama meel kale lagu xafido, sida u doonayo baadhaha caafimaadka hilibku;

(a) Dhammaan qalabka loo adeegsanayo sumadeynta;

(b) Sumadaha, xidhista, alaabta wax lagu duubo;iyo

(c) Dhammaan khadka iyo shabadaha ee lagu xusay xeerarkan;

3. Summada Caafimaadka waa inay tahay calaamad ka kooban labo goobo oo isdul saaran oo isku jira 35 mm, dhexdana isu jira 55 mm, ayna ku qoran yihiin warbixinta soo socoto ----

(a) Goobada Sare ee shaabada waa inay ku qornaata magaca wadanka -------------- (wadanka magaciisa);

(b) Goobada dhexda waxaa ku qornaanaya lambarka kawaanku ku diiwaan gashan yahay;iyo

(c) Qaybta hoose ee Goobada, waa inay ku qornaataa ereyga ("Passed") La ogolaaday;

Xarfaha ku qoran shaabada waa in ugu yaraan joog-goodo noqdaa 8 mm, lambarkuna noqdaa 10 mm joog ah;

4. (1) Dhammaan hilibka iyo waaxyaha xoolaha la qalay iyo weelka iyo alaabta wax lagu duubo ee lagu qaybiyo hilibka, waa in loo calaamadeeyaa qaabka u tilmaamo Agaasimuhu oo ay la socoto sida u timaamayo xeerka 3 iyo 4 (2) ee qaybtan;

(2) Marka la shabadaynayo hilibka iyo weelka hilibka ku jiro sida ku xusan xeerka 4 (1) ee qaybtan, baadhaha caafimaadku wuxuu ku dhufanayaa shaabadiisa gaarka ah oo cadaynaysa in hilibkan soo maray kuna taliyey in la bakadeeyo oo la shaabadeeyo. Sida oo kale baadhuhu wuxuu amar ku siinayaa masuulka kawaanka in laga calaamadiyo weelka dushiisa meel si fudud looga arki karo oo tilmaamaysa wakhtiga la soo saaray iyo wakhtiga taariikhdiisu dhacayso;

(3) Baadhaha caafimaadka hilibku ma samaynayo calaamadayn, dhajin iyo shaabadayn, wuxuu howshaas u wakiilanaya inay qabtaan shaqaale kasta oo u soo ogolaado mas'uulka kawaanku;

5. Weel kasta waa in la xidhaa lana duubaa sida Agaasimuhu ogol yahay, waana inay leeyihiin lambar xidhiidh ah oo loogu talagalay si loo garto masuulka lahaa weelkaas u soo calaamdeeyey;

6. Haddii hilibka la baakadeenayo oo aan la gasacadeynin, waa in marka hore baadhaha caafimaadka hilibku ansixiyaa waxa lagu duubayo iyo qaabka loo baakadaynayo, waana in masuul kasta oo duubay waa inuu xaqiijiyaa:-

(a) Baakadaha loo isticmaalayo duubida hilibka cusub ay awood u leeyihiin inay xafidaan hilibka inta la diyaarinayo ama inta la safrinayo, waana inaysan baakaduhu sababin cudur xubnaha hilibka ku dhaca, ama aysan u gudbin hilibka wax kasta oo dhib u keeni kara caafimaadka bini Aadamka;

(b) Shay kasta loo isticmaalay duubis ama baakadayn hilibka cusub looma isticmaali karo ujeedadaas mar kale, marka laga reebo baakadaha ka sameysan walxaha aan daxaleysan oo aan wax ka

gudbi karin, kuwaas oo si fudud loo nadiifin karo, kadibna si fiican loo nadiifiyey lana jeermis dilay inta aan mar kale isticmaalin;

(c) Baakad kasta waa inay ka muuqda astaanta Caafimaadka oo ku dul dhajisan baakada, calaamadaas oo looga baahan yahay inay hirgeliso baahiyaha xeerarka 3 iyo 4 ee qaybtaan; iyo

(d) Astanta caafimaadka waxaa kale oo soo raacaya lambarada diiwaanka ee kawaanka, meesha hilibka laga keenay iyo baadhaha caafimaadka hilibka ee soo ansixiyey baakadaynta iyo duubista

7 Qofna iskuma dayi karo inuu iibsado ama kasbado, sameysto ama diyaarsado ama sababo in loo keeno, loo sameeyo ama loo soo diyaarsho shaabadaha Caafimaadka, khadka, lifaaqyada warbixinada yar yar ku qoran, shaabad ama calaamado kale iyo aalado looga baahan yahay qaybta sharcigan. Isaga oo doonaya inuu ku isticmaalo hilib, weel ama duubyo, isaga oo aan ka haysan Agaasimaha ogolaasho qoraal ah;

8 Qofna kuma dhajin karo, meelna kuma dhajin karo, mana sababi karo in lagu dhajiyo calaamad caafimaad hilib kasta, weelka hilibka, duubyo ama baakado ilaa ku ka tala bixiyo baadhaha caafimaadka hilibka;

9 Weel kasta, duub kasta ama baakadaha ay waxyaabaha aan la cunin oo dusha uga ekaan kara ama lagu khaldi karo waxyaabaha la cuno, waa in lagu calaamadiyaa erayga la ma cuni karo (inedible) oo ku qoran xarfo waaweyn oo la akhri karo;

10 Agaasimuhu isaga oo la tashanaya dowladaha hoose ee qaabilsan Sharciga ruqsada, saraakiisha caafimadka dadweynaha iyo hay'ada qaranka ee wakhtigan la joogo masuulka ka ah ilaalinta deegaanka, waa inay soo saarta xeer la raaco oo ku saleysan shuruucda oo ay raacaan mas'uuliinta kawaanada xoolaha lagu qalo oo kala saaraya kawaanada magaalooyinka iyo kuwa tuulooyinka ee sharcian hoos yimaada, hagida xaalada iyo alaabta loo isticmaalo duubista hilibka macaamiishooda;

11 Qofna kama saari karo ama sabab uma noqon kara in laga saaro Kawaanka dhoofinta hilibka, wax weel ah, Duub, Baakad ama shay ah, sida ku xusan shuruucdan waa in lagu dhajaa calaamada caafimaadka hadayna dhajisnayn mid la mid ah oo si fiican u muuqata oo xeerka qaybtan waafaqsan;

12. Qof kasta oo ku xadgudba amar ka mid ah qeybtan waxuu galayaa gef/dambi.

## Qaybta 8.13 Shaabadaha iyo Shahaadada Dhoofinta Hilibka

1. Marka qofka hilibka dhoofsanaya uu dalbado in la siiyo shahaadada hilibka lagu dhoofinayo, wuxuu hilib baadhaha sharcigani u fasaxaya in uu siiyo shahaadad cadaynaysa in hilibka la baadhay oo loo dhoofin karo wadan kasta oo dibada ah. Shahadada waxa la bixinaya marka hilibku ka soo baxo kawaanka hilibka dhoofinaya. Haddii aan shahaadad la siin markaa waa in wakhti dambe la siiyo oo hilibka dhab loo badho.

2. Shahaadadaha waa inay leeyihiin lambar taxana ah, waxa loo sameeya saddex noqol ama afar haddii ay dalbato cida hilibka loo dhoofinaya. Shahaadad kasta waa in ay ku cad yihiin magaca dhoofiyaha, shixnada iyo meesha ay ku socoto, lambarka shaabada haddii ay jirto oo ay ku xidhan tahay hilibka la dhoofinayo, sida lambarka iyo nooca buqshada, calaamada shixnada, miisaanka iyo wixii kale ee xog ah ee looga baahan karo shixnada.

3. Wasiirka waa inuu qeexa habka ay u ekaanayaan shaabadaha iyo shahaadadaha dhoofinta.

4. Waa dambi in la isku dayo dhoofinta shixnad hilib ah si ka hor imanaysa sharcigan ama qawaaniinta kale ee lagu maamulo wakhtiga xaadirka ah wax dhoofinta.

## Qaybta 8.14- Diiwaanka

### Diiwaanka baadhaha caafimaadka hilibka

**1.** Baadhe kasta waa inuu haystaa buug diiwaan ah oo u ku qoro maalin walba tirada xoolaha la qalay iyo tirada loo aqoonsaday inaan hilibkooda la isticmaali Karin (la daadiyey).

**2.** Kawaan kasta oo hilib dhoofiya ama soo saara waa in uu leeyahay buug diiwaan ah oo maalin walba lagu qoro tirada gowraca iyo inta loo aqoosaday in aan hilibkooda la isticmaali Karin ee laga helay meesha dhismaha;

Buug diiwaanka waa in la xidhaa sanadka dhamaadkiisa oo warbixin sanadeed loo gudbiyo Agaasimaha bisha Janaayo ama bishii kale ee u agaasimuhu cayimo;

**3.** Buugga diiwaanka xog maalmeedka lagu qoro waa in la hayaa muddo saddex sanadood ah, warbixin sanadeedkana waa in la hayaa muddo shan iyo toban sano ah inta aan la iska tuurin;

### Qoraalada laga rabo in masuulka rugto diiwaan geliyo

4. Masuul kasta waa inuu illaaliyaa diiwaanada xilliyada lagu soo sheegay qodobka 3 ee qaybtan, diiwanada xoolaha lagu baadhay rugtiisa iyo meelaha laga keenay raadraaca warbixinahooda, balse intaa kuma koobna ee waxa kale oo ka mid ah:-

(a) Magacyada iyo cinwaanada dadka xoolaha laga soo iibsaday;

(b) Taariikhaha xoolaha la soo iibsaday ama la hantiyey

(c) Tirada iyo nooca xoolaha la soo iibsaday ama la hantiyey

(d) Tirada xoolaha la gawracay iyo taariikha la gawracay

(e) Warbixin ku filan in:-

i. In La cadeeyo hilibka neefka ama qayb ka mid ah oo tixraac leh
ii. In La cadeeyo hilibka la soo saaray oo haddii ay jiraan lagu cadeeyo qaan-sheegato, ama kartoono shaabadaysan; iyo
iii. Warbixin ku saabsan hilibka la ansixiyey, hilibka la tuuray ama kuwa laga shakiyey iyo sababaha loo tuuray ama looga shakiyey.
iv. Iyo wixii kale ee warbixin Agaasimuhu u baahan karo.

5. Agaasimaha waa inuu sameeya meel lagu ururiyo warbixinaha qoraalada diiwaanada oo tixraac kaydin leh, si ay u noqoto meel qaran oo tirooyinka iyo warbixinaha lagu sargooyo wax qabadka isaguna ahaado qofka loogu hagaagayo kaydka warbixinaha wakhtigan xaadirka ah.

6. Qof kasta oo ka horyimaada sharciga qaybtan ku xusan, wuxuu galayaa gef/dambi, waana lagu qaadayaa dambigaa u galay……………..

**Lifaaqa 1**

**I. Xaaladaha lagu hakiyo ama lagu diido in la qalo marka la baadho xoolaha gowraca ka hor.**

a) Heer kul ah 39$^{o}$C ama mid ka sareeya

b) Ilma galeenka oo ka soo dhaca

c) Mandheerta oo soo bixi weyda

d) Naasaha oo xanuunku ku cusub yahay ama ku raagay

e) Xaalad kasta oo jeermis dhiiga la socdo

f) Cudur kasta oo caabuq leh ama la kala qaado

g) Xaaladaha jidhku mililo;

h) Cadeyn muuqata in cisalka iyo xiniiyuhu soo dhaceen

i) Nabaro baaxad leh

j) Neef riman oo sidkiisu dhow yahay

**II. Xaaladaha looga baahan yahay xoolaha ama hilibkooda loo aqoonsado mid aan la cuni Karin;**

Neef kasta ama hilibkiisa oo uu ku dhaco mid ka mid ah cudurada soo socda waa in loo aqoonsadaa mid aan la cuni Karin**:**

**a)** Cudurka Anaplasmosis
.
**b)** Cudurka Kudka

**c)** Urta kaadida

**d)** Garab-Gooye

**e)** Cadho

**f)** Joonis kaadi dhiig leh

**g)** Sanboor dillaa ah (Malignant Catarrh);

**h)** Bayroblasmosis

**i)** Dhiig bax maqaarka hoostiisa ah

**j)** Cudur dhiiga raaca

**k)** Raybis

**l)** Sumowga dhiiga

**m)** Jeermis dhiiga la socda

n) Taytano

o) Cudurada maskaxda ee faafa

p) Sumowga

q) Kaadi dhiig leh

r) Finan dheecaan leh oo burbuuran

s) Xanuunka maskaxda iyo xangulada

**III- Dhiiga la daadiyo**

Haddii dhiiga ama uur ku jirta xoolaha la qalo hal weel la isugu geeyo inta aan la dhameystirin baadhista hilibka gowraca kadib, dabadeedna la ogaado in neef ama ka badan la cadeeyo in aan hilibkooda la cuni Karin, dhiigii iyo uur ku jirtii weelka la isugu geeyey waa la daadinaya;

**IV. Go'aan ka qaadashada hilibka neefka weyda ah, ka dhiciska ah iyo ka marka dhalay**

Hilibka neef la gawracay ee weyda ah, ka dhiciska ah iyo ka markaa dhalay waa in aan hilibkooda la cunin haddii laga helo waxyaalaha hoos ku qoran:-

a) W**eydi** ay ka muuqato:-

i. Haddii neefka lafta haragu isku dhageen

ii. Haddii neefka ka muuqato macaluul saayid ah oo cudur keenay;iyo

iii. Haddii muruqyadu aanay shaqaynayn, haddii ay baabado baruurta muruqyadadhexdooda ama xubnaha jidhku ka yaraadaan qiyaastoodii;

b) **Dhicis**

i. Haddii hilibku u eg yahay in biyo lagu radiyey oo leh midab casuus ah;

ii. Haddii aan muruqyadu kurin, khaasatan lugaha qaybaha sare oo barar ka muuqdo muruqyada dhexdooda;

iii. Unugyada xaydha ah ee marka dambe ku samaysma kelyaha dushooda ay barar leeyihiin, midab huruud-madow ah oo casuus leh oo baruur adag oo isku dhex jira leh;

**c) Neef Dhalay**

Neef toban maalmood ka hor dhalay, lama qali karo haddii aanu baadhis ku samayn baadhaha caafimaadku;

## V. Xaaladaha mudan go'aan ka qaadasho khaas ah

Hilibka neef laga helay mid ka mid ah cuduradan ama xaaladan, waa in loola macaamilaa sida hoos ku xusan:

### (a) Ur aan Caadi ahayn

i. Haddii hilibka neef la gawracay uu leeyahay ur aan caadiga aheyn sida:-

- Ur ay sababtay dawo la siiyay neefka;
- Ur aan caadi ahayn oo ay sababtay Kaadida ama Shahwada, ama
- Ur ay sababtay cilad ka timid dheefshiidka oo ay keentay xaalado xumadeed

Hilibka neefka waa in loo aqoonsadaa mid aan la cuni karin

ii. Haddii Hilibka neefka urtiisu sahlan tahay sida ku xusan qodobka (i) waxa lagu hubinaya qaboojin ama kulaylin in wax iska bedelaan

### (b) Xalxal, nabaro, malax iyo xubno isku dhegay

i. Haddii hilibka neefku u xalxalsan yahay, dhaawacyo leeyahay, malax leeyahay ama xubnaha uur-ku-jirta qaar isku dhegan yihiin waxaa loo aqoonsanaya mid aan la cuni Karin.

(ii) Haddii nabaradu, xalxalku, malaxdu iyo xubnaha isku dhagen ay ku kooban yihiin meelo yar yar oo ka mid ah hilibka oo aanay saamaynaynin qanjida, waxaa laga goynayaa inta caabuqday waana la tuurayaa, marka laga reebo madaxa, carabka iyo xubnaha hoose ee uur ku jirta, inta kale hilibka waa la cunni kara.

(iii) Xubin kasta oo neefka la qalay ka mid ah oo milil ama nabar malax leh, waa in xubintaas la gooyaa loona aqoonsadaa mid aan la cuni karin

### (c) Cudurada dhaawacyada iyo nabarada (Actinomycosis or Actinobacillosis)

i. Haddii caabuqa ama nabarada cudurkani ku faafay dhammaan hilibka neefka, waxaa loo aqoonsanayaa mid aan la cuni Karin;

ii. Haddii nabarda lagu xusay qodobka kore ee (i) uu ku kooban yahay meelo gaar ah waa in la gooyaa inta nabarku gaadhay oo kaliya loona aqoonsaday mid aan la cuni Karin;

iii. Haddii madaxa neefka la qalay u qabo caabuqa kor lagu soo sheegay oo madaxa iyo carabku ku jiraan waa in la aqoonsadaa mid aan la cuni Karin;

iv. Haddii nabarada lagu soo sheegay qodobka (i) aanu ahayn mid weyn, kuna kooban carabka iyo qanjidhada la xidhiidha, markaas waa in carabka iyo qanjidhada la gooyaa loona aqoonsadaa kuwa aan la cuni Karin;

**(d) Dhiig Yaraan**

Haddii ay jirto dhiig yarida cuduro lala xidhiidhinayo ama xaalado kale oo aan ku qeexnayn xeerkan, waa in baadhaha caafimaadka hilibku ku soo saaraa go'aan la isaga fogeynaayo neefka la gawracay markuu sida u arko inay lagama maarmaan tahay;

**(e) Jilba Xanuun**

i. Haddii hilibka neefka la qalay u ku dhacay jilba xanuun oo xaaladiisuna tahay sidan:-

- Haddii uu ku baahay, isbedelna ku keenay wada shaqaynta jidhka ama
- Uu baahay oo ay la xidhiidhaan caabuq iyo nabaro malax leh oo laabato ama laabatooyin badan, neefka hilibkiisa lama cuni karo

ii. Haddii jilb xanuunku ku kooban yahay laabato kaliya oo aan wax u dhimayn wada shaqaynta xubnaha jidhka, waa in laabatada iyo qanjidhada la xidhiidha loo jara hab aan hilibka inta kale saamaynayn lana tuura;

**(f) Brucellosis**

i. Haddii xoolaha laga helo cudurkan marka dhiigooda la baadho, ama ay jiraan sababo kale oo looga shakiyey inay cudurkan qabaan, waa in xoolahan lagu gawracaa meel aan aheyn meesha xoolaha kale lagu gawraco, si looga hortago in aanay saamaynin hilibka xoolaha kale ee kawaanka gowraca iyo shaqalaha jooga kawaanka
.

ii. Hilibka xoolaha baadhista gawraca kadib lagu arko nabaro ama dhaawac muujinaya inuu jiro cudurka brucella oo cusub waa in lagu dhawaaqaa in hilibkan la cuni karin. Haddii dhiiga oo kaliya laga helo cudurkan, waa in candhada, xubnaha dhalmada iyo dhiiga la daadiyo lana cadeeyo in aan cuni karin.

**(g) Qanjo Xanuun**

i. Haddii qanjo xannuunku:-

- U ka dhigo weyd ama isbedelo kale ama
- U baaho oo aanu ku koobnayn halkii u ka bilaabmay, gaadhana qanjidho badan, waa in hilibka loo aqoonsadaa mid aan la cuni karin;

ii. Haddii u ku kooban yahay qanjidh kaliya, waaxda hilibka ee qajidhkaasi ku yaalo waa in la gooyaa loona aqoonsadaa mid aan la cuni Karin;

**(h) Cudur dhaliyaha kaadi dhiiga**

i. Hilibka neefka la qalay ee qaba cudurkan keena kaadi dhiiga waxaa la aaminsan yahay in la cuni karo haddii xaaladiisu tahay sida hoos ku qoran:-

(a) Haddii hilibka laga helo hal ilaa shan goobood oo dirxiga cudurku ku jiro waa in la hakiyaa ugu yaraan 10 casho oo lagu hayaa -10 digrii oo qabow ah ama kulayl lagaga dilaa sida ku qeenax qayb hoosaadka firqada (2) ee faqradan lana siidaya si loo iibiyo.

(b) Hilib kasta oo madaxa carabka iyo uur ku jirtiisa laga helo goob ama ka badan dirxigu ku jiro, waa in la hakiyaa lagana daweeyaa dirxiga lana siidaya sida ku xusan qayb hoosaadka firqada (1) (a) ee faqradan.

(c) Hilibka laga helo 6-20 goobo dirxi ku jiro waa in la hakiyaa oo la daweeyaa, dabadeedna la siidayaa, sida ku xusan qayb hoosaadka firqada (1) (a) ee faqradan. Laakiin waa in shuruud lagu siidaya oo ah in macaamiil gaar ah laga iibiyaa ha cuno ama ha sii iibiyee,

2. Sida ku xusan qayb hoosaadka firqada (1) (a) ee faqradan. Nadiifinta dirxiga waa kulaylin oo uumi ah, karkarin ama qabow ku jilcin

   i. Uumi ku nadiiffinto, waxay u baahan tahay kulaylin uumi ah oo loo adeegsado qalab u gaar ah oo sameeya bukhuur dhexdhexaad ah muddo aan ka yarayn hal saacad

ii. Kulaylinto waxay u baahan tahay in lagu kariyo weel weyn oo xidhan ama furan oo heer-kulkiisu aanu ka yareen 77 $^{o}$ C muddo aan ka yareen hal saac, ama

iii. jilcin lagu jilciyo Karin heer-kulka ku haboon oo uu qeexaayo baadhaha hilibka baaadha isaga oo maanka ku haya nooca hilibka la jilcinayo.

3. Qaboojinta lagu nadiifinayo hilibka laga helay cudur-dhaliyaha cudurka kaadi dhiiga waxa lagu qaboojinaya qol qaboojiy leh oo aan qabowgiisu ka yarayn -10 C degrii muddo aan ka yarayn toban casho.

   i. Intan la nadiifin hilibka laga helo cudur dhaliyaha cudurka Kaadi dhiiga waa in laga jara qaybaha laga helo cudur dhaliyaha, inta aan horta neefka qaboojiyaha la gelin waana in labada dhinac lagaga dhejiya calaamad aan ka go'in.

   ii. Waa in la hayo xog qoraal ah hilib kasta ee la geliyo qolka qaboojiyaha

   iii. Heer-kulka lagu nadiifiyey hilibka laga helay cudur-dhaliyaha cudurka kaadi dhiiga ee la geliyey qolka qaboojiyaha, waa in la hayo muddo bil ah laga bilaabo maalintii la siidaayey. Waana in la ogolaado in la baadho qoraalada;

   iv. Qolka qaboojinta ee loo nadiifiyey hilibka laga helay cudur dhaliyaha cudurka kaadi dhiiga waa in uu qofol ku xidhan yahay oo mar kasta uu kormeero baadhaha hilibka;

**(i) Barar**

I. Haddii bararku yahay mid ka muuqda jidhka oo dhan, hilibka waa in loo aqoonsadaa mid aan la cuni Karin.

II. Haddii laakin bararku yahay mid yar oo ku kooban barta nabarku ku yaalo, waxaa laga gonaya meesha bararka leh oo la tuurayo, inta hilibka hadhayna waa la qaboojinayaa 12 saacadood, kadibna baadhis kale ayaa lagu celinaya intaan la fasaxin

**a) Caabuq**

I. Haddii sambabada, xuubka dahaadha sambabada, mindhicirada, xuubka dahaadha mindhicirada iyo ubucda, kelyaha, ilma-galeenka iyo xangulada ka

muuqdo caabuq wada saameeyey, waa in hilibka neefka loo aqoonsadaa mid aan la cunni Karin

II. Haddii caabuqu yahay mid raagay oo carjow adagi hareeraha kaga dhajisan tahay, qaybta ama xubinta bukta ayaa laga jaraya oo la tuuraya, waxana loo aqoonsanayaa mid aan la cuni karin,

III. Wixii aan ahayn inta lagu sheegay faqrad hoosaadyada (i) iyo (ii), baadhaha caafimaadka hilibka ayaa qeexaya in hilibka la tuurayo dhammaan ama qayb ka mid ah,

**(k) Candho xanuun**

I. Haddii cudurku candhada wada gaadhay isbedelna ka muuqdo waxa loo aqoonsanayaa hilibka neefka mid aan la cuni Karin oo la tuuro;
II. Haddii aanay wax isbedal ah ka muuqan candhada, candhada oo kaliya ayaa laga jaraya loona aqoonsanayaa mid aan la cuni karin

**(L) Burooyinka**

i. Haddii xubin ama qayb ka mid ah neefka hilibkiisa ay ku taalo buro fida; sida
   - Buro weyn
   - Mid saamaysay muruqayada, lafaha ama qanjidhada jidhka, ama
   - La cadeeyo in ay unugyadeedu jidhka wada gaadhsan yahay,

   Hilibka neefka, waxa in loo aqoonsadaa mid aan la cuni Karin;

ii. Haddii qayb ama xubin ka mid ah hilibka neefka la arku in buro fida ku taalo oo ay tahay mid:-

   - Mid bilow ah,
   - Mid aan unugyadeedu jidhka wada gaadh siisanayn waxna u dhimayn wada shaqaynta xubnaha jidhka ama
   - Aan wax isbedel ah ku samayn jidhka,

Xubinta buradu ku taalo oo kaliya aya la goynayaa oo loo aqoonsanayaa mid aan la cuni Karin oo la tuuro,

iii. Haddii xubin ka mid ah hilibka neefka lagu arko buro ah ta aan fidin Xubinta buradu ku taalo oo kaliya ayaa la goynayaa oo loo aqoonsanayaa mid aan la cuni karin,

**(m) Cudur Ku Dhaca Xididada Xudunta (Omphalophlebitis)**

i. Neef kasta oo hilibkiisa laga helo cudurkan oo lana ogaado in unugyadiisu ku fideen xudunta jidhka neefka, waa in neefka hilibkiisa loo aqoonsadaa mid aan la cuni karin,

ii. Haddii la ogaado in aan unugyada cudur-dhaliyaha cudurkani aanu ku fidin xubnaha jidhka neefka waxa laga goynaya xundunta iyo inta ku wareegsan oo kaliya loo aqoonsadaa mid aan la cuni karin;

**(n). Passteurellosis**

i. Haddii aafada cudurku ay bedeshay shaqada jidhka, waa in hilibka loo aqoonsada mid aan la cuni karin

ii. Wixii aan ahayn inta lagu sheegay faqrad hoosaadka (i) oo hilibka qayb ama xubin kaliya uu ku kooban yahay cudurku, qaybta ama xubintaas oo kaliya ayaa laga goynaya loona aqoonsanaya mid aan la cuni Karin,

**(o). Midab doorsanka (oo dorsooma)**

i. Beerka oo midabkiisa noqdo sida daba-casaha oo kale, waa in loo aqoonsada mid aan la cuni karin,

ii. Haddii hilibka qayb ka mid ah ama xubin ay midab doorsoonto oo noqdo cadaan, madow ama barar oo midab doorsoonka laga safayn kari waayo, waa in loo aqoonsado hilibka oo dhan, qaybta ama xubinta mid aan la cuni Karin. Haddii xaaladu ay tahay Sidan:-

iii. Haddii midab-doorsoonka baruurta uu sababo in muruqyada midabkoodu bedelmo waa in loo aqoonsada hilibka mid aan la cuni Karin

(iv) Haddii baruurta midab-doorsoontay ay ku kooban tahay qayb ama xubin, qaybta ama xubinta waa in laga gooyaa oo loo aqoonsada mid aan la cuni Karin;

(v) Haddii hilibka lagu arko sidan:-

- Darja kasta oo ku burburinayo joonisku xuubabka xubnaha;
- Huruud xoogan ama midab doogo-huruud ah;

Waa in hilibka la oqoonsada mid aan la cuni Karin

(vi) jHaddii midabka joonisku ku yar yahay oo qaboojis lagaga saari karo marka waxa laga yaaba in loo fasaxo in la cuno

**(p) Kelyo xanuun**

**(i)** Haddii neefka u qabo kelyo xanuun labada kelyood ah oo uu waydna yahay waa in hilibkiisa loo aqoonsadaa mid aan la cuni,

**(ii)** Haddii kelyo xanuunku uu yahay keli kaliya oo aanu waydoobin waxaa laga gooynayaa kelida bukta iyo qanjidhada la xidhiidha oo loo aqoonsanayaa xubno aan la cuni karin;

**(q) Salmonellosis**

(i) Haddii baadhaha caafimaadka hilibku u neef ku tuhmo baadhista gowraca ka hor in u cudurkan qabo waa in uu:-

- Amar ku bixiya in neefka la gawraco lakiin aan hilibkiisa la fasaxin
- Dheecaanada laga qaado neefkan la gawracay in loo gudbiyaa sheybaadh howshaan u khaas ah si baadhitaan kama dambeys ah ugu sameeyo,
- In aan La fasaxin hilibka neefkan iyo,
- Inuu baadhuhu go'aan ka soo saaro hadba sida u arko ama ku tala bixiyo;

(ii) Haddii baadhitaanada sheybaadhka ee ku xusan faqrad hoosaadka (1) ay muujiso in cudurku uu jidhka oo dhan ku faafay, waa in markaas hilibka loo aqoonsadaa mid aan la cuni karin, haddii baaritaanada ay muujiyaan in cudurka haya neefka uu hal goob ku kooban yahay, waa in xubbintaas bukta la gooyaa oo kaligeed loo aqoonsadaa mid aan la cuni

**(r) Cudurada Maqaarka**

(i) Haddii neefka laga helo canbaar ama cadho ama cudurada la midka ah oo gaadhsiisan marxalad baahsan oo ay ka muuqato in uu wayd yahay, haraguna xoodh-xoodhay ama xanuunku wada gaadhay hilibka oo dhan, waa in loo aqoonsado hilibka neefka mid aan la cuni Karin.

(ii) Haddii cudurka aan ku soo sheegnay faqrad hoosaadka (1) yahay mid yar oo hal xubin ku kooban, xubintaas bukta keliya ayaa la goonayaa oo loo aqoonsanayaa mid aan la cunii Karin.

**(s) Nabaro xididada barariya**

Beer kasta oo laga helo cudurkan, waa in loo aqoonsadaa mid aan la cuni Karin, ama waa in lagu nadiifiya hab la ansixiyey si looga dhigo cuno xooluhu cunaan;

**(t) dhaawaca nudayga**

i. Haddii dhaawaca nudayga yahay mid cusub oo deg-deg ah oo wax ka bedelay habka jidhku u shaqeynayo ama nabarado malax leeyihiin ama yeelahane, waa in hilibka neefkan loo aqoonsadaa mid aan la cuni Karin.

ii. Haddii dhaawaca nudayga yahay mid kooban oo qolf dhacsaday oo dheecaan leh, waa in qaybta ama xubinta bukta la gooyaa loona aqoonsadaa mid aan la cuni Karin.

**(u) Cudurka Qaaxada**

Xubin ama qayb ka mid ah neef la gawracay oo lagu arko nabarada qaaxada, waa in loo aqoonsadaa mid aan la cuni karin. Waana in loola macaamilaa sida soo socota:-

(i) Neefka Qaaxada looga shakiyey waa in lagu gawracaa meel aan ahayn goobta xoolaha kale lagu gawraco, iyada oo laga hortagayo khatarta in uu sadheeyo hilibka kale , shaqaalaha jooga kawaanka iyo meelaha kale ee ka mid ah kawaanka;

(ii) Madaxa neefka oo carabku u ka mid yahay, waa in loo aqoonsadaa mid aan la cuni Karin, haddii qanjidhada hunguriga, daamanka iyo qoorta ama laba ka mid ah lagu arku xanuunka.

(iii) Mindhicirka iyo xiidmaha la xidhiidha waa in loo aqoonsadaa mid aan la cuni karin haddii xanuunka lagu arko qanjidha la xidhiidha.

(iv) Hunguri cad iyo ka madowba waa in loo aqoonsadaa kuwa aan la cuni karin haddii sambabada iyo qanjidhada la xidhiidha lagu arko xanuunka.

(v) Haddii qanjidhada murqaha uu ka muuqdo xanuunku, lafaha ku xidhan oo dhan waa in la soo saara oo la xuub siibaa; haddii nabar lagu arko lafaha dushooda, waa in lafahaas la burburiyaa, muruqyadana la nadiifiyaa oo la jeermis dilaa, haddii kale waa in hilibka oo idil loo aqoonsadaa mid aan la cuni karin.

(vi) Haddii aanay jirin calamadaha cudurkan ama caabuq dhiiga raacay ama lafaha dhaadheer oo qanjidhada murqaha ay muujiyaan xanuunka aan sidaa u sii waynayn, qaybta bukta kaliya ayaa in la nadiifinaya.

# JADWALKA II.

## JAMHUURIYADA SOMALILAND

**Xeerka NO……………………………………………..**

**Sharciga Baadhista iyo Illaalinta Hilibka, No…….....ee……….. [Sanadka]**

Isaga oo adeegsanaya awoodaha ku xusan Qodobka 18 (1) (b) ee Sharciga Baadhista iyo Maamulka Hilibka…………[Sanadka], Wasiirka iminka haya jagada Adeegayada caafimaadka Xoolaha wuxuu soo saarayaa xeerarkan-

**Sharciga baadhista iyo illaalinta hilibka ee kawaanada gowraca xoolaha dalka gudihiisa laga isticmaalo (Local Slaughterhouse)**

## QAYBTA 1 - GOGOL XAADH

1. Sharcigan waxaa loogu yeedhaa xeerarka baadhista iyo Maamulka hilibka (kawaanada gawraca xoolaha dalka gudihiisa laga isticmaalo).

2. Xeerarkan marka laga reebo meelaha macnaha guud u baahan erayada ama qoraalo gagaban waa isku micne sida sharcigan guud ku qoran.

3. (1) Isaga oo adeegsanaya awoodaha ku xusan qodobka S. 18 (1) (b) ee sharcigan, wasiirku waa inuu cadeeyaa heerarka ay kala noqonayaan kawaanada dalka gudihiisa sida sharcigani sheegayo.

   (2) Masuul kasta oo kawaan maamula ma qali karo xoolo, wax hilib ahna ma diyaarin karo, haddii aanu marka hore isu diiwaangelin kawaan dalka gudihiisa sida sharcigani qeexayo.

   Kawaanka xoolaha lagu qalo waxa loogu yeedhi kara kawaan sida sharcigan ku qoran qodobkiisa 3(1) kadib marka maamuluhu kawaankiisa u arji ku soo codsado in ruqsad la siiyo sida shuruucda ku xusan qaybta 11, ee la ogolaado arjigiisa.

## Qaybta 2 Ruqsada kawaanka dalka gudihiisa

1. Sida ujeedada shuruucdani tahay sarkaalka ruqsada bixiya waa inay wada shaqeeyaan masuul ka tirsan dowladaha hoose ama qof kale oo agaasimuhu qoral ku magacaabay in uu rugsad kawaan bixiyo sida sharcigan qeexayo. Qof kasta oo rugsad kawaan bixiya wuu cusboonaysiin kara, joojin kara, bedeli kara ama uu hakin kara sida sharcigan ku cad haddii xaalku yahay:-

2. Waxyaalaha ku qoran qaybaha 12 iyo 13 ee sharcigan waa in loo adeegsadaa dhammaan xaaladaha la xidhiidha araajida codsiga iyo ruqsad bixinta iyo wixii kale ee la xidhiidha jadwalkan.

3. Haddii Agaasimuhu amar ku bixiyo in la xidho kawaan sida sharcigani tilmaamayo waa in markiiba laga qaado ruqsadii hore loo siiyey.

4. Qof kasta oo ku shaqaysta kawaan bila ruqsad ah ama u adeegsada ruqsada sida sharcigani u sheegayo ruqsada wuxuu gelayaa gef/dambi-waana lagu qaadayaa dambiga uu galay………………waxaana si deg deg ah looga xidhaya kawaankiisa.

5. Masuul kasta oo badela dhismaha kawaankiisa ama u rara meel cusub oo u dhow kawaankiisa hore isaga oo aanay ruqsadiiu dhicin waa inuu soo qorta arji cusub oo uu ku dalbanayo ruqsad cusub sida qaybtani qeexayso.

6. Qof kasta oo ku xadgudba shuruucdan ama qayb ka mid ah wuxuu gelayaa gef/dembi-waana lagu qaadaya dambiga uu galay…………………

**Qaybta 3ʲ Baadhista Guud ee looga baahan yahay kawaanada dalka gudihiisa**

1. Ammarada Jadwalka 1 ee qaybta 2aad iyo qaybta 5 haddii aanu Wasiirku wax ka bedelin isaga oo u arkay lagama maarmaan, baadhista hilibku waa sida ku cad jadwalkan.

2. Inkast oo aan mawduucan ku soo sheegnay qaybta 2 iyo 5 ee jadwalka 1, hadana waxaa jadwalkan lagu cadaynayaa si loo saaro shakiga in jadwalkan loo isticmaalayo baadhista hilibka kawaanada dalka gudihiisa.

3. Kawaan kasta oo la diiwaan geliyey, waa in la siiyo lambarka diiwaan galinta rasmiga ah, si loogu aqoonsado xoolaha la qalay iyo hilibka lagu diyaariyey kawaanka ;

4. Agaasimuhu waa inuu joogteeyaa diiwaan uu ku qoro magacyada maamulayaasha kawaanada dalka gudihiisa, taariikhda la diiwaan geliyey, ruqsadaha iyo meelaha ay ku yaalaan, mugooda, socodsiinta shuruucda iyo haddii wax degniin ah la siiyey mar uu sharciga ku xadgudbay sanadka dhexdiisa.

5. Qof kasta oo carqaladeeya, ama gacan ka geysta carqaladaynta baadhaha hilibka xiliga u shaqada ku jiro wuxuu gelayaa dambi.

6. Baadhe kasta oo hilib baadha ah, marka uu baadhista ku jiro ee sharcigan uu fulinaayo waa in uu geli karo qayb kasta oo kawaanka ka mid ah kumana xidhna in kawaanku shaqeeyo iyo in kale.

7. (1) Baadhaha caafimaadka hilibka, sida sharcigu yahay, wuxuu xaq u leeyahay in la tuso diiwaanada farsamada ee yaala kawaanka, wuxuuna u madax banana yahay inuu su,aalo waydiiyo la xidhiidha baadhista qof kasta oo ka shaqeeya kawaanka, qofkaasina wuxuu ku qasban yahay inuu ka bixiyo jawaab kooban oo sax ah;

   (2) Haddii Masuulka kawaanku, wakiilkiisu ama shqaale u ku guul darysto ama is dhega mariyo in uu tuso diiwaanka kawaanka sida sharigu yahay ama qof uu su'aalo wadydiiyey baadhaha hilibka u diido ama ku guul daraysto inuu ka jawabo ama been uu og yahay ku jawaabo, iyada oo wax caqli gal ah oo ku kalifayaa jirin, qofkaasi wuxuu gelaya dambi.

## Qaybta 4 Inta ugu yar ee laga dhisi karo kawaanka iyo faahfaahinta dhismaha

**1.** Kawaanku waa in laga dhisaa meel aan u dhawayn wax ur leh, qiiq ama boodh. Waana in ay ka fog tahay hadba sida uu agaasimuhu tilmaamo dhismayaasha warshadaha, ganacsiga, beeraha ama meelaha la degan yahay.

**2.** Haddii ganacsade tafaariiqle ah wax ku iibiyo kawaanka dhexdiisa, waa in macaamiisha loogu talagalaa qol ama qolal ka go'an qaybaha kale, waxa kale oo la mid ah meelaha kale ee kawaanka ka mid ah ee laga yaabo in ganacsato adeeg ku bixiso wax lagu raro;

**3.** Inta ugu yar ee loo baahan yahay in la illaaliyo marka kawaan la dhisaayo:-

a) Waa in laga dhiso hangar biyo shub wanaagsan leh meel u jirta 10 mitir ugu yaraan dhismaha kawaanka oo qaadi kara maalin iyo badh inta la qalayo/ Waa in la dhigo qalab ku filan baadhista gowraca ka hor iyo xiryo lagu hayo xoolaha laga shakiyo.

b) Xero dayr leh oo lo'da loogu talagalay inta u dhaxeysa hangarka iyo dhismaha kawaanka oo leh biyo saarid fiican oo leh qalab fiican oo xoolaha loogu maydho.

c) Qayb gaar ah oo loogu talagalay dhiig baxa xoolaha oo loo diyaariyey neefka oo deldelan in la dhiig bixiyo.

d) Hool qalinka oo leh biro la sudho oo dhaqdhaqaaqa oo neefka haraga iyo uur-ku-jirta lagaga saaro laguna baadho neefka oo deldelan.

e) Qolal waaweyn oo leh qaboojiye ama baraf sameeya haddii marka hore sidaa loo naqshadeeye kawaanka.

f) Qol weyn oo hilibka lagu qaybiyo.

g) Qol gaar ah oo lagu nadiifiyo ama lagu hagaajiyo xiidmaha iyo caloolaha.

h) Qol gaar ah oo lagu kala saaro laguna hagaajiyo uur-ku-jirta inta la cuno.

i) Qol gaar ah oo lagu hayo uur-ku-jirta aan la cunin iyo hilibka ama qayb loo aqoonsado in aan la cuni Karin.

j) Qalabka loo adeegsanayo howlahan waa inay ahaadaan kuwa aan wax ka gudbi karin, nadifintoodana ay tahay mid sahlan oo u adkaysta burburka iyo daxalka.

k) Gidaarada iyo sagxada hoose waxa lagu dhisayaa marmar ah derejada kowaad ama labaad ama shub adag oo asiidho Karin, biyaha liqin oo ku haboon dhiska sagxada. Gidaarada waa in lagu rakibo biro nadiif ah oo ka illaaliya in ay xoqaan qalabka shaqada.

l) Waa in gidaarka iyo sagxada hoose halka ay iska galaan lagu sameeyo wareegyo ku filan qolalka oo dhan.

m) Saqafka sare waa in loo dhisaa inta la awoodi karo oo siman, balaadhan oo lagu sameeyo sibidh aan biyaha siidayn. Haddii loo sameeyo meelo hawado ka baxdo waa inay yihiin 60 senti mitir oo badhtanka ah oo si sahlan loo nadiifin karo.

n) Fadhiga daaqada waa inay ugu yaraan 3 mitir ka saraysaa sagxada hoose una janjeedhaa xagal $45^o$ ah;

o) Albaabadu waa in balaadhkoodu yahay 150 senti mitir oo ka samaysan bir aan daxalaysan oo si adag loo laxaamaday. Laabatooyinka albaabada waa in ay iyaguna noqdaan qaar aan daxalaysan, albaabada debeda oo dhami waa inay u furmaan xaga dibeda.

p) Dhamaan daaqadaha iyo albaabadu iyo meel kast oo furan oo ay ka soo gali karaan cayayaanka ama jiirku waa inay leeyihin shabag celiya.

q) Dhismayaasha oo dhan waa in la xaqiijiyaa in jiirka iyo wax la mid ah geli Karin.

r) Dhammaan wixii looxa ah ee ka muuqda gudaha dhismaha, waa in la mariyo ranji iyo saliid aan sun lahayn laguna dahaadho xabagta looxa ee dhalaasha.

s) Dhammaan qaybaha sagxada ee shaqada qoyaanka leh lagu qabto, waa in ay leeyihiin biyo shub oo ugu yaraan loo sameeya bulaacad 35kii mitir ee isku wareeg ah. Afka bulaacaduhu waa in uu ku yaala meesha ay iskagga darsamaan bulaacada weyn, waa in aanay ka yareyn 7.5 senti mitir oo balaadh ah, daloolada sagxada dhex waa in ay u furnaadaan 2.5 senti mitir xaga bulaacada weyn.

t) Bulaacadaha ay maraan saalada iyo uuska calooshu waa in daloolkoodu noqda ugu yaraan 20 senti mitir, waana in aan la ogolaan in ay owdanto (xidhanto) oo mar walba ay biyo wasakhda riixa ku socdaan inta shaqadu socoto.

u) Meelaha loogu talagalay qashin qobka waa inay balaadhan yihiin oo ay waafaqsan yihiin sharciga guud iyo ka dowladaha hoose.

v) Hangarada loogu talagalay in la dhigo saalada, uuska, dhiiga iyo hilibka loo aqoonsaday in aan la cuni karin, waa in loo sameeya sawir iyo naqshad ku haboon.

**4.** (a) Qofna ma dhisi karo ama iskuma deyi karo in uu dhiso kawaan, haddii aanu marka hore arji u qoran oo agaasimuhu ansixin.

b) Awaamiirta qaybta II ee la xidhiidha qaybta 14 ee xeerkan oo isbedel ku haboon lagu sameeyey ayaa lagu dabaqaya ruqsad bixinta sida ku cad firqada (a)

c) Sharciga lagu ansixinaayo kawaanka waa in u la jaanqada shuruucda caafimaadka guud, warshadaha, nabadgelyada ganacsiga iyo illaalinta degeenka.

d) Waa dambi in lagu shaqaysto ama la isku deyo in lagu shaqaysto kawaan guurguura ama wax la mid ah;

e) Qof kasta oo ku xadgudba sharcigan, wuxuu gelaya dambi waana lagu qaadayaa dambigiisa-------- waxa inta u dheer iyada oo baadhaha caafimaadka hilibku ka bururinaayo kawaankiisa guurguura.

**Qaybta 5 Awaamiirta Samaynta Kawaanada tuulooyinka**

1- Isaga oo adeegsanayaa awoodaha uu siinayo qaybaha sharcigani ee 16 (1), 18 (1) iyo (a) (c) wasiirku waa in uu qoraal ku so saaraa heerka u noqonayo waxa loo yaqano kawaan tuulo, sida ku cad qodobkan. Sidoo kale qoraal ku soo saara shuruucda illaalinaya kawaanada tuulooyinka ee lagu joogtaynaayo faya-dhowrka iyo howl qabadkooda. Waa in shaki la'aan loo magacaaba hilib baadhe meel kasta oo loo aqoonsaday kawaan, isaga oo hubinaaya in wakhti kasta kawaanku leeyahay qalab joogta ah inta duruuftu saamaxdo sida ku cad xeerka 1aad ee qaybtan:-

a) Inta aanu shaqada bilaabin kawaan kasta oo tuulo waa in uu haystaa ruqsad uu ku howlgalo sida xeerkani qeexayo.

b) Baadhaha caafimaadka hilibku waa inuu xaqiijiyaa, dhammaan baadhayaasha kalena gacan ku siiyaan xaqiijinta faya-dhowrka kawaanada talooyinka lana raacaa heerka u sareeya ee faya-dhowrka iyo in baadhista gowraca ka hor iyo ka dib ay la jaanqaan awaamirta uu bixiyo baadhaha hilibka, isaga oo eegaya duruufaha u khaaska ah kawaankaas;

c) Dhamaan howlgallada baadhitaanada gowraca ka hor iyo ka dib, waa in lagu sameeyaa gudaha kawaanka;

d) Tiirka, dhagax ama dhulka xoolaha lagu qalaa waa in u ku yaalo dhisme dhexdii, waana in tiirka, dhagaxa ama dhulku yahay nadiif inta aan xoolaha lagu qalin.

e) Waa in uu leeyahay biro qalooca ama xadhko ku filan oo neefka laga deldelo marka la qalaayo.

f) Waa in qol gaar ah neefka lagu dhiig bixiya, haraga lagaga saaraa isaga oo soo laalaada.

g) Waa in uu leeyahay iftiin dabeeci ah ama koronto, daaqado shebeg leh si aanay u soo gelin duqsiga, boodhka, cayayaanka iyo jiirku.

h) Waa in uu leeyahay adeega faya-dhowrka shaqaalaha sida qolka dharka lagu bedesho, lagu maydho iyo masqulo.

i) Weelal ka sameysan bir aan daxalaysan ama caag ah oo loogu rido uur-ku-jirta

j) Hab macquul ah oo qashinka loo qaado.

k) Qolal ama meelo gaar ah oo dadku ka qaato ama baabuurta lagaga raro hilibka oo macaamiisha lagaga iibiyo.

l) Meel lagu nadiifiyo qalabka iyada oo la isticmaalayo saabuun iyo suxuun;

m) Biyo ku filan oo qabow iyo biyo kulayl leh;

n) Meel la dhigo hargaha iyo saamaha, dhogorta, madaxa, qanjaafilaha iyo wixii kale ee aan la cunin.

o) Ku talagal sahlaysa baadhitaanka shaybaadhka.

2- Agaasimuhu isaga oo la tashanaya baadhaha hilibka wuxuu xadidayaa tirada iyo nooca xoolaha lagu qalayo kawaanka tuulada maalintii. Isaga oo eegaya, talooyin dheerad ahna ka bixinayaa illaalinta faya-dhowrka iyo howlgalka kawaanka;

## Qaybta 6 ; Fara-ku-haynta nadaafada iyo faya-dhowrka

1. Kawaan kasta waa in uu leeyahay arimaha soo socda sida ku xusan jadwalkan:-

   a) Haamo biyo filani ay ku jiraan oo la qaadi karo oo leh meelo haboon oo laga shubto.
   b) Biyo Kulul oo aan ka hoosayn cabbirka 82$^{o}$ C oo loo isticmaalo nadiifinta iyo jeermis-dilida qalabka;
   c) Iftiin dabeeci ah ama laydh ku filan meel kasta oo lagu shaqeeyo.

2. Waa in uu leeyahay kawaan kasta adeeg caafimaad oo loogu talagalay shaqaalaha oo kala ah sidatan:-

   a) Qolal ay ku lebistaan, masqulo iyo meelo lagu kaadsho oo waasac ah kuna yaala meelo ku haboon.
   b) Masqulo casri ah oo leh biyo kulul, qabow, saabuun iyo tuwaalo ama qalab kale oo gacmaha lagu qalajiyo, lana kormeera isticmaalkooda.
   c) Masqulo iyo meelaha kaadida waa in ay leeyihiin bulaacado kala gaar ah.
   d) Meelo ku haboon oo gaar ah oo shaqaalaha hilibka ka shaqeeya ku nadiifiyaan jeermiskana ka tiraan gacmahooda.

3. Qalab kasta oo lagaga shaqeeyo diyaarinta hilibka gaar ahaana kuwa lagu jarjaro waa inay ahaadaan kuwo si sahlan loo nadiifin karo oo ka samaysan bir aan daxalaysan oo raaga;

4. Waa in uu leeyahay weel asturan oo dabool xidhma leh oo lagaga saaro kawaanka dhiiga, uur-ku-jirta aan la cunin, uuska caloosha iyo xiidmaha iyo wixii kale ee wasakh ah.

5. Gelinta xoolaha iyo ka saarida hilibka kawaanka:-

   **a)** Qofna ma soo gelin karo kawaanka neef uu ka warqabo ama uga shakisan yahay inuu cudur qabo isaga oo aan ogolaansho ka helin baadhaha caafimaadka hilibka;

   **b)** Qofna ma soo gelin karo kawaanka neef bakhtiyey oo aan dhiig bixin, hilibka neefkaana waa in la tuuraa iyada oo la raacaayo awaamiirta baadhaha hilibka;

   **c)** Waa in aan qofna loo ogolaan in uu kawaanka soo geliyo neef lagu qalay ama lagu gowracay meel kale.

6. Masuul kasta oo kawaan, ruqsad uu haysta rarida, ganacsade guud ama tafaariiqeeye hilibka, isaga aya ka masuula ah meeshiisa, gaadiidkiisa, isaga ayaa loo qabsanaya sida sharcigan ku cad haddii wakiilkiisa, shaqaalihiisa. Gaadiidkiisa ganacsadaha guud ama tafaariiqeeyuhu ku xadgubo sharciga.

**7.** Waa waajibaadka masuul kasta oo ruqsad u haysta kawaan, ganacsade guud ama tafaariiqeeye inuu soo galiyo kawaanka cid aan fasax u haysanin ama meelaha hilibka lagu iibiyo ee uu masuulka ka yahay.

**8.** Qof Kasta oo ku xadgudba sharciga Qaybta A1- wuxuu galay dambi waana lagu qaadayaa dambigaas uu galay……………..

**9.** Xeerarkan waxaa dheeraad ku noqon kara oo aan ka hor imanayn sharciyada qoran ee la xidhiidha caafimaadka dadweynaha iyo ilaalinta deegeenka ee hada shaqeeya.

## Qaybta 7 Faya-dhawrka Dhismaha, Qalabka iyo wixii soo raaca

1. Si Baadhitaanada caafimaad ee kawaan kasta u noqodo mid wax ku ool ah, waa sida jadwalkan ku xusan:-

   a) Waa in qolalka, qaybaha, meelaha, qalabka iyo weelka lagu diyaariyo ama lagu kaydiyo hilibka loo illaaliya nadaafadooda si caafimaadka waafaqasan.

b) Baadhaha caafimaadka hilibka waxa laga yaaba in uu codsado in hilibka wax lagu illaaliyo oo lagaga daboolo boodhka iyo cayayaanka marka kawaanka hilibka lagu qaybinayo, iyada oo la tixgalinayo habka hilibka looga rarayo kawaanka;

c) Waa in aan qashinka dareeraha ah ama ka adag la ogolaan in uu ku ururo kawaanka dhexdiisa.

d) Dibada dhismaha kawaanka waa in ay nadiif tahay muuqaal fiican leh.

e) Dhammaan bulaacadaha wasakhdu ku dhacdo waa in loo dhisaa si loo hubin karo nadaafadooda iyo ur la'aanta;

f) Waa in la qaado tallaabooyin ku haboon, si aan jiirka walada, shinbiraha iyo cayayaanku u soo gelin dhismayasha kawaanka.

2. Waa in la aqoonsan karaa uur-ku-jirta neef kasta inta baadhistu socoto.

3. Caloosha iyo xiidmaha marka neefka laga soo saaro markiiba la fogeeyaa oo aan lagu dooxin meelaha hilibka kale yaalo.

4. Hargaha iyo saamaha laga saaray xoolaha la qalay waa in laga fogeeyaa meelaha hilibka kale yaaalo.

5. Qof kasta oo ku howlan shaqada hilibka ama kawaan waa in uu ahaadaa nadiif macquul ah oo la qaadan karo, isaga oo maydhaya dhammaan jidhkiisa ee laga yaabo in uu gaadhay hilibku.

6. Qof kasta oo ka shaqeeyey hilibka ama haraga ka saaray neef buka, waa inuu si fiican u nadiifiyaa gacmihiisa iyo qaybaha kale ee jidhkiisa ee hilibkaasi ka taabtay jidhkiisa inta aanu ka shaqayn hilibka fayow, isaga oo isticmaalaya saabuun, biyo kulul iyo biyo qabow. Qalabkii loo isticmaalay harag ka bixin neefkii bukay waa in si buuxda loogu nadiifiyaa biyo kulol loogana dambaysiiya biyo nadiif ah.

(7) Qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha kawaanka hilibka ka shaqeeya, marka u ka soo baxo suuliga waa inuu maydhaa gacmahiisa ka hor inta aanu gacmaha la gelin hilibka ama agabka loo adeegsado diyaarinta hilibka

(8) Qofna isaga oo ku jira qolka gawraca ee kawaanak:-

a) Ma kaadi karo, ma saxaroon karo, ma cabbi karo sigaar, ma tufi karo candhuuf, marka laga reebo wixii ku haboon habka nadaafadda toosan

b) Kuma afuufi karo neeftiisa hilibka umana maamuli karo hab kale oo hilibka sadhayn kara.

c) Uma isticmaali karo midi, galka seefta, bir afeysan, faash ama miinshaar, diyaarinta hilibka la cuno kuwaasi oo hore loogu isticmaaley hilib la tuuray ama aan la cuni Karin

9 (a) Qalabka gargaarka deg-deg ah oo ku haboon kuna filan mar walbana dib loo buuxiyo kaasoo ay ka mid yihiin faashadaha nabarada lagu duubo, iyo wixii la mid ah oo ay ku jiraan gacma-gashiyo aan biyuhu ka gudbi karin iyo daawooyinka dila jeermiska waa in goor walba laga helaa kawaanka. Haddii baadhaha caafimaadka hilibku u arko in la shaqaaleeyo kaaliya caafimmaad ama in la tababaro mid ka mid ah shaqaalaha si ay u isticmaalaan qalabka gargaarka deg-deg ah wuxuu amrayaa sidan, hawl-wadeenka kawaankuna wuu u hoggaansamayaa, isaga oo kharshka bixinaya.

(b) Qalabka gargaarka deg-deg ah oo kawaanku yeesho ka sokow, hawl-wadeenka kawaanku wuxuu heshiis joogta ah la geli karaa cusbitaal ama goob caafimmaad oo u dhow kawaanka si uu wax uga qabto dhaawacyada ama xannuunada asiiba shaqaalihiisa

(c) Qof kasta oo ku xad-gudba awaamirta xeerkan dembi ayuu gelayaa, marka lagu helo dembiga wuxuu ku amraya baadhaha caafimaadka hilibku in uu u hogaasamo……………………..

**Qaybta 8: Baadhista hilibka ee jadwalkan**

Awaamirta jadwalka 1 ee qaybaha 6 ilaa 8.11 oo lagu daray kuwa lifaaqa 1 ee jadwalkan, kuwaas oo isbedal lagu sameyn karo,haddii loo baahdo ayaa si isku mid ah loogu dhaqan gelinayaa kawaanka loo aqoonsaday kawaanada dalka gudihiisa sida uu sheegayo xeerka 3 ee jadwalkan.

**Qaybta 9 – Tuurista hilib sadhaysan iyo qaybihiisa**

(1). Hilib kasta iyo qaybihiisa laga helo dhammaadka baadhitaanka in aanu fayoobayn, cafimaad qabin, ama ku habooneyn cunista dadka , waxaa si aad u muuqata dusha loogaga calaamadeynayaa "Lama cuni karo" taasi oo baadhaha caafimaadka hilibku uu sameynayo inta baadhitaanku socdo.

(2). Hilib kasta iyo qaybihiisa ee loo arko in aan la cuni karin waxa loo tuuraya siyaabaha soo socota:-

(a) Kawaanada haamaha wisikhda lagu rido kuwaa iyo lagu gubayaa leh waxay hoos tagayaan awaamiirta baadhaha caafimaadka hilibka. Haddii loo baahdana haamaha wuu qufulan karaa. Hilibka la tuurayo iyo qaybihiisaba haanta ayaa lagu ridayaa isla dhammaadka baadhitaanka sida ugu dhakhsaha badan. Ila inta laga qaadayo waa in ay ku xidhnaata oo lagu qofula haamaha ama meelo kale oo qofulma. xaydha laga shiilay, hilibka iyo qaybihiisa la tuuray waa la dhalan rogayaa si ay uga duwanaadaan oo looga sooci karo hilibaha la cuno, iyaga oo lagu darayo walax kimiko ah sida uu ku taliyo baadhaha caafimaadka hilibku.

(b) Kawaanada aan lahayn haamaha, hilibka la tuuro iyo qaybihiisa waa la qaadaa isla marka uu dhammaado baadhitaanku iyada oo lagu qufulayo qol ilaa iyo inta looga tuurayo siyaabaha soo socda midkood sida uu ku go'aan qaato baadhaha caafimaadka hilibku;

i. Ku dhalan rogida carbolic acid creasylic disinfectant ama walax kale ka dibna la tuuro iyada oo la waafajinyo shuruudaha dawladda hoose.

ii. Gubitaan dhammeystiran

iii. Haddii loo qaado hilibka sadheysan iyo qaybihiisa meel ay jiraan agab haamo waxaa lagu raraya weel biyuhu soo dhaafi karin oo qufulan, marka ay gaahdo alaabtaasi meeeshi loo waday waa in loogu dhaqma sida ay amrayso firqad hoosaadka (a) ee firqadan

iv. In lagu aaso god 2 mitir ah ama ka badan hoos u dheer iyada oo dusha lagaga farishayo nuurad ka hor inta aan godka ciida lagu daboolin.

c) Qolka la dhigo haanta qashinka, qolka haanta qashinka ku shubto iyo meelaha kale ee shaqo ka socoto ama wax lagu kaydiyo waa inay noqdaan meel nadaafadeeda la ilaaliyey:- waana in si weyn looga taxadira si boodhka iyo waxyaalaha kale looga ilaaliyo meelaha ay yaallaan waxyaabaha aan la cunin, si aanay u sadhaynin meelaha ay yaalaan waxyaalaha la cuni karo. Waxyaabaha aan la cuni karin waxaa lagu keydinayaa meel qalalan oo aan cayayaanku geli karin iyo si kasta oo looga hortagi karo inay ku darsamaan waxyaabaha la cuni karo;

## Qaybta 10: Dib u baadhista hilibka

(1). Dhammaan hilibka dib ayaa loo baadhayaa, in kasta oo baadhaha caafimaadka hilibku hore u baadhay una fasaxay si uu u hubiyo in hilibku yahay mid u qalma cunitaan markuu ka baxayo kawaanka.

(2). Haddii dib-u-baadhista la arko in aanu hilibku u qalmin cunitaanka dadka , calaamadii caafimmaadka ee hore loogu sameeyey ayaa laga goynayaa ama la tirtirayaa , hilibkana waa la tuurayaa.

(3). Kawaanka lama keeni karo wax hilib ah, haddii aanu ahayn marka hore mid lagu baadhay kawaanka ama kawaan dhoofiya hilibka oo uu fasaxay baadhaha caafimaadka hilibku. Dhammaan hilibka sidan oo kale loo keeno kawaanka ee la iibsaday, dib ayaa loo baadhayaa marka uu soo galo, haddii la arko in aanu la cuni karin waxa laga fujinaya calaamadii caafimaadka ee hore loogu oggolaaday, hilibkana waa la tuurayaa.

(4). Waa in baadhis lagu sameeyo hilibka, biyaha iyo waxayaalaha kale ee yaala kawaanka, kharashka ku baxaya baadhistana ay bixiyaan dowladaha hoose, si loo helo baadhitaan caafimaad oo hufan..

## Qaybta 11: Calaamadeynta iyo summadeynta hilibka iyo weelka hilibka

Shuruudaha ku xusan qaybta 8.11 ee jadwalka 1 kuna saabsan calaamadeynta, duubista ,qardaasaynta iyo sumadeynata, oo wax ka beddel lagu sameeyey, ayaa lagu dhaqmayaa, hadba sida uu u arko agaasimuhu inay haboon tahay kawaanada ee ku xusan jadwalkan.

## Qaybta 12: Diiwaan

1- Shuruudaha qaybta 13 ee jadwalka 1 ee ku saabsan haynta diiwaanka ee baadhaha caafimaadka hilibka iyo hawl-wadeenka kawaanka ee la xidhiidha kawaanada dhoofinta, iyada oo isbeddelka loo baahdo lagu sameeyo, ayaa laga dhaqmayaa kawaanka ruqsada shaqada ee jadwalkan.
Agaasimuhu wuxuu uga baahan kara maamulayaasha kawaanada iyo baadhayaasha caafimaadka hilibka xog diiwaan gashan iyo wixii kale ee xog dheerad ah sida ku xusan jadwalkan.

## Qaybta 13: Dhaqan gelinta Lifaaqa 1 ee Jadwalka II

Si shaki la'aan ah ayaa baadhista hilibka ee jadwalkan u hoos imanayaa baahiyaha lifaaqa 1 ee jadwalkan
Isaga oo adeegsanaya awoodaha ay siinayaan farqadaha 16 (1), 18(1) iyo (e ) ee xeerka xakameynta baadhista hilibka……….( sannadka) ayaa wasiirka wakhtigan

masu'uulka ka ah adeegyada caafimaadka xoolaha, wuxuu wareegto ku soo saarayaa xeerarka soo socda-
Xeerrarka baadhista iyo xakameynta hilibka digaaga:

# JADWALKA III.

## JAMHUURIYADA SOMALILAND

**Xeerka NO……………………………………………..**

**Sharciga Baadhista iyo Illaalinta Hilibka, No………......ee………... [Sanadka]**

Isaga oo adeegsanaya awoodaha ay siinayaan farqadaha 16(1), 18 (1) iyo (b) iyo (e) ee Sharciga Baadhista iyo Maamulka Hilibka…………[Sanadka], Wasiirka iminka haya jagada Adeegayada caafimaadka Xoolaha wuxuu wareegto ku soo saarayaa xeerarkan-

**Sharciga Baadhista iyo Illaalinta Hilibka xeerka baadhista Digaagga**

**1: Gogol xaadh**

1. Xeerarkani waxaa loo xiganaya in loo adeegsado baadhista iyo ilaalinta hilibka digaagga

2. Dhammaan digaaga loogu talagalay in dadku cuno waxaa la marinayaa baadhista caafimaadka ee gowraca ka hor iyo baadhista gowrca ka dib.

Dhammaan awaamiinrta ku xusan jadwalkan waxaa laga dhaqan galinayaa kawaanada digaagga lagu qalo;

**Qaybta 2: Qalabka habaynta digaaga iyo habraacyada**

3. Marka digaaga lagu diyaarinayo kawaan kasta, qalabka yaalla waxaa ka mid noqonaya:-

(**1) Qalabka kululeynta iyo baalal rifidda:**

Makiinadaha baalasha lagaga rifo waxay u sameysan yihiin hab ay ku joojiyaan inay baalasho baahaan dhammaan baalashuna waa in lagu guro weel si adag u haya ka dibna la soo daadaa, haddii aan warshadayn ama si kale loo isticmaaleyn

Qiyaasta socodka biyaha ku socoda haamahaa lagaga rifo baalasha digaaga, waa in mark kasta la bedala biyaha si loo ilaaliyo inaysan sadhoobin haamaha baal rifidu, waana in la joogteeyo faaruqinta haamaha oo loo dhaxeesiiyo wakhtiyo macquul ah.,

**(2) Qalabka uur-ku-jirta**

Suxuunta lagu maydho uur-ku-jirta waa inuu ka sameysan yahay bir aan daxaleysan ama maado u dhiganta; haddii qalab iswada loo isticmaalayo shaqada uur ku jirta waa inay iyaguna ka sameysnaanadaan qalab aan daxaleysan;

(**3) Qalabka maydhista hilibka**

Marka uur ku jirta la soo saaro waxaa gudaha iyo dibedaba lagu maydhayaa biyo nadiif ah oo la cabbi karo;

(**4) Qalabka lagu gooyo madaxa iyo addimada**

Qalabkani wuxuu ka sameysnaanayaa bir aan daxaleysan

(**5) Qalabka loo isticmaalo qaboojinta hilibka iyo waxyaalaha la cuni karo:**

(a) Qalabkan wuxuu ka sameysnaaanayaa bir aan daxaleysan ama maaddo kale oo ku haboon ,waxana looga shaqeynayaa si aanu jeermis ugu dhex dhalan;

(b) Haamaha qaboojinta hilibka oo ay ku jiraan biyo baraf ah, waa inay la haadaan qalab ka saara biyaha dheeraadka ah iyo inay ku rakiban yihiin heer-kulbeegyo toos loo akhriyi karo si saacad gudaheed heer kulka hilibka hoos gaadhigo ilaa 7.0C

(c) Biyuhu waxay u soconayaan siijeedka hilibku u socdo si hilibku u gaadho halka lagu qaboojinayo oo biyo nadiif ah soo galaan suxuunta.

(d) Tirada iyo meelaha biyuhu ay ka baxayaan waa inay u sameysnaadaan qaab aanay ugu ururin suxuunta wasakhdu;

(e) Hilibka oo lagu qaboojiyo biyo qabow, waxaa lagu bedeli kara in laga soo daldalo meel hawo qaboobi ka jirto si hoos loogu dhigo heer kulka hilibka ama iyada oo lagu qaboojiyo hab kale oo la ogol yahay;.

**(6). Qolalka keydinta:** waa inay hilibka digaagga ku hayn karaan heer kul ka hooseeya 7. 0 darajo oo Celsus

**(7). Qalabka loo:**

-Nadiifinta iyo buufinta qolalka iyo qalabka habeynta dhammaantii
-Nadiifinta iyo buufinta sahaaradaha iyo agabka kale ee digaagga lagu qaado

**(8). Weelka kaydinta waxyaalaha aan la cuni karin**

(a) waxay noqonayaan biyo kama dhibcaan ka sameysan bir ama maaddo kale oo aan biyuhu gelin karin ,si fududna loo nadiifin karo oo daboolku aad ugu giigsan yahay

(b) Marka la isticmaalayo qalab leh dhuumo hoos u janjeedha ama dariiqooyin kale marka wax la daadinayo waxay u sameysnaanayaan si loo ilaaliyo, wasakhow ama ur-xumi u sameysanto.

(**9). Qalabkii kale** wuxu ahaanayaa sida hadba Agaasimaha waaxdu u baahdo qaab ahaan

(**10).** Digaagga marka la gowraco ee la dhexgeliyo shamaca dhalaashan si baalasha looga rifo, waa in baalasha iyo shamaca oo socoda ay ku dhacaan weel ku haboon.

a. Shaandhada baalasha kala saarta iyo makiinadaha shamaca quusiya waa inay ahaadaan kuwa la qaad-qaadi karo;

b. Hawl-maalmeedku marka uu dhammaado shamacii la isticmaaley waa la kululeynayaa in aan ka yareyn 80 C muddo aan ka yareyn 20 daqiiqo waana la kala miirayaa , la maydhayaa laguna kaydinayaa meel nadiif ah

(c) Shamac aan ku keydsaneyn meel nadiif ah lama quusini karo hilibka digaagga.

**Qaybta 3: Habka shaqada**

1. Digaaga, digirinka, xamaamka iyo shimbiraha kale ee la cuno waa in lagaga shaqeeyo meelo kala gaar ah, ha ahaato wakhtiga ama meesha lagu shaqeynayo si looga hortago khatarta ka timaada in ay isa sadheyaan hilibaha shimbiraha kala duwan.

2. Hilibka digaaga, qaybihiisa iyo shaygii kale ee la arko in aanu u qalmin in dadku cuno waxaa lagu haynayaa laguna qufulayaa qol gaar ah waxana la tuurayaa ugu yaraan hal mar maalintii

3. Heer-kulka iyo nidaamka loo isticmaalayo qaboojinta iyo baraf-ku-heynta hilibka iyo shaygii kale ee la cuni karo waxa loo raacayaa sida ku cad hab-raaca shaqada kuwaasi oo hubinaya in si deg-deg ah hilibka looga qaado

kulaylka iyo in hilibka ama qaybaha aan la cunin dhan loo keydiyo sida xaaladahiisa guud tahay.

4. Diyaarinta hilibka ka dib lama hakin karo qaboojinta hilibka iyada oo la gaadhsiinayo heer-kul 40 C ah ama ka sii hooseeya

5. Beerka iyo wadnaha waxaa lagu qaboojinayaa heer-kul 4 darajo oo Centrigade ah (39 F) ama ka yar muddo 2 sacadood gudahood marka shimbirta laga soo saaro.

.

**Qaybta 4: Baadhitaan gowraca ka hore;**

1. Waa in uu jiraa qol gaar ah oo lagu hayo shimbiraha laguna baadhayo gowraca ka hor.

2. Haddii digaaga maray baadhitaanka hore lagu sameeyey ay muujiyaan astaamo cudur looma qali karo dadku in ay cunaan hilibkooda. Haddiise la qalo digaaga buka oo lagu qalaayo safka galiinka caadiga ah, waa in lagu qalaa marka u dhammaado qaliinka caadiga ah, si looga hortago sadhaynta qalabka waa in markiiba la maydho, lana jeermis dilo isla marka la gowraco digaaga buka;

3.(a) Baadhitaanka gowraca ka hor waa in loo sameeya sida ugu dhakhsaha badan inta aan la gowricin.

(b) Iftiin ku filan waa inuu helaa baadhitaanku;

4 Digaaga la keenay gudaha oo loola jeedo in lagu qalo kawaanka lagama saari karo meesha, ha loo keeno qaliin ama sabab kale darteed loo keenee, haddii oggolaansho qoraal ah aanu bixin baadhaha caafimaadka hilbka ee kawaanku;

5.Inta uu socdo baadhitaanku, arrimaha soo socda waa in la xusaa:-

(a) astaamo cudur oo raad ku yeelan kara caafimmaadka guud ee shimbirta

(b) In ay jiraan cuduro la yaqaano oo fida ama astaamo tilmaamaya in cudurdaasi soo kordhayaan.

(c) Weydnimo, baalal tagtaagan, maalo, nabar caabaqsan, dhoorka oo midab lahayn ama bararsan, shuban, hnidhiso iyo af kala qaad, dulalaka iyo indhaha oo dhaacaan ka yimaado, dhilts iyo dareenka guud oo aan wada shaqanayn.

6 Digaagii baadhista hore lagu sameeyey ee laga helay ama lagu tuhmay xaaladaha ku xusan firqada 4 ee qaybtan waa in lagu calaamadiyaa laguna sadhayn oo lagu qalaa marka uu dhammaado gowraca caadiga ah.

7 Baadhaha caafimaadka hilibka kasta oo fulinaaya baadhista hore waa in uu qoraal kula socdsiiya baadhaha caafimaadka ee sammaynaaya baadhista gowraca ka dib, haddii baadhayaasha caafimaadku samaynayaan laba baadhitaan oo kala duwan iyo sababta looga shakiyey digaaga;

8. Hilib kasta oo shimbireed oo baadhaha hore cadeeyey in laga shakiyey, waa in aan loo ogalaan in la cuno, haddii aan baadhis shaybaadh lagu cadayn in aanu hilibku lahayn wax jeermis ah oo keeni kara cudur.

9. Hilibka qaybo ka mid ah loo diray shaybaadhka si cudur- dhaliyaal looga baadho waa in lagu haya meel qufulan inta go'aan laga gaadhayo.

10. Shimbir kasta oo baadhitaanka gowraca ka hor lagu arko xaalad cudur in ay ku jirto baadhitaanka gowraca ka hor oo baadhitaanka dambena cadeeyo in la tuuro waa la tuurayaa hilibkeeda.

11. Shimbiraha la tuurayo ee la cuni Karin, haddii aanay ahayn mid hore dhimatay, waxa kaliya ee lagu qowrici kara qolka baaditaanka ee gowraca ka dib, waana in si deg deg ah loo tuura, loomana bandhigi karo si loo cuno;

**Qaybta 5: Baadhitaanka ka dib.**

1. Dhammaan shimbiraha uur-ku-jirtooda iyo meelaha jidhka ee daloola waxa lagu samaynaya baadhitaan dambe.

2. Shuruudaha ku taxan faqrada (1) waxaa lagu soo koobi karaa tiro tusaale ah oo la baadho, haddii uu ogolaado baadhaha caafimaadka hilibku bedelka habraaca

3. Kooxdii shimbiro ah ee isku meel ka yimid, baadhitaan faahfaahsan ayaa lagu sameeyaa tiro kooban oo iyaga ka mid ah oo uu arko in ay ku filan tahay baadhitaanka haddii uu ogolaado baadhaha caafimaadka hilibku beddelka habraaca.

4. Waxa baadhitaan dheeraad ah loo baahan karaa marka ay jirto sabab loogu tuhmi karo in hilibka shimbiruhu yahay mid aan la cuni karin.

5. (a) Nidaamka baadhitaanka ee gowraca ka dib

i. Baadhitaanka gowraca ka dib waxa la fulinayaa wakhtiga uur-ku-jirta la soo Saaro.
ii. Waa in la dooxa digaaga la gowracay si ay u muuqdaan xubnaha uur-ku- jirta iyo daloolada,si baadhisto u haboonaato.
iii. Beerka, beer-yarta, caloolaha iyo xiidmaha waa la soo bandhigayaa, laakiin iyaga oo weli xubnuhu ku xidhan yihiin jidhka

b) . Baadhitaanka dushu sare wuxuu ka koobnaanya dhabarka, dhinacyada iyo hoosta jidhka iyo sidoo kale madaxa, dabada, baalalka iyo lugaha.

c) marka baadhitaanka dusha sare la samaynaayo waxaa fiiro gaar ah la siinayaa cudurrada iyo xaaladaha soo socda, kuwaasi oo lagu go'aamin karo kala takoorida ama la tuuro shimbirta

i. Cudur cambaareed, nabar, dhaawacyo kale ,meel madow, dhiig bax yar, dhiig ku furmay maqaarka, wasakhoobid culus, dhadhsanaan, qanjidhka shahwada oo buka, isku-xidhka lafaha iyo seedaha iyo dahaadhkooda oo buka, maalo iyo burooyin buka.

ii. Marka uu socdo baadhitaanka guduhu xubnaha ku jira uurka iyo laabta Iyo dahaadhkooda iyo xuubka hawadu gasho ee sambabada waa la isla baadhayaa waxana la ogaanayaa in ur aan caadi aheyni jirto ama dhiig ururay uu jidhka galay.

iii. Marka baadhitaanka xubnaha, waa in la ogaadaa inuu jiro barar xaalad cudur.

iv. Marka xubnaha la baadhayo waa in la ogaadaa inuu barar ka jiro xubnahaasi ama xaalado cudur oo kale

6. (1) Habka loo go'aaminaayo kala saarida hilibka digaagga waa mid la ogolaaday, mid la ogolaaday haddii aan la arkin nabaro bedelay ama tuuris aan la cuni karin. Haddii la tuuro hilibka waa in la fogeeyaa hilibka (eeg lifaaqa)

(2) Go'aanka cudurka iyo xaaladda cudur ee aan ku jirin qaybta jadwalkan waxaa loo daynayaa tusaalaha/gaarka ah ee baadhaha caafimaadka hilibka

## Qaybta 6- Qardaaseynta hilibka la diyaariyey

1. Waa inuu jiraa qol gaar ah oo lagu qardaaseeyo noocyada hilibka digaaga ee la diyaariyey.

2. Hilibka waa in loo qardaaseeya si aanu u sadhoobin iyada oo ay ka mid tahay in la duubo beerka iyo wadnaha.

3. .Iyada oo lala tashanaayo baadhaha caafimaadka hilibka iyo dawladda hoose Agaasimuhu wuxuu soo saarayaa tilmaamo ku saabsan qardaaseynta iyo summadeynta hilibka digaaga iyo qaybihiisa.

**Qaybta 7: Dhaqan-gelinta lifaaqa 2 ilaa Jadwalka III**

Baadhitaanka hilibka digaaga ee ku xusan Jadwalkan wuxuu u hogaansaanayaa ammarada lifaaqa 2 ee Jadwalkan

**LIFAAQA 2**

A- Xaaladaha keeni kara in hilib digaag la tuur

Hilibka ama xubnihiisa waa la tuuraya dadkuna ma cuni karo haddii uu qabo ama lagu arko calaamadaha cudurrada soo socda:-

i. Maalo dhowr ah ( Abscesses, multiple)
ii. Daacuun shimbireed ama furuqa shimbiraha
iii. Cudur caabuq ba'an leh oo ku dhaca shimbiraha oo u keeno fayras ( fowl pox or fowl plague)
iv. Cudur shuban biyoodka digaagga ee loo yaqaan "New castle disease"
v. Cudurka Qaaxada ( Tuberculosis )
vi. Cudurka xumada digaagga ( Fowl typhoid)
vii. Cudurka digaagga ee loo yaqaan Salmonellosis
viii. Cudur-dhaliyaasha raaca ( Septicaemia )
ix. Cudur aan laga aqoon qaaxada ( pseudotuberculosis)
x. waa cudur u gudba dadka iyo xoolaha oo digaaggana ku dhaca oo u keeno fayrus (Listeriosis)
xi. Ornithosis/psittacosis ; waa cudur la is qaadsiiyo oo u gudba dadka
xii. Cudurka sumowga iyo dibbirada ee gaar ahaan laga qaado cuntada ( Botulism )
xiii. Cudurka sumowga ee u keeno "Toxoplasma"
xiv. Colingranulamatosis
xv. Infectious coryza : Samboor duuf leh
xvi. Neef mareenka oo cudur raagay qaba ( Chronic respiratory disease)
xvii. Samboorka ku dhaca shimbirta loo yaqaan "Turkey"
xviii. Neef mareenka sambabka gudahiisa oo cudur qaba ama xiiq "Infectious bronchitis"
xix. Cudurka ku dhaca xuubka sambabada
xx. Furuq digirin "Fowl pox"
xxi. Beer xanuunka
xxii. Cudurka shimbiraha ee ku dhaca dhiigga cad oo yaraada "Avian hepatitis"
xxiii. Cudurka uu keeno bakteeriyada loo yaqaan "Spirochete"

xxiv. Cudurka cambaarta "Mycotic diseases"
xxv. Weydnimo "Emaciation"
xxvi. Dheecaano hoos ugu urura caloosha :Ascites"
xxvii. Sumow
xxviii. Qaniinyo bahalo hoose"Staining"
xxix. Cudur dhoorka buluuga ah iyo hargabka shimbiraha
xxx. Ur aan caadi aheyn oo ka timid cudur ama daaweyn ama nafaqeyn
xxxi. Iyada oo laga daweeyey antbiotik ama kimiyotarabic haddii la qalo 6 maalmood ka dib markii la daaweyey.
xxxii. Sadhayn ka timid saliid , rinji iwm
xxxiii. Iyada oo aanu si fiican u dhiig bixin
xxxiv. Nuday barar cusub
xxxv. Xuubka sambabka oo bukaan cusub oo baahsan qaba
xxxvi. Midabka hilibka oo doorsoon baahay leh
xxxvii. Marinka beedku soo maro oo buka raad reeb leh qaba
xxxviii. Dabada oo bukta
xxxix. Laf jabtay oo caabuq leh
xl. Isku-xidhka lafaha iyo dahaadhka seedaha oo barar cusub qaba haddii uu raagayoo hilibka weydeeyey
xli. Lafaha oo jilicsan.
xlii. Deris-ku-noosha korka oo hilibku weydaysay ama dhiig yaraan keentay
xliii. Cudurka Madaxa Madow ( Histomoniasis) marka laga reebo cudurka oo bogsanaya xaaladda hilbkuna fiicantahay
xliv. Cudurka deris-ku-noosha wax yeesha xubnaha taranka
xlv. Shuban cusub oo ay raagay weydnimo oo u keeno deris-ku- noosha loo yaqaan "Coccidia'
xlvi. Cayayaan lagu arko hawo mareenka "Air sac mites"
xlvii. Ragaad iyo lafo jilayc marka laga reebo xaaladda hilibka oo fiican
xlviii. Gooryaanka caloosha haddii hilibku weyd iyo dhiig la'aan yahay
xlix. Jeenyaha shimbirta Turkey oo qallooca , marka laga reebo hilibka kale oo xaaladdiisu fiicantahay

i. Ku kululeynta biyaha oo laga badiyey
ii. Gumboro disease
iii. Hunguriga iyo cunaha oo buka
iv. Midicir xanuunka digaagga oo u keeno fayrus
v. Kud
vi. Cudurka digaagga ee u keeno Salmonella pullroum

**B Xaaladaha u baahan in la tuuro qayb ka mid ah hilibka digaagga**

Xubin ama qaybo ka mid ah hilibka digaagga waa la tuuraa lamana cuni karo, haddii lagu arko goobo cudurada soo socda:-.

a. Maalo, jidhka oo xoqmay, nabaro, burrooyin ama diri duuban. kuwasi oo inta bukta iyo unugyada ku wareegsanba la gooyo, haddii ay nabaradu kooban yahay ama aanay dahaadhnayn ama aanay jirin astaamo sheegaya in uu fidaayo ama ay weheliyaan xanuuno kale

b. Deris-ku-noosha dusha, gooryaanka caloosha: kuwaasi oo inta wax qabta aan la tuuri doonin marka nabaradu ay fudud yihiin oo aanay badnayn oo qaybtuna aragti ahaan iyo qaab ahaanba isbedelin, xaalada hilibkuna fiican yahay. Waxa laga si wanaagsan loo xoqaya nita bukta.

c. Barar : Qaybta bararsan keliya ayaa la goynayaa haddii meesha bararsani yar tahay, kuna kooban tahay goobo kaliya oo aanay jirin astaan tilmaamasay in ay ku fidayso xubnaha iyo unugyada jidhka intiisa kale.

d. Qayb hilib oo si xun u baxday: Qaybaha waa goynaya oo la tuurayaa.

e. Dhadhid : Xubinta wax noqotay waa la tuurayaa. Hilibka dhammaantii waa la daadinayaa haddii muruqyadu dhadhsanyihiin, gaar ahaan jeenyaha iyo muruqyada sakaarka ay dhadhitaan weyn oo baahsan qabaan.

f. Midab doorsoonka,lafowga, dheecaan ku uruay meelaha qaarkood, dhiig bax, qaybaha wax qaba waa la tuuraya

g. Kala goyska lafaha oo buka : Qaybta bukta waa la tuuraya haddii annay jirin saamayn guud

h. Jabniin laf : Qaybta wax qabta waa la tuuraya haddii aanu jabniinku cusbeyn aanay jirinna wax muujinaya saamayn cudur fidaya ama dhadhid guud

i. Caloolaha : Qaybaha caloolaha digaagga oo lagu arko calool is-taag ama wayd, qaybaha buka lama tuurayo haddii, hilibka caloolaha xaaladdiisu fiican yihiin oo aanu jirin wax kale oo raaca,

j. Uuf-wareenka shimbiraha

k. Coccidiosis: Cudurka ku dhaca midhicirka ee u keeno dirix-calooleedka la yidhaahdo Coccidia

l. Beer xanuun hoose

m. Furuqa digaagga

n. Xumada shimbiraha

o. Dhuunta neef mareenka samabada oo buka

p. Samboor duuf leh oo fidaya

q. Hunguri cadka iyo ka madow oo buka

r. Cadho

s. Qaaxo la mood

t. Deris-ku-nool xanuun ku keenta xubnaha dhalmada

**JAMHUURIYADA SOMALILAND**

**JADWALKA AFARAAD (IV)**

**Xeerka NO……………………………………………………………………………**

**Sharciga Baadhista iyo ilaalinta Hilibka, No…….......ee……….. [Sanadka]**

Iyada oo la adeegsanayo awoodaha ku xusan Qodobka 18 (1) (e) iyo (f) ee Sharciga Baadhista iyo ilaalinta hilibka…………[Sanadka], Wasiirka xiligan haya jagada Adeegyada caafimaadka xoolaha wuxuu soo saarayaa xeerkan:

**Sharciga baadhista iyo safrinta hilibka:**

**Qaybta 1- Gogol xaadh**

**1. Sharcigan waxaa loogu yeedhaa xeerarka baadhista iyo ilaalinta hilibka (safrinta hilibka)**

**2.** (a) Ereyada iyo odhaahda xeerarkani waxay iyagu leeyihiin macnaha sharciga looga yaqaan;

b) Xeerarkani waxa lagu fulin karaa safrinta hilibka bini Aadamku ay quudanayaan ee laga keenay dhammaan Kawaanada gowraca xoolaha ee sharcigan ku diiwaangashan.

**Qaybta 2: Ruqsada ogolaanshaha safrinta Hilibka iwm.**

1 (1) Qofna ma safrin karo hilib iib ah isaga oo aan marka hore heysan ruqsad ama ogolaansho uu bixiyey Agaasimuhu ama Sarkaal uu qoraal ugu wakiishay howshan.

2 Codsi loo qortay in lagu helo ruqsada safrinta hilibka, haddi loo baahdo in wax laga bedelo karo waa inay la jaanqaada awaamiirta sharcigan ee qaybaha 12 iyo 13.

3 Ruqsada lagu bixiyey qaybtan waxay shaqaynaysaa oo ay ansax tahay muddo 12-billood, waana la cusuboonaysiin karaa haddii qofka haysta ruqsada uu doonayo inuu sii wato ganacsigiisa.

4 Qof kasta oo haysta ruqsad sharci ah, shaqaalihiisa ama wakiilkiisa oo isticmaala gaadiid ama weel oo aan aheyn waxyabaha khaaska u ah ee

loogu talagalay in lagu safriyo hilibka sida sharcigan waafaqsanayn wuxuu gelaya gef/dambi;

5 Gaadiidka kasta ama weel kasta, waa in uu baadhis ku sameeyaa baadhaha caafimaadka hilibku wakhti kasta oo u arko inay muhiim tahay in baadhitaan caafimaad lagu sameeyo, si loo xaqiijiyo in loo hogaansamay shuruucda jadwalkan. Waa dambi in Baadhaha laga carqaladeeyo gudashada howsha baadhista hilibka.

6 Qofna ma fasixi karo in hilib ka saaro, laga safriyo karo ama la qaybiyo kawaanka gowraca-

**(a)** Ilaa hilibku uu yahay:-

i. Mid loo calamaadiyey in uu ku haboon yahay in dadku cuni karo;
ii. Mid si fiican uga asturan boodhka, wasakhda, dikhsiga ama cayayaanka kale;

iii. In looga soo shaqeeyey hab fiican si looga hortago sadhaynta sida hoos ku xusan;

iv. In uu hilibkan soo safriyey qof haysta ruqsada safrinta hilibka sida ku xusan xeerka 1 ee jadwalkan; waa in warqada ruqsada lala soo baxaa mar kasta oo uu codsado inuu arko masuulka rugta ama qofka dalabka hilibka leh ama wakiilkiisu;

v. Lagu soo safriyey ama lagu soo qaybiyey gaadiida nadiif ah, una dhisan habka hilibka iyo wax-soo-saarka hilibka oo xafidi karo sida ku xusan jadwalkan ama;

b. Haddii lagu soo safriyey gaadiid sida uur-ku-jirta aan la cunin, ama hilib aan cuno ahayn, waxayaalo la tuuray, la diiday, xoolo aan caafimaadkoodu fiicnayn ama waxyaalo kale.

7. . (1) Haddii baadhaha caafimaadka hilibku ogaado in gaadiidka hilibka ka qaada kwaanka aanu u hogaansamin awaamirta xeerka 7, waa inuu:-

a) Mamnuuca safrinta iyo qaybinta hilibka ee gaadiidka la saaray kawaanka, wuxuu baadhaha caafimaadka hilibku soo saari kara awaamirta uu u arko lagama maarmaan ama talo bixin si loo ilaaliyo u hogaansanaanta awaamirta xeerka

b) Wuxuu baadhaha caafimaadka hilibku amrayaa in laga soo dejiyo gaadiidka debina loo baadho.

2. marka uu baadhaha caafimaadka hilibku dhammaystiro baadhitaanka labaad sida ku xusan xeerka 8(1)(b) wuxuu soo saaraya awaamirta marka uu u arko lagama maarmaan, si loo xaqiijiyo in safrinta hilibku iyo wax-soo-saarka hilibku waafaqsan yihiin awaamiirta.

8) Qof kasta oo isticmaala gaadiid ama sababa in la isticmaalo gaadiid ama weel aan waafaqsanayn heerarka faya-dhowrka ee ku xusan jadwalkan wuxuu gelaya dembi/geg waana lagu qaadayaa dambigaas uu galay;

9) (1) Hilib kasta oo la safrinaayo waa inay la socotaa shahaadad cadeyneya ruqsada ee safrinta hilibka soona saaray baadhaha caafimaadka hilibka ee xukuma kawaanka laga rarayo hilibka, ruqsada waa inay ku dhegan tahay shaabada baadhista hilibka, waana inay ku qoran tahay warbixinadaha hoos ku qorani:-

a) Lambarka diiwaanka kawaanka gawraca xoolaha ee hilibka laga keenay;

b) Nooca hilibka (tusaale, hilibka lo'da) iyo tirada (kg) ee hilibka la safrinayo; waxaa kale oo ah in la cadeeyo miisaanka hilibka qoobaha kala duwan ay ku soo dhejiyeen intay safarka ku soo jireen.

c) Hilibka halka u ku socdo iyo qofka u hilibku u raran yahay

d) Magaca iyo saxeexa masuulka kawaanka gawraca xoolaha hilibka laga keenay;

e) Noocyada weelka ee loo adeegsanayo safarka iyo magaca qofka masuulka ka ah maamulka iyo xafidida weelka inta lagu jiro safarka;

f) Mudada ama masaafada shixnada raran ay qaadaneyso; iyo

g) Haddii ay jiraan waxyaabo kale oo Agaasimuhu u baahan karo oo ah in lagu muujiyo shahaadada rarka;-

(2) Shahaadada ruqsada safrinta hilibka, waa in laga soo saaraa saddex nuqul. marka u saxeexo shaabadeeyana masuulka kawaanku. Hal nuqul isaga ayaa la hadhaya, nuqulka kalena qofka masuulka ka ah shixnada weelka, ayaa la siinayaa, nuqulka saddexaad waxaa iska leh qofka shixnada iska leh ee ay ku socoto;

(3) Qofka loo sameynayo warqada ruqsada sida uu sheegayo sharcigan hoosaadkani,, waa inuu baxshaa lacagta khidmada ee lagu sameeyo ruqsada, sida wasiirku u go'aamin doono.

10. Haddii qofka shixnadan hilibka ay u rarneyd, shaqaalihiisa sharciyeysan ama wakiilkiisa u arko sabab cad oo la aamino in nadaafada iyo caafimaadka hilibka ama qayb ka mid ah oo doorsoomay intii lagu jiray safarka, ama in shahaadada ruqsada shixnada hilibka aysan sax aheyn ama ay jiraan sababo kale oo taabanaya badbaadada hilibka, wuu diidi kara shixnada u raran kuligeed ama qayb ka mid ah;

11. Agaasimuhu wuxuu u baahan kara sarkaal boolis ah oo caawiya marka la dhaqan gelinayo xeerarka jadwalkan, haddii loo baahdo Sarkaal kasta oo boolis ah oo hawshan looga baahdana waa inuu u hogaansamaa.

12. Qof kasta o ku xadgudba mid ka mid ah qodobada xeerarkaan, ama ku fashilma inuu u hogaasamo ogeysiisyada,xeerarka ama waxyaabaha la mamnuucay ee sharcigan hoosaadka lagu soo saaray- waxuu gelayaa dembi, waxana lagu qaadaya dambigaas uu galay…………

**Qaybta 3 - heerarka faya-dhawrka ee safrinta hlibka**

1, (a) Qeybta ama waaxyaha kawaanka ee hilibka laga rarayo gaadiidka, waa inay tahay mid masuulka kawaanku uu hawshaan ugu tala galay,xidhey, kana soocay qeybaha ama waaxyaha kale ee kawaanka ee hilibka lagu hagaajiyo si looga hortago in hilbku is dhex galaan oo ay is wasakheeyaan.

b. Waa in aan safrinta hilibka loo adeegsan weel ama gaadiidka loo adeegsado safrinta xoolaha nool ama wax kasta oo waxyeeleyn kara hilibka;

c. Weelka iyo gaadiidka hilibka safrinaayo laguma qaadi karo wax aan ku qorneyn shahaada safrinta hilibka;

d. Si looga fogaado shaki kasta oo ka iman kara, waa in aan hilibka cusub iyo waxyaabaha keeni kara inay hilibka wasakhooobo aan hal gaadiid lagu wada qaadin isku waqti, iyada oo la kala illaaliyo mooyee.Sidoo kale hilibka baakadeysan iyo hilibka aan baakadeysneyn hal gaadiid laguma wada qaadi karo isku waqti iyada oo shey ku filan loo kala dhaxeysiiyo labada hilib mooyee.

2. Xoolaha nool. Bakhtiyey ama xoolaha gawracan, ama neef aan haraga iyo uur-ku-jirta laguma qaadi karo weel ama gaadiid hilib safrin ruqsad loo siiyey.

3. Waa in hilibka loo dhigaa hab aanuu taabaneyn weelka lagu qaadayo sagxadda gaadiidka

4. Waa mamnuuc in hilibka lagu qaado madaxa iyo garbaha.

5. Xubnaha sida beerka, wadnaha, maskaxa, kelyaha iyo caloosha xoolaha oo nadiif ah waa in lagu qaadaa weel weyn oo aysan biyaha ka gudbi karin, si fudud loo nadiifin karo loona jeermis tiri karo haddii aan la barafeyn xubnahaan. Haddii la barafeeyay xubnahan oo micnaheedu yahay in lagu raro kartoono ama qardaasyo ama baco oo uu ansixiyey baadhaha caafimaadka, hilibku iyo qalabka iyo weelasha lagaga howlgalo hilibka. sida biraha hilibka la suro, mafrashyada iyo weelasha waa in lagu dhaqaa biyo nadiif ah;

6. Caloosha xoolaha oo aan nadiifta aheyn, mindhicirada ama qaybaha kale ee wasakheyn kara hilibka fiican ama leh ur xoogan waa in lagu raraa weelal aysan biyuhu ka soo bixi Karin, kuwaas oo si fudud loo nadiifin karo oo loo jeermis tiri karo, si fiicana u daboolan, si aysan furarka lagu daboolay aysan uga dhicin xilliga safarka.

7. Xamaal kasta ka hor inta uusan rarin ama soo dejin hilibka, waa inuu ku dhaqaa gacmihiisa iyo xubnihiisa kale ee hilibka ay is-gaadhi karaan jeermis-tira. Xilliga u wax rarayo ama soo dejinayo waa inuu xidhaa dhar nadiif ah oo dabooli kara qaybaha jidhkiisa (marka laga reebo gacmaha) oo u hilibka ku qaadayo.

8. Xamaal kasta ama qof kasta oo hilib safrinaya waa inuu maraa baadhis caafimaad, oo muddo u dhaxayso, sida uu amarka ku bixiyo Agaasimuhu. Xamaal kasta oo la ogaado in caafimaadkiisa uusan wanaagsaneyn intii lagu jiray baadhitaanka looma ogolaanayo inuu ka shaqeeyo hilib xilliga rarka inta Dhakhtar caafimaad uu ka soo xaqiijiyo xaaladiisa caafimaad.

9. (a) Xamaalku waa inuu shaqsi ahaan yahay, qof nadiif ah mar kasta, ka hor inta uusan ka shaqeyn hilibka, waana inuu mar kasta u hogaansamaa mabaa'di'da nadaafada shaqsi ahaaneed. Baadhaha cafimadka hilibku waa inuu marka kasta hubsadaa in xamaalku xidhan yahay dharka loogu talagalay faya-dhawrka hilibka la rarayo.

   (b) Looma ogola Xamaalka inuu wax calaashado, sigaar cabo, cunto ama cabbitaan (marka laga reebo biyaha caadi ah) inta u ku jiro shaqadiisa qaybtan hoos imaneysa.

10. Qofna looma ogola inuu iska dhex joogo ama dhex socdo qaybta hilibka lagu keydiyo ama inuu waxyaabaha u sida gaarka ah u leeyahay ama waxyaaba kale u dhigto bakhaarka hilibka lagu keydiyo inta lagu jiro rarida hilibka.

11. Gaadiidka ama weel kasta inta aan hilibka la saarin ka hor, waa in gebi ahaan la meydhaa iyada oo la isticmaalayo saabuun sharciyeysan, kadibna waa in la

raaciyaa biyo nadiif ah, mar kalena la raaciyaa biyo nadiif ah oo markaana lagu daray walxaha ansaxa ah oo jeermiska dilla.

12. Saabuunta hoos ku xusan waxaa waqtiga hada la joogo loo isticmaali karaa nadiifinta iyo jeermis-tirida weelasha iyo gaadiidka hilibka lagu qaado:-

c) Sodium bicarbonate;
d) Sodium carbonate (soda ash);
e) Trisodium phosphate;
f) Saabuun (Soap);
g) Synthetic detergents (wetting agents);

13. Walxahan jeermis-dilayaasha ah waxaa waqtigan ( hada la joogo) loo isticmala in lagu dhaqdhaqo gaadiidka iyo weelasha la dhaqay,

| | |
|---|---|
| Quaternary ammonium compounds …… | 50 ppm |
| Aqueous Solutions of iodine……………. | 50 ppm |
| Sodium hypochlorite ……………………... | 50 ppm |
| Chloramine T ……………………………. | 50 ppm |

14. Matoorada gaadiidka waa in aan la kicin inta rarka ama soo dejinta hilibku ay socoto, waana in albaabada iyo daboolada weelka la xidhaa ka hor inta aan la kicin matoorada gaadiidka.

15. Waa in aan gaadiidka lagu shubin shidaal iyada oo albaabada iyo daboolada weelka hilibku ku jira ay furan yihiin.

## Qaybta 4 Qaabka iyo adeegsiga gaadiidka iyo weelka

### Baahida Guud

1. Darbiyada saqafka sare iyo sagxada hoose ee dhismaha lagu xareeyo hilibka waa inay ka sameysan yihiin shay aan dilaaceyn, siman oo aysan waxba ka gudbi karin sida biyaha oo leh midab khafiif ah, si fududna loo nadiifin karo ama loo jeermis-dili karo;

2. Dhismaha hilibku sida gaarka ugu jiro, waa in boodhka iyo biyuhu geli Karin. Waa in albaabada iyo daboolada ay si fiican u furaysan yihiin si boodhka iyo biyuhu aanay u geli karin;

3. Meelaha ay hawadu ka gasho ama ka baxdo iyo meelaha biyo saarista ee gaadiidka hilibka sidaa, waa inay leeyihiin qalab boodhka ka celiya;

4. Marka la safrinayo hilibka ha noqodo neefka oo is wata, qayb ka mid ah ama hilbaha lafaha laga soo jaray waa in la adeegsado biro hilibka la sudho, mafrashka ama Biraha qalooca ee hilibka la sudho u dhisanaadaan sida soo socota –

   a) Biraha Hilibka la sudho (Rails) –Waxaa biraha qallooca loogu dhisaa gaadiidka qaada si ay uga hortagaan in hilibku soo dhaco inta safarka lagu jiro; waa in biraha la sudho hilibka lo'da ugu yaran la isku jirsiiyaa 35 cm; inta ugu yar ee isku jirsan karaan biruhu waa inta u dhaxeysa 60 cm;

   b) Mafrashyo ama khaanado wax lagu rido (Shelves or Racks)- Waa inay ka sameysan yihiin bir aan daxaleysan oo ay fududahay in la burburiyo iyo in la nadiifyo; mafrashka ugu hooseeya ama khanadaha ugu hooseeysa waa inay sagxada hoose u jirsadaan ugu yaraan 5cm, waana in hilibka lagu rido mafrashka ama khaanada ugu yaraan u jiraa 5cm saqafka sare ee mafrashka ama khaanada;

   c) Waa in khaanadaha iyo janbiyada gaadiidka hilibka sida ugu yaraan isku jiraan 5 cm. Hilibka la iskuma dul rasayn karo. Hilibka kale waa in loo safriyaa sidaa ku xusan faqrad hoosaadka ee faqrada 3-aad iyo tan 5-aad.;

5. Hilibka ku jira qardaasyada ama sanaaduuqda barafeysan, waa la is dulsaari karaa, sida oo kale waxaa la isdul rasayn karaa neefka la gawracay ee la xubna saaray lana baakadeeyey, iyada oo markaas la isku dul saarayo hab ku haboon;

6. Gaadiidka iyo weelka lagu isticmaaalo safrinta hilibka, waa in la mariyaa rinji, loona calamadeyaa sidan soo socota:

   a) Gaadiidka waxaa gebi ahaanba la marinaya rinji cad, waxaana diilin ama xariiqin casaan ah oo 30 cm oo balaadh ah laga marinayaa labada dhinac iyo xaga dambe, waxaana labada dhinac iyo xaga dambeba lagu soo bandhigaa iyadoo qoraal aan cabbirkeedu ka yareyn 20 cm joog ah calaamada **(HILIB);**

   b) Rimoodhka Gaadhiga (Trailers)- Waxaa gebi ahaan rimoodhka ama tareelaha la marinayaa rinjiga cad, waxaana diilin ama xariiqin Casaan ah lagu wareejinayaa tareelaha afartiisa gees; xariiqintaas Casaanka ah waxaa dhexdeeda lagu qoraa (**HILIB)** oo aan 20cm ka weyneyn xaga jooga, iyada oo erayga hilib lagu qorayo midabka madowga ah;

c) Gaadiidka ay ku xidhan yihiin rimoodhku waxaa sumada (**HILIB)** laga dhigaa Casaan ku dhex taal meel cadaan ah, waxaana lagaga qorayaa labada dhinac iyo dhinaca dambe ee gaadiidka. Calaamada (HILIB) waa inay ku qoran tahay far waaweyn iyadoo weelka lagaga qoro afartiisa dhinac, oo aan 20cm ka yareyn xaga jooga,

d) Weelka qaybeysan, sanaaduuqda iyo wixii kale – gebi ahaanba weelka waxa la marinayaa rinji cad kaasoo badhtamihiisa lagu qorey far casaan oo ah " HILIB " taasoo ah far waaweyn oo afarta dhinac ee weelka lagaga qoro.

7. Sumadaha kale ee loo adeegsado xayeysiinta sida magaca mulkiilaha ama sumadaha kale waa lagu soo bandhigi karaa Gaadiidka meeli aan ku fugayn 60cm.halka ay ku taal calaamada **Hilib.**

## Waxyaabaha sida Khaaska ah looga baahan yahay Safrinta

8. (a) Hilibka waxaa lagu rari karaa gaadiid aan lahayn qaboojiyayaal (refregerators) haddii waqtiga safarku aanu ka badneyn labo sacadood;

   (b) Haddii safrinta hilibku ay qaadaneyso in ka badan labo saacadood waxaa loo baahan yahay in la helo gaadiid leh qaboojiyaal;

### Baahiyaha Cayiman

Waxyaabaha sida Khaaska ah loogu baahan yahay

Safrinta Hilibka ee masaafad ka yar 50 Kilometer ama muddo labo Saacadood ah

9. (a) Hilibka waxaa lagu rari karaa gaadiid aan laheyn daah, haddii gaadiidku leeyahay saqafyo labo lakab ka sameysan, taas oo ay waxyaabaha ay ka sameysan yihiin la rabo inay isu jiraan ugu yaraan 4cm. Gaadiidka noocan oo kale ah, waa in loo sameeyaa meel sare oo ay hawadu ka baxdo si ay hawo fiican u soo gasho;

   b) Hilibka waxaa lagu safrin karaa weel qaybo leh, sida sanduuqyo iyo meelo kale oo wax lagu rido oo u sameysan hab waafaqsan xeerarka 1 illaa 7 ee qaybtan.

Weelka noocan ah waa in laga ilaaliyaa qoraxda tooska ah ee ku dhacaysa, waana in loo dhigaa gaadiidka dushiisa hab waxyaabaha kale ee gaadhiga saaran aana wasakhdoodu soo gaadhi karin weelka marka u furan yahay.

### Safrinta hilibka ee masaafad ka yar 200 Kilometer ama Waqti afar Saacadood ah

*10)* Hilibka waxaa lagu safrin karaa gaadiid dahaadhan oo u sameysan qaab heer-kulka hilibku la safrinayo in la gaadhsiin karo ugu badnaan yahay 1°C saacadiiba.

**Safrinta hilibka ee masaafad ka badan 200 Kilometer ama in ka badan Waqti afar Saacadood ah**

11) Hilibka waxaa lagu safrin karaa gaadiid dahaadhan oo ku qalabeysan qaboojiyayaal ama loo helo qaboojin ku filan, si loo xaqiijiyo in korodhka heer-kulka hilibku u ka yar yahay 3 °C inta lagu jiro safarka 12ka saacadood ee maalinta.

# JADWALKA V

## JAMHUURIYADA SOMALILAND

**Xeer no…………………………………………………………………………………**

**Sharciga baadhista iyo ilaalinta hilibka, No………….ee……….. [Sanadka]**

Iyada oo la adeegsanayo awoodaha ku xusan Qodobka18 (1) (e) iyo (f) ee sharciga baadhista iyo ilaalinta hilibka…………[sanadka], wasiirka xilligan mas'uulka ka ah addeegyada caafimaadka xoolaha waa inuu soo sara xeerarkan soo socda ;

**Sharciga baadhista iyo ilaalinta jumlada iyo tafaariiqda iibinta hilibka**

1. Sharcigan waxaa loogu yeedhaa xeerarka baadhista iyo ilaalinta jumlada iyo tafaariiq u iibinta hilibka (Meat Wholesale and Retailing Regulatio**ns).**
2. Ereyada iyo odhaahda gaagaban ee halkan lagu adeegsanayo waxay la micna yihiin macnaha sharciga looga yaqaan marka laga reebo micnaha erayo dhowr ah loo baahdo;

**Iib-** waa ka iibinta hilibka macaamiisha si ay guryahooda ugu qaataan una karsadaan isla markiiba;
**Jumlad iibiye** – waa qof iibsha hilib jumlad ah ama hilib jumlad ah ka soo iibsada kawaanka xoolaha lagu gawraco si u tafaariiq ahaan ugu sii iibiyo si micnaheeda loo fahmo;

**Hilible** (Vendor) – waa qofka ka shaqeeya kawaanada ama meelaha la mid ka ah si uu hilibka dadweynaha uga iibiyo, ha ahaado qof mulkiile ah, mid la soo kiraystay ama mid wakiil ka ah mulkiilaha ama mid kawaanku soo kiraystay;

3. Agaasimuhu isaga oo la tashanaya wasiirka iyo saraakiisha waqtiga hada la joogo masuulka ka ah arimaha la xidhiidha Fayo-dhawrka iyo madaxda dawladda hoose, waa inuu soo magacaaba shaqsi aqoon sare u leh oo loo aqoonsado baadhaha caafimaadka hilibka jumlada iyo tafaariiqda lagu iibiyo, iyada oo waajibaadka baadhaha la magacabay u noqonayo;

   a) In u baadhitaan caafimad ku sameeyo hilibka jumlada iyo tafaariiqda ee baxaya si u hubiyo in hilibka jumlada iyo tafaariiqda loo iibiyey ay waafaqsan yihiin heerka faya-dhowrka iyo badbaada hilibka xaalada ee sharcigan;

   b) Waa inuu si deg deg ah u soo wargeliyaa baadhaha caafimaad ama Booliska ee masuulka ka ah kawaanka hilibka jumlada lagu iibsho haddii u arko xadgudub lagu sameenayo xeerarka jadwalkan ee khuseeya faya-dhowrka iyo badbaada hilibka. Waa in shaqsiyaadka la soo wargeliyey ay si deg deg ah uga jawaabaan codsiga kaga imanaya masuulka baadhaha, aayna qaadaan tallaabada lagama maarmaanka ah;

   c) Kula taliya baadhaha caafimaadka ee jooga kawaanka gawraca in loo baahan yahay in hilibka aan ku habooneyn caafimaadka bini Aadam-ka loo aqoonsado mid aan la isticmaali karin; waa inuu sidoo kale talo ku baxshaa baahida in la xidho ama dib loo furo meesha hilibka jumlada iyo tafaariiqda lagu iibinayo ee dibeda ka ah kawaanka; iyo

   d) Inuu Sameeyo wax kasta oo lagama maarmaan ah in la sameeyo, si loo dhaqan galiyo awaamiirta jadwalkaan.

4. (a) Qofna ma noqon karo iibiye hilib sida sharcigan ku xusan illaa uu haysto sharciga ruqsada ee la siiyo shaqsiyaadka hilibka iibiya ee la soo saaro sida ku xusan faqrada (c) ee xeerkan, waana in la siiyaa shahaadada cadeyneysa inuu caafimaadkiisu fiican yahay oo u shaqeyn karo sida Iibiye hilib. Shahaadada waxa bixiya sarkaal ka tirsan Fayo-dhawrka, ha noqdo mid ka socda dawladda hoose ama wasaaradda dawladda hadda u haya jagada caafimaadka dadweynaha.

   (b). Iibiyaha hilibka waa inuu warqada ruqsada ee shaqada iyo shahaadada cadeyneysa inuu caafimaad kiisu taam yahay sudhaa meel ka mid ah meesha uu ka shaqeynayo, waana in si fudud loo arki karaa;

(c). Warqada ruqsada waxa bixinaaya Dowladda Hoose oo awood u siinaysa in ku shaqaysto sida xeerkani qeexayo. Shahaadada caafimadka qabka waxa bixinaya sarkaal ka tirsan qaybta fay-dhowrka ee caafimaadka guud ee masuulka ka ah meesha ay ku taalo halka uu ku shaqysto.

(d) Haddii hilib iibiyuhu u guuro meel ka baxsan halkii loo siiyeye ruqsada. Wuxuu soo codsanaya ruqsad cusub iyo shahaadad kale sida uu qeexayo jadwalkani.

(e) Ruqsada iyo shahaadada Labadaba waa la cusboonaysiiya sanad walba, sida ku xusan qaybta 13,14 ee sharcigan. Iyada oo laga bedelayo wixii loo baahdo, sharcigani wuxuu qabanayaa dhammaan bixinta, cusboonaysiinta, meel bedelashada, ruqsad iyo shahaadad bedelashadooda.

(f) Sida ku xusan sharcigan qaybtiisa 6(b) ee jadwalkan, ruqsada iyo shahaadada lagu bixiyey jadwalkan waa laga qaadi kara. Waxana ka qaadi kara wakhti kasta masuulkii bixiyey. Sababaha kale marka la dhaafo, hadday ula muuqato masuulkii bixiyey in xaladaha faya-dhowrka ee meeshu iyo shaqaaluhu ay ka hooseeyaan heerkii loogu talagalay faya-dhowrka. Haddii laga qaado ruqsada iyo shahaadada waxay keenaysa in la xidho goobta ganacsiga.

5. Qof kasta oo iibiya hilib waa inuu goobtiisa shaqada ku haystaa qalabkan hoos ku qoran

   a) Miishaar,ama mid koronto loo isticmaalo oo ka sameysan bir aan daxaleysaneyn oo lagu googooyo hilibka. Miishaartu waa inay ahaata nadiif, waana in si fiican loo jeermis-dilaa maalin walba marka shaqadu dhamaato. Haddii aanay jirin miishaar koronto lagu isticmaalo waa in uu hilib iibiyuhu haysta tiro mindiyo gacmeed ama miishaaro hadba intuu u baahdo. Waxa kale oo looga baahan yahay faashash uu hilibka ku googooyo. Mindiyo gacmedka, miishaaraha iyo fashashku waa in ay ka samaysnaadaan waxyaalo uu ansixiyey agaasimuhu oo nadiifna ahaadaan mar walba, laguna isticmaalin in lagu googooyo waxaan hilib ahayn.

   b) Meel hilibka lagu soo bandhigo si loo arki karo oo lagu sheeqeeyo sida ku xusan xeerka 8 ee jadwalkaan;

   c) Mashiin hilibka shiida, waa haddii duqad uu iibinayo;

   d) Qaboojiyayaal ama firinjeero haddii duruufta ay saamaxi karto;

   e) Qol shaqaalihiisa ay iskaga badali karaan dharka ayna dhigtaan waxyaabaha ay khaaska u leeyihiin;

f) Meelo gacmaha lagu maydho sida ku xusan qaybta 5 ee jadwalka I;

g) Sanduuq qalabka u dhameystiran loo adeegsado Gargaarka Deg Dega ah iyo

h) Agabyada iyo qalabka kale ee agaasimahu u baahan karo;

6. Iibiyaha hilibka iyo dhammaan shaqaalihiisu waa inay mar kasta hubsadaan in xaruntu ay mar walba furan tahay oo ay shaqeyneyso. Waa inay xidhaan dhar dhaadheer oo maydhistoodu ay fududahay. Iibiyuhu waa inuu hubsaada in dhar badan u yaalo kawaanka, si iska-bedellida dharku ay u fududaato marka loo baahdo. Si looga fogaado shaki, waa in awaamiirta ku qoran Qaybta 4 ee Jadwalka 1 ee ku saabsan nadaafada shaqaalaha jooga rugta kawaanka gawraca lagu dabaqaa jadwalkan.

7. (a) Waa in iibiyaha hilibka iyo shaqaalihiisa ay maraan baadhitaano caafimaad oo joogta ah inta u dhaxeysa labo xilli kasta sida uu hadba go'aamiyo Agaasimahu si uu u hubsado xaaladooda caafimaad iyo nadaafadooda; sidoo kale baadhaha caafimaadka hilibku isaga oo la tashanaya masuulka caafimaadka ee baadhitaanada ka sameeyey a arko inay u haboon tahay caafimadka iyo nadaafadu;

(b) Haddii xaladaha cafimaad iyo nadaafada shaqsi ahaaned la waayo, baadhaha caafimaadka hilibku ama masuulka caafimaadka ay u muuqato khatar ku wajahan dadweynaha iibsanaya hilibka, waa in baadhaha caafimaadka hilibku uu xidhaa meesha isaga oo ku dhejinaya erayadan "Waxa loo xidhay arirmo la xidhiidha caafimaadka". Ogeysiiskan waa in lagu qoraa luuqada wadanka lagaga hadlo. Baadhaha caafimaadka hilibku wuxuu xidhi kara meeshan keliya haddii Iibiyaha hilibku uu u hogaansami waayo amarada baadhaha caafimaadka hilibka.

(c) Meel la xidhay iyada loo cuskanayo faqrada (b) ee xeerkan way xidhnaaneysaa ilaa baadhaha caafimaadka hilibku uu cadeeyo inay mar labaad hawl geli karto. Laakiin meesha waxaa laga furi kara ganacsi kale oo aan aheyn hilib iibin iyaddoo aan lala soo socodsiin kormeeraha furitaanka meesha;

(d) Isaga oo la tashanaya sarkaalka u qaabilsan caafimaadka dadweynaha, baadhaha caafimaadka hilibka wuxuu amar ku siin karaa iibiyaha hilibka iyo shaqaalihiisa ama iibiyeyaasha hilibka iyo shaqaalahooda inay ka soo qayb galaan tababaro ku saabsan sida faya-dhowrka hilibka loo ilaaliyo. Wasiirku wuxuu diyaarinayaa hab ay uga qayb galaan kuwa dawliga ah iyo kuwa gaarka ahba tababar ku saabsan howlahan.

8. (a) Iibiyuhu wuxuu hilibkiisa ku soo bandhigi karaa murraayad gudaheeda ama mafrishyo leh shabaq ama mafrishyo kale oo uu Agaasimaha ansixiyay haddii mafrishka aanu soo geli karin boodhku, dukhsiyagu iyo cayayaanku;

   (b) Haddii duruufto saamaxado, ama haddii Baadhahu u arko inay muhim tahay waa inuu amar ku baxiyo in hilibka lagu rido miis muraayado leh oo heer-kul beeg leh, sidaasna hilibka loogu hayo heer-kul qabow ah oo u dhaxeeya 0 - 4 $^{o}$C si hilibka laga iibinayo dad-weynaha uu noqdo mid badbaadadiisa caafimaad ay sugan tahay;

9. Macaamiisha hilibka iibsanaya looma ogola inay gacmahooda ku taabtaan hilibka la soo bandhigay. Shaqsiga macaamisha ka mid ah waa inuu sharaxaa oo cadeeyaa nooca hilibka uu doonayo, isagoo ku tilmaamaya fartiisa ama ul meesha taal oo loogu tala galay in hilibka lagu tilmamo, ama habab-kale oo aan la taabaneyn hilibka, illaa hilibka qofka lagu wareejinayo markuu iibsado

10. Iibiye kasta oo hilibka uu tallagadda ugu jiray 7 casho iyo hilibka kaloonka iyo digaagga isaguna tallaagadda ku jiray 4 maalmood. Haddii lagu soo kordhiyo hilib aan hore talaajad u jirin waa la daadinaya haddii aan loo isticmaalayn u jeedooyin kale oo aan ahayn cunida dadka.

11. Awaamiirta jadwalkan iyaddoo wixii bedelid iyo dib u hagaajin lagama maarmaan ah lagu sameynayo waxaa lagu dabaqi karaa shaqsiyaadka iibinaya hilibka. Si kastaba ha ahaatee iyadoo laga fogaanayo shaki –waa in la sameeyaa arimahan soo socda -------

    a) Jumladlaha hilibka iyo rugtiisa waa inay heystaan warqada ruqsada shaqada iyo shahaadada caafimaadka labadoodaba sida ku xusan sharcigan inta aanu noqon jumladle noqo.

    b) Qofna ma iibin karo hilib jumlad ah, ilaa agabka meesha u yaal ay ka mid yihiin qaboojiyeyaal, iyo qalabka kale ee Agaasimahu u baahan karo si loo ilaaliyo faya-dhowrka la xidhiidha keydinta iyo qeybinta hilibka; iyo

    c) Iyada oo laga bedeli karo waxii loo baado xeerarka jadwalkaan IV waa inuu si adag u ilaaliyaa jumladluhu meelaha uu hilibkiisa u qaybiyo tafaariiqlahu.

12. Qof kasta oo iibsanaya hilib isaga oo macaamiisha ka mid ah, kana iibsanaya hilibka qof tafaariiqle ah ama jumladle ah wuxuu xaq u leeyahay:-

a) In laga iibiyo nooca hilibka uu weydiistay sida hilibka lo'da, iddaha, geella ama digaaga, haddii nooca hilibka uu codsaday aanu oolin rugta, iibiyuhu wuxuu u soo jeedin kara qofka macamiilkiisa ah inuu qaato hilib kale ama haddii Iibiyuhu uu arko sabab ku khasbi karta inuu qofka iibsanaya hilibka inuu qaato hilib kale, laakin hilib iibiyuhu kuma qasbi karo hilib aanu qofku doonayn in uu iibsado.

b) Inuu waydiisan karo in laga iibiyo xubin ama qayb ka mid ah neef gawracan oo ay ka muuqato sumada caafimaadku;

c) Inuu diido hilibka laga iibshay ee uu ku arko arimo muujinaya in hilibku yahay mid nadafadiisa aanay wanaagsanayn;

d) In hilibka uu iibsaday loo qardaaseeyo ama loogu rido shay aan wasakheyn karin hilibka ama ka dhigi karin hilibka wax aan la cuni karin;

Si looga fogaado wax kasta oo shaki keeni kara ee isticmaalka qardaasyada dhaqanka ah, sida sellada ama weelasha ka sameysan alwaaxda ama agabka guriga loo isticmaalo duubista hilibka ama lagu qaadanayo ka dib marka la iibsado waa mamnuuc haddii aanu ansixin agaasimuhu.

e) Xayeysiinta uu hilib Iibiyuhu u sameystay hilibkiisa si uu u soo jiito macaamiisha, waa inayna noqon mid been abuur ah oo khiyaamo ku jirto, gaar ahaan xaalada faya-dhowrka iyo badbaadada hilibka. Haddii ay dhacdo been abuurkaas ama khiyamadaasi waa in uu dib u bixiyo lacagtii hilibka lagaga iibsaday waana in uu bixiyaa mag-dhow iyo wixii kale ee arintaas lagu dawayn karo.

f) Waa in la wargeliya booliska iyo dawladaha hoose xadgudubyada laga galay jadwalkaan ee Iibiyaha hilibka, shaqaalihisa ama wakiiladiisa-weliba gaar ahaan xadgudubyada la xidhiidha nadaafada iyo badbaadada hilibka;

g) Warqad dacwad ah ayaa loo soo qoraya agaasimaha ama cidii kale ee ay khuseyso, marka macmiilku ogaado in madaxdii siisay hilib iibiyaha ruqsada iyo shahaadada ay waxba ka qaban waayaan ama daayacaan dambiga uu galay hilib iibiyuhu, in kasta oo macmiiku uu in badan dacwooday. Waa in agaasimuhu kaga soo jawaaba arjiga dacwoodaha mudo 21 cash ah.

13. Qof kasta oo ku xadgudba mid ka mid ah awaamiirta jadwalkan waxuu galayaa gef, waana lagu qaadaya dambiga u galay……………….

**JADWALKA (VI)**

**JAMHUURIYADA SOMALILAND**

**XEER NO……………………………………………………………………………..**
Sharciga baadhista iyo Ilaalinta Hilibka, no…………ee……….. [sanadka]
Iyada oo la adeegsanayo awoodaha ku xusan qaybtan

Sharciga baadhista iyo ilaalinta xeerarka habaynta hilib

**Xeerarka 18** (1) (e) ee sharciga baadhista iyo ilaalinta hilibka…………[sanadka], Wasiirka wakhtigan haya adeega caafimaadka xoolaha wuxuu soo saarayaa xeerarkan:-

**Qaybta 1 Gogol xaadh**

**Tixraac;**

1.Sharcigan waxaa loogu yeedhaa xeerarka baadhista iyo ilaalinta xeerarka habaynta hilibka;

**Erey bixin (Turjumida eryada)**

2. Ereyada iyo odhaahda gaagaban ee halkan lagu adeegsanayo waxay la micna yihiin macnaha sharciga looga yaqaan;

**Qaybta 2 Waxyaabaha looga baahan yahay qalabka hilibka lagu jar-jaro ama lagu habeeyo;**

**Qalabka looga baahan yahay jar-jarista hilibka**

**3.** Mas'uuliyada dadka ka ganacsatada cuntada, waxay tahay inay hubsadaan in qalabka loo adeegsado jar-jarida iyo socodsiinta hilibka ay u sameysan yihiin hab aanu hilibku ku sadhoobi karin; gaar ahaan-

a) Waa in la helo qalab ku haboon oo lagu jar-jaro laguna habeeyo hilibka;

b) In la joogteeyo horumarinta shaqada.

c) In la kala saaro qaybaha kala duwan ee wax soo saarka;

4. Waa inay yeeshaan:-

a) Qolal loogu talagalay in si kala gooni gooni ah loogu keydiyo hilibka la qardaaseeyey iyo hilibka dibad yaalka ah haddii habka loo kaydiyey ama loo qardaaseeyey aanay hilibka wasakhayn wakhtiyada kala duwan;

b) Qalab loogu talagalay in gacmaha lagu maydho oo leh qasabado loogu talagalay inay ka hortagaan faafida wasakhda, waxaana loogu talagalay qasabadahan inay isticmaalaan oo kaliya shaqaalaha ku howlan wax soo saarka hilibka; iyo

c) Agab ama qalab loo adeegsado in lagu jeermis dilo alaabta oo markaas lagu shubo biyo kulul oo aan heerkulkoodu ka yareen 82 $^{o}$C ama waa inay jirto hab kale oo sidan oo kale u shaqeynaya;

5. Howl wadeenadu waa inay mar kasta hubiyaan sida ugu haboon ee aanu hilibku ku sadhoobayn marka la habeynayo. Waxaa intaa dheer in howl wadeenadu hubiyaan gaar ahaan:-

   a) Hilibka loogu talagalay in la jar-jaro, waa inuu si isdaba joog ah u soo galaa qolka shaqada;
   b) Marka hilibka la jarjarayo, lafa saarayo, la habeynayo, cad-cad loo jar-jarayo, la duudubayo iyo marka la qardaaseynayo waa in lagu hayaa heer-kul beeg aan ka badnayn 7 $^{o}$C iyadoo heer-kul-beega wareega aanu ka badnayn 12.

## Qaybta 3 Waxyaabaha looga baahan yahay habeynta hilibka la Qasacadeenayo

1. Weelasha ama qasacadaha lagu rido hilibka la habeeyey ama ka diyaarsan ee caafimaad ahaan la soo hubiyey in dadku cuni karo, waa in la nadiifiiyaa gabi ahaan ka hor inta aan hilibka lagu ridin. Nadiifintaas waxaa la sameynayaa marka weelka la foorariyo si uumigu ugu baxo ama haddii ay lagama maarmaan noqtana la raaciyo biyo heerkulkoodu ka yareen 82 $^{o}$C. Isticmaalka qalabka wax lagu buufiyo ee loo adeegsado nadiifinta qasacadaha waa la ogol yahay. Waana in si weyn looga taxadiraa in gudaha qasacadaha wasakhi gaadho maydhista kadib;

2. Weelasha u baahan in si xoog leh loo xidho waa in si fiican loo xidhaa, oo waxa aan si fiican u xidhneyn lama ogolaanayo;

3. Weelasha waa in gebi ahaan dusha sare laga nadiifiyaa kadib marka la xidho;

4. Qasacadaha waa in deg-deg loo kuleeliyaa nadiifinta kadib;

5. Waa in shaqaale xirfad u leh oo uu kormeerayo baadhaha caafimaadka hilibku in qasacadaha iyo weelasha la daboolay ku sameeyaan baadhis iyo hubin in si khaldan wax loo xidhay ama si khaldan hilibka loogu riday qasacadaha, kuwaas oo aan aqbaleyn illaa laga saxayo khaladaadka jira;

6. Qasacadaha ama weelasha marka ay qalalaan oo ay si fiican u qaboobaan waxaa mar kale baadhis iyo hubin ku sameynaya shaqaalaha xirfada u leh ka hor inta aan loo gudbin dhismaha lagu shaambadeeyo. Hilibka lagu riday qasacadaha xumaadey waxaa loo aqoonsadaa mid aan la cuni Karin, haddii aan laga hagaajin qaladaadka lagu arkay qasacadaha muddo lix saacadood ah oo ka bilaamaya markii hilibka qasacadaha lagu soo riday;

    a) Haddii qaladaadka la ogaaday xilli maalin ah, qasacadaha iyo hilib-kooda waxaa la galinayaa qaboojiyayaal aan heer kulkoodu ka badnayn 3 $^{o}$C ,si loo qaboojiyo illaa maalin dambe laga gaadhayo oo qaladaadka laga saxayo;

    b) Qasacadaha aan hawo ku jirin ama kuwa la boox dhaafiyey ee aan waafaqsanayn xeerkan, waxaa lala sugayaa baadhaha caafimaadka hilibka si u furo qasacadaha, hilibka fiican ee ku jira qasacadahana u ansixiyo in dadku cuni karo;

7. Lagagama shaqayn karo qasacadaha gacmaha ilaa inta ay si fiican u qaboobayaan ugna engegayaan meelaha laga lingaxay. Waa in si aad ah looga taxadira in qasacadaha wax ku dhaceen ama la diismo ilaa intay ku qaboobayaan meeshii lagu lingaxay.

8. Hilibka qasacadaha ku jira lama siidayn karo ila intaa ay ku qaboobayaan hawada cimilada, waa inay muuqata in dushoodu fiican tahay oo aan la buux-dhaafin. Waana in ay yeeshaan dhinacyo soo xoodan, marka laga reebo dhinacyada la arkayo, dusha iyo hoostana ka soo xoodan. Waa in aanay hoos ku diisnayn. Dhinacyada iyo dabooyinku waa in lagu muujiyaa in hilib ku jiro. Waa in aanay jirin qasacado dhiman oo aan buuxin.

9. Dhammaan hilibka la qasacadeeyey waa in si joogta ah loo calaamadeyaa, iyada oo qasacada dusheeda lagu qorayo cadeyn tixraac qarsoon leh. Haddii kale la cadeeyo waxa ku jira qasacada, wakhtiga la qasacadeeye sida ku xusan jadwalkan. Tixraaca qarsoon macnihiisa waa in laga hela diiwaanka baadhaha caafimaadka hilibka ee masuulka ah.

10. Hilibka la qasacadeeyay waa in lagu habeeya qiyaas heer-kul ah iyo wakhti cayimaan taas oo sahlaysa in lagu hayo talaajad la'aan marka la safrinaayo ama bakhaar lagu haynaayo si caadi ahaan loogu kaydiyo.

11. Intii isku xidhma ahba hilibka la qasacadeeyey waa in kartoonkooda, qasacadahooda ama seledahooda lagu xidha calaamad aan kulaylka ku fasaqmin midabkooduna u bedelmi karin inta la kulaylinaayo.

12. Waa in qalab loogu talagala hilibka la qasacadeeyay qaarood lagu hayaa ugu yaraan 14 maalmood heer kul gaadhaya 37 $^{o}$C si loo hubsado in hilibka qasacadaysan wadamada loo dhoofinayaa shuruud la'aan ku qaataan.

Si kastaba ha ahaatee –

a) Muddada la doonayo in tijaabada hilibka qasacadaysan qaarkood si la ogaado in ay xun yihiin iyo kale waxay ku xidhan tahay xaaladaha sida diiwaanka meesha lagu habeeyey ama lagu qasacadeeyey iyo baaxada baadhis caafimaad ee lagu sameeyey hilibka qasacadaysan iyo qaabka iyo nooca qalabka la isticmaalay iyo awooda u saraysa ee qalabka la isticmaalay. Dhammaan xaladaha aynu soo sheegnay waa in uu ka fiirsada Baadhaha caafimaadka hilibku si u go'aamiyo muddada ay ku jiraan hubsiimada kawaan kasta ee hilibka laga dhoofiyo.

b) Haddii uu fashilaadi ku timaado agabka lagu hagaajiyey hilibka muddada uu jibaatada ku jiro, Baadhaha caafimaadka hilibku waxa uu xayiraya inta isku xidhma ah ama gebi ahaan, inta uu ka sugaayo in la hagaajiyo wax-soo-saarka.

13. Masuulka kawaanku waa in uu ku sameeya baadhis jooagta ah qasacadaha tijitaabada ku jira iyo kuwa aan ku jirin, hadba sidu ku amro baadhaha caafimaadka hilibku.

## QEYBTA 4 Calamadeynta iyo Sumadeynta Weelasha Hilibka, Kuwa Wax lagu doobo iyo kuwa lagu qardaaseeyo

1. Qodabada ku xusan Jadwalka I, qeybtiisa 8.12 iyada oo wax laga bedeli karo haday lagama maarmaan noqoto, waxa lagu dhaqan gelinaya calaamadayn iyo sumadaynta weelasha hilibka, doobyada ama qardaasyada hilibka lagu habeeyo, sida ku xusan jadwalkan marka laga reebo:-

**a)** Hilibka qaydhiin ee la qasacadaynaayo ama lagu qasacadeeyey sida awaamiirta hoos imanaysa jadwalkan. Waxa laga soo saari karaa kaliya kawaanada ku sharciyeysan sharcigan, waana in ay la socdaan calaamadaha muujinaya caafimaad qabkooda, shahaadadaha iyo waraaqaha kale ee sharcigani ku cad iyada oo la dhowrayo faya-dhowrka iyo badbaadada hilibka dadku cunaayo.

**b)** Calaamadaha caafimaadka ee lagu dhijinaayo hilibka qasacadaysan waa in lagu xidhaa doob kasta iyo weel kasta oo lagu qora lambarka cadaynaya kawaanka soo saaray.

**c)** Summada caafimaadka waxaa ka mid ah lambarka diiwaanka kawaanka ee hilibka soo saaray iyo lambarka baadhaha ccfimaadka hilibku ay soo ansixiyey qardaasaynta hilibka.

**JADWALKA VII**

**JAMHUURIYADA SOMALILAND**

**Xeerka NO…………………………………………………………………………….**

**Sharciga Baadhista iyo ilaalinta hilibka, No…….......ee………... [Sanadka]**

Iyada oo la adeegsanayo awoodaha ku xusan Qodob-ka 13 (1) (j) ee Sharciga baadhista iyo Ilaalinta hilibka………… [Sanadka], Wasiirka iminka haya adeega caafimaadka xoolaha waa inuu soo saara xeerarkan-

**Sharciga baadhista iyo ilaalinta qawaniinta soo dejinta hilibka**

1. Sharcigan waxaa loogu yeedhaa Xeerarka baadhista iyo ilaalinta soo dejinta hilibka.

**2.** Ereyada iyo odhaahda gaagaban ee halkan lagu adeegsanayo waxay la micna yihiin macnaha sharciga looga yaqaan**.**

**3.** Qofna hilib kuma soo dejin karo dalka llaa soo dejintiisa ay waafaqsan tahay:-
.
   a) Wuxuu ku soo dejin karaa ruqsad uu bixiyey Agaasimahu, Ama

   b) Ujeeddo gaar ah loo bixiyey.

4. Waa in loo qortaa arji agaasimaha ama wkiiilkiisaa oo uu qoraal ku wakiishay lagaga codsanaayo soo dejinta hilibka.

5. Waa in arji loo qorta qaab tusmaysan. Waana in ay la socota khidmad uu agaasimuhu ku soo saaray xeer cadaynaya.

6. Waa in agaasimuhu marka arjiga uu helo, waa in uu muddo 7 casho ah oo ka bilaabmaysa maalinta uu helay arji uu go'aankiisa oo qoraal ugu jawaabaa codsadaha. Haddii codsaduhu shuruudaha uu buuxiyey hilib soo dejinta waa in agaasimuhu siiya foomka ruqsada.

7. Haddii Agasaimaha uu diido in uu bixiyo ruqsada soo dejinta hilibka waa in uu ugu sheega codsadaha sida ku cad xeerka 6, isaga oo cadaynaya sababaha uu u diiday.

8. Qof kasta oo salooga go'aanka agaasimaha sida ku cad xeerka 6, wuxuu dib ugu qoranayaa arji wasiirka muddo 7 casho gudahood ah oo ka bilaabmaysa maalinta go'aanka lagu soo wargeliyey. Waxaa kama dambayn noqonaya go'aanka wasiirka.

9. Agaasimuhu isaga oo eegaya danta guud ee dadweynaha wuxuu xayiri karaa ama ka qaadi karaa ruqsada lagu bixiyey shrcigan ama wuxuu ku soo rogi karaa shuruudo dheeraad ah oo cusub ruqsad hore loo bixiyey.

10. Qof kasta oo arji u qortay ku sheega warar uu ogyahay in ay been yihiin oo uu wax gaar kaga been sheegayo, wuxu galay dembi. Waana lagu qaadaya dambigiisa…………………………

11. Ruqsada soo dejinta hilibka------

   a) Waa in qofka hilibka soo dejidanaya waa in uu ruqsad u haystaa ka hor inta shixnada hilibku soo gaadhin meesha ay dalka ka soo gelayso. Hilib kasta oo la soo dejiyo intaan ruqsada la siin waa in lagu xayira dekeda uu ka soo gelayo ilaa inta laga helaayo ruqsad.

   b) Ruqsadu waa in ay ku ekaata hal shixnad kaliya, haddii aanay ruqsadu ogolayn in ka badan

   c) Waxa ruqsada lagu bixin kara meel uu agaasimuhu ogolaaday in laga soo dejiyo kaliya

12. Hilibka ruqsada soo dejinta la siiyey:-

   a) Waxa wadanka laga soo gelin kara goobta lagu cadeeyey ruqsada

   b) Waana in lagu soo geliya muddada ku cad ruqsada.

   c) Waa in lagu dejiyaa meesha uu ka soo galay, haddii la fuliyey shuruudaha lagu cadeeyey ruqsada.

d) Waa in lagu kaydiyo meel iyo hab uu go'aamiyey agaasimuhu. Ilaa inta xaaladaha caafimaad ama shuruucda kale ee ku tilmaaman jadwalkan ama ruqsada lagu daqmayo. Iyo

e) Inta aanu qaadan soo dejiyuhu hilibka waa in baadhaha caafimaadku ku sameeyaa baadhista caafimaad iyo tijaabooyin gaar gaar.

13. Gaar ahaan, hilibka la soo dejiyeyinta lala sugayo baadhista caafimaadka ama waxyaalaha kale ee lagula baxayo, waa in lagu xereeyaa meel qabow si loo xaqiijiyo:-

a) In aan ciidi ku dhecin, sadhoobin ama xumaanin ama

b) In aan wax kale oo sadhaysani ku jirin qolka qaboojiyaha ee hilibka la dhigayo.

14. Baadhaha caafimaadka hilibka ama qof kasta oo sharci kasta oo qorani uu u ogolaanaayo in ay ka shaqeeyaan arimaha la xidhiidha soo dhejinta hilibka waa in uu xooga saara amaanka uu ku xaqiijinayo in aan shixnada ama qayb ka mid la qaadin ilaa inta ogolaanshaha u dambeeya la helayo iyo in dhamman la hayo warqadaha siidaynta.

15. Talaabooyinka caafimaad ee uu raacayo baadhaha caafimadka hilibku inta uu hilibku ku jiro qolka kaydka ee qaboojiya leh, waxa ka mid ah:-

(a). Inuu ku sameeyo hilibka baadhitaan caafimaad oo sugan, si uu u xaqiijiyo in hilibka in la tuurayo iyo in dadku cuni karo. Haddii aan la cuni Karin waa in la tuuro, amrana in loo tuuro sida sharcigu in farayo.

(b). In la cadeeyo in shahaadadaha baadhista caafimaadka ee hilibku ka wato wadanka soo dhoofiyey in ay waafaqsan yahiin ruqsada lagu soo dejiyey.

(c). In lala socdo sida loo soo maamulay heer-kulka lago soo kaydiyey intii uu safarka kaga soo jiray dalkii laga keenay.

d) In la hubiyo muddadii uu kaydinta safarka ku soo jiray in aanay wax sadheeya ama xumeeya soo gaadhin kaydintiisa

.

e) In uu ka qaato tusaalayaasha tijaabooyinka.

f) In uu la socdo oo eego jawaabaha ka soo baxa baadhitaankii lagu ku sameeyey tijaabooyinka uu ka soo qaaday shixnada hilibka.

g) In uu qaado talaabo kasta oo lagama maarmaan ah oo uu ku xaqiijinaayo in hilibka la keenay aanu wax cudurada xoolaha keenin dalka.

16. Haddii Agaasimaha ogaado hilib aan soo dejintiisu aanay waafaqsanayn awaamiirta shuruucdan ama ruqsada hilibka wuxuu soo jeedinayaa in aan qayb ama dhammaantiiba la soo dejin, ama lagu soo dejiyo xaaladaha isugu uu tilmaamo in ay lagama maarmaan tahay.

17. Qof kasta oo ka horyimaada sharciga halkan ku qoran waxuu gelayaa dembi, waana lagu qaadayaa dambigaa uu galay……………..

**JADWALKA VIII**

**JAMHUURIYADA SOMALILAND**

**Xeer NO………………………………………………………………………………….**

**Sharciga Baadhista iyo Ilaalinta Hilibka, No………..ee……….. [Sanadka]**

Iyada oo la adeegsanayo awoodaha ku xusan Qodobka 18 (1) (n) ee Sharciga Baadhista iyo Ilaalinta Hilibka………… [Sanadka], Wasiirka iminka haya adeega caafimaadka xoolaha waa in uu soo saara xeerarkan:-

**Sharciga Baadhista iyo Ilaalinta Shuruucda (Khidmada Baadhitaanka)**

1. Sharcigan waxa loogu yeedhaa Xeerarka Baadhista iyo Ilaalinta (Khidmada Baadhitaanka) .

2. Ereyada iyo odhaahyada gaagaban ee halkan lagu adeegsanayo waxay la micna yihiin macnaha sharciga looga yaqaan.

3. In Wasiirka uu ka tanaasulo ma ahee, waa in dawladda la siiyaa lacag yar oo khidmad ah oo ku saabsan baadhitaanada Caafimaad ee lagu sameeyo xoolaha la gawraco sida ku qoran sharcigan, lacagtaas khidmada oo leh qiimo kala duwan neefkiiba waa sedan hoos ku xusan:-

| | Shs. | Cts |
|---|---|---|
| **1. Lo'da** | …………………………………. | |
| **2. Iddaha** | …………………………………. | |
| **3. Riyaha** | …………………………………. | |

4. **Diggaaga** ……………………………….

5. **Geella** …….…………………………..

4. Lacagtan khidmada ah waxaa qaadaya baadhaha caafimaadka hilibka iyada oo naqad ah markuu samaynaayo baadhitaanka. Haddii wax kale lagu bixinaayo waa in laga heshiiya hadba sida duruufuhu saamaxaan.

5. Waxii ribo waxa diidaya Shareecada Islamka iyo wasiirka, laakiin khidmada baadhitaanka waxa gownaya wasiirka hadba wakhtigaa ilaa wakhti.

**JADWALKA (IX)**

**JAMHUURIYADA SOMALILAND**

**Xeer NO……………………………………………………………………………….**

**Sharciga Baadhista iyo Ilaalinta Hilibka, No………..ee……….. [Sanadka]**

Iyada oo la adeegsanayo awoodaha ku xusan Qodob-ka 18 (1) (m) ee Sharciga Baadhista iyo Ilaanta Hilibka………… [Sanadka], Wasiirka imika haya adeega caafimaadka xoolaha waa in uu soo saara foomamkan:-

**FOOMAMKA QORAN**
**FOOM-KA SHBIH/………………**

**Codsiga ruqsada dhismaha kawaanka**
**Rudsada, cuboonaysiinta iyo bedelaada**

**1. Tafaasiisha codsadaha**

Magaca Codsadaha ………………………………………………..

Sanduuqa boosto/Cinwaano kale ……………………………….

2. Waxaan halkan ku codsanayaa in la ii soo saaro/la ii cusboneysiiyo/la ii bedalo warqada ruqsada . Haddii codsigu uu yahay bedelasho sheeg sababta aad u bedaleyso (ku lifaaq cadeymo muujinaya sababta aad u dooneyso in aad bedelato)…………………………………………………………………………………….

……………………………………………………………………………………………………

……………

**3. Tafaasiisha kawaanka gowraca, iwm.**

Magaca iyo derejada/heerka kawaanka/qalabka ( qeex midkuu yahay hilib dhoofiye,hilibka dalka gudihiisa, ama mid tuulo ……… . …………… ……… ………

……………………………………………………………………………………………………

Sanduuqa boosto/ iyo cinwaanada kale ee kawaanku leeyahay: ……………………

Halka uu ku yaalo kawaanku(Sida Magaalada/Degmada ama tuulada)………………………………………………………………………………Lambarkii hore ee diiwaanka iyo ruqsada (haddii ay jiraan)…………………………………………………………………

Nooca xoolaha lagu qali doono ma lo'da , iddo iyo riyo, diggaag ama kuwa kale (Caddee)……………………………………………………………………Tirada Isku cel-celiska guud ee wax-soo-saarka kawaanka todobaadkiib…………………………………………………………………

Wakhtiga gowraca iyo inta uu soconayo ……………………………………………………………

**4. Degaanka iyo shaqaalaha, IWM**

Qaabka dhismaha/muuqaalka/deegaanka ku xeeran kawaanka la dhisayo…………………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………………………

Illaha biyaha laga helayo iyo mugga biyaha la isticmaalayo (Litre ahaan u caddee).Sheeg haddii ay jiraan haamo biyaha lagu keydiyo oo kale

……………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………………………

Tirada shaqalaha ku filan kawaanka, jinsigooda, heerkooda tababarka iyo wax-barasho guud ahaan………………………………………………

5.haddii uu leeyahay codsaduhu tafaasiil dheeraad ah ( haday jirto)... ……………………

……………………………… …………………

Aniga oo ah qofka hoos ku saxeexan, waxaan halkan ka cadeynaya in warbixinta aan kor ku qoray ay tahay mid run ah inta aan ka xusuusto. Waxaan fahan sanahay inay ku tahay dembi sharcigga baadhista iyo ilaalinta hilibka in warbixin been abuur ah lagu qoro codsigan.

Saxeexa Codsadaha: …………………Taariikh …………………

Meesha…………………………………………………………(*Ku lifaaq sawiro si xirfadeysan loo xardhay oo ka turjumaya Kawaanka (haddii ay jirto).

**JAMHUURIYADA SOMALILAND**

**Sharciga Baadhista iyo Ilaalinta Hilibka**

**FOOMKA SHBIH/Xeer. NO……………**

**Ogolaanshaha ruqsada uu ku howlgelayo kawaanku IMW (Hore loo bixiyey/la cusboonaysiinayo/la bedelayo)**

**Ruqsada kawaanku ku howlgelaayo waxa loo soo saaraya iyada ah (Hore loo bixiyey/la cosboonaysiinayo/la bedelayo)**

(Magaca Codsadaha) uu kaga howgelayo…………………………………………………

(Magaca kawaanka) oo tafaasiishiisu tahay sida hoos ku xusan iyada oo la waafajinaayo qaybta 11(5) ee xeerka baadhista iyo ilaalinta hilibka…………….(sanadka sharciga)

Magaca iyo nooca kawaanka ……………………….

Faahfaahinta kawaanka ……………………….

Heerka/derejada kawaanka …………………………

Magca masuulka …………………………

Cinwaanka Kawaanka ……………………………….

Xaaladaha gaarka ah ee nooca kawaanku ku shaqayn karo …………………………..

Waxa lagu shaqayn kara ruqsadan ilaa ……………………..(maalinta, bisha iyo sanadka) waana in laga hela kawaanada kor ku xusan marwalba.

Saxeexa sarkaalka bixiyey …………………………..taariikhda…………………

Shaabada rasmiga ah ……………………………………

**JAMHUURIYADA SOMALILAND**

**Sharciga Baadhista iyo Ilaalinta Hilibka**

**FOOM SHBIH NO………………………………**

**Codsiga kawaanka/qalabka meel kale loogu rarayo**

**1. Qaabka Codsiga**

Waxaan halkan ku codsanaya in ruqsad la ii siiyo in aan kawaanka ka raro ……………………….. (meesha u hada ku yaalo kawaanku) oo aan u raro ……………..(meesha cusub)

Waxaan cadaynaya in aan wax isbedel ah lagu samayn qalabka, heeka iyo derejada kawaan intii ruqsada hore loogu bixiyey oo sidii uun yihiin.

**2. Faahfaahinta kawaanka**

Magaca iyo lambarka diiwaan gelinta kawaanka…………………………………………………….

Faahfaahinta qalabka iyo kawaanka ……………………………………………………….

Lambarka diiwaann gelinta ruqsada ……………………………………………

**3. Faahfaahinta rarida Kawaanka (haddii ay suuragal tahay)**

Faahfaahinta meesha cusub iyo sababta keentay in la raro………………………………….

Saxeexa codsadaha……………………..taariikhda………………………..

(Ku lifaaq khariidada meesha cusub ee kawaanka iyo xidhiidhka shaqada dadka agagaar kwaanka degan iyo dhismayaasha)

**JAMHUURIYADA SOMALILAND**
**WASAARADA XOOLAHA**

**FOOM/SHBIH No…………………..**

**Codsiga wax ka bedelida iyo wax ku darida dhismaha kawaanka.**

**1. Qaabka codsiyada**

Waxaan halkan ku codsanayaa in ruqsad la ii siiyo inaan wax ka bedelo/ ku kordhiyo dhismayaasha hoos ku xusan iyada oo waxii faahfaahin ahina ku lifaaqan yihiin.

**2. Faahfaahinta dhismayaasha**

Macaga dhismayaasha……………………………………….

Faahfaahinta dhismayaasha ……………………………….

Lambarka diiwaan gelinta kawaanka………………………………….

Lambarka ruqsada maamulaha ………………………………………..

Cinwaanka boosta/cinwaanada kale ee dhismayaasha…………………….

Cinwaanada meesha u ku yaalo kawaanku (iyado oo ay jiraan degmada iyo tuuladu) ……………………………………………..

3. **Faahfaahinta mulkiilaha iyo maamulaha**

Magaca mulkiilaha/maamulaha……………………………………………………….

Cinwaanka boosta/cinwaanada kale ee codsadaha ………………………………………………

Cinwaanka codsadaha……………………………….

Saxeexa codsadaha……………………..Taariikhda………………………………..

Ku lifaaq sawirada/nuqsadaha waxaa la bedelay iyo khariidada tilmaamaysa dhismayaasha iyo xidhiidhka cusub ee ka dhexeeya dhimayaasha la jaarka ah, deegaanka iyo shaqooyinka dadka

**JAMHUURIYADA SOOMAALILAAND**

**Wasaarada Xanaanada Xoolaha foomka dhoofinta SHBIH, NO………..**

**Shahaadada Baadhitaanka Caafimaadka ee xoolaha/ wax-soo-saarka**

Aniga oo ah qofka hoos ku saxeexan waxaan cadaynayaa aniga oo raacaya sharciyada iyo xeerarka caafimaadka xoolaha ee jamhuuriyada Soomaalilaand, in aan maanta baadhitaan caafimaad ku sameeyey xoolaha wax-soo-saarkooda ee hoos ku qoran, waxaanan cadaynayaa in aanan arag wax calaamad ah oo muujinaaya cuduro la kala qaado. Xaalada caafimaad ee xooluhuna waa kuwo fiican, mana jiraan war sheegaya in halka laga keenay xoolaha/wax-soo-saarka xoolaha ay ka jireen wax cuduro ahi.

Goobta baadhitaanka……………………Gobolka…………………

Ganacsiga……………………….

Meesha laga keenay xoolaha…………………………habka ku yimaadeen…………………

Shahaadad hore haday jirtay………………………

Halkay ku socdaan…………………………habka ay ku tegayaan………………………..

| Tirada Xoolaha Nool | Wax-soo saarka Xoolaha (Nooca, tirada) |
|---|---|
| Lo' | Saan |
| Ido | Harag |
| Riyo | Hilib |
| Geel | Dhiig |
| Kuwa kale | Kuwa kale |

*Isticmaal warqad siyaado ah haddii xoolaha hal hal loo kala soooca, sida lifaaq yar.*

Faallo…………………………………………………………………………………………

Magaca Madaxa Baadhaha Caafimad Hilibka……………………………………..

Saxeexa……………………………………….

khidmadaha SL/Sh…………………………..

Taariikhda la baadhay…………………………. Dhicitaanka shahaadada……………………..

Noqolka midabakoodu yahay cadaanka waxa la siinaya mulkiilaha

Koobiga midabkoodu yahay buluuga waxa loo diraya isuduwaha Gobolka

Koobiga saddexaad ee midabkoodu yahay casaan khafiif ah wuxuu ku hadhaya buuga

**JAMHUURIYADA SOMALILAND**

**Sharciga baadhista iyo ilaalinta hilibka**

**FOOMKA SHBIH NO…............**

**Sharcigga Baadhista iyo Ilaanta Hilibka (Shahaadada rarida)**

**Foomka Shahaadada ee rarista hilibka ee lagu bixiyey xeerka10 (1) ee shuruucda safrinta hilibka ee hoos imanaaya jadwalka IV**

Ruqsadan waxaa lagu bixiyey safrinta hilibka ku qeexan xaga hoose ………………………………………………………………………………………………………… ………………………………………………………………………………………………………… ………………………………………………………………………………………………………… ………………………………………

Ka……………………………………………………………………………………………………....

Ku……………………………………………………………………………………………………...

Mulkiilaha Hilibka ……………………………………………….ee………………………………..

Lambarka Ruqsada gaadiidka ……………………………………………………………………...

Lambarka uu ku diiwaan-gashan yahay gaadiidku …………………………………………………...

Magaca Qofka masuulka ka ah shixnada hilib-ka…………………………………………………..

……………………………………………………………………………………………………….

Magaca Darawalka…………………………………………………………………………………...

Magacyada shaqaalaha…………………………………………………………………………….

Waqtiga iyo taariikhda Bixitaaanka ……………………………………………………………….

Shaabadda sharciga ah …………………………………Baadhaha caafimaadka hilibka……………………

Shuruudaha;

I. La isuma dhiibi karo
II. Waa in loo isticmaalaa hal shixnad keliya
III. Waa inuu heystaa Qofka Shixnada lehi